# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### Kal-fadhigii 43aad Fadhigii17aad

**01 September 2020**

**Quraanka: -** Md. Maxamuud Axmed Obsiiye

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe Maxamed Faarax

Ajandaha Fadhiga:- Doodda Xeerka Guud ee Doorashada Qaranka iyo Codbixiyayaasha.

**Md. Cabdiraxmaan Cismaan Caalin** (31min 14sec):- Mudane Gudoomiye, Mudanaasha iyo marti sharafta kale ee Golaha fadhida Observers ka u ah Golaha waan salaamayaa, saaka waxaan doonayaa in aan ka hadlo xeerkan muhiimka ah ee mudada faraha badan la inaga sugayay eediisuna Golahan saarnayd, waxaanan saaka ku faraxsanahay hadii aynu xeerkan si nabad galyo ah ku dhamayno aanay jirin eed danbe oo la inoo raacayaa ee kuwii is-qab-qabsan jiray dibna u dhigi jiray doorashada la qabsan doono, inana aan dib la inoo odhan doorashada ayay jiidayaan iyo inay sii fadhiyaan ayay doonayaan.

Ugu horayn waxaan xeerka eegi doonaa wax-ka-beddelkii gudidda Arimaha Gudahu, run ahaantii aad iyo aad ayaan ugu mahad-naqayaa shakhsiyan waayo waxa ay soo qabteen hawl aad iyo aad u muhiim ah, oo aanay deg-degsiimo ku jirin sida xeerka ka muuqata, marlabaadna mahad gaar ah ayaan u hayaa Gudidda.

Waxaan leeyahay wax-ka-beddelka gudiddu waxa uu ku jogaa qodobka 156aad ee ha lagu daro wax-ka-beddelka qodobkan 157aad ee xeerka. **Qodobka 17aad ee farqadiisa 5aad** ee ay gudiddu ku soo dartay waan taageersanahay. **Qodobka 52aad farqadiisa 3aad** ee u dhgan sidan; Wakiillada Xisbiyadu way diiwaangelin karaan wixii cabasho ah ee arrimahaas ku saabsan. Waxaan halkaa ku darayaa "*iyada oo loo raacayo procedure ka aasaasiga ah ee qaabka cabashada loo gudbinayo*".

**Qodobka 76aad** ee gudiddu wax-ka-beddelka ku samaysay, hadii aynu eegno xeerka shaqaalahu waxa uu dhigayaa Qodobkiisa 2aad in xeerkaa lagu xukumayo shaqaalaha joogtada ah oo loo yaqaan dhamaan shaqaalaha hay'adaha dawliga ah ka hawl gala oo dhamaantood hoos yimaada hay'ada shaqaalaha, sidaa awgeed Komishanka doorashooyinku ma hoosyimaadaan hay'ada shaqaalaha Dawlada, markaa waa in aynu ka saarnaa komishanada oo dhan, waayo shaqaalaha ka hawl-galaa waxay hoosyimaadaan hay'adda shaqaalaha laakiin masuuliyiintoodu ma hoosymaadan Hay'adaa.

Sidaa awgeed maadaama oo ayna la xuquuq ahayn shaqaalaha joogtada ah ee qaata xuquuqda iyo mushaharka joogto ah, oo masuuliyiintaasi marka uu xilku ka dhamaado halkaa ayay ka baxaan, wax mushahar ah oo joogta ahna ma qaataan, markaa lagama mamnuuci karo in ay siyaasada galaan, laakiin shaqaalaha joogtada ah oo ay ugu sareeyaan Agaasimayaasha guud kama qayb gali karaan, laakiin waa in komishankaa aan lagu dabaqin xeerkan.

**Point of order: - Md. Cabdilaahi Xuseen Cige;** Hadii hanti dhawraha guud ee qaranku uu ka mid yahay hay'adihii Garsoorka, hadii hay'ada shaqaalaha ay ka mid tahay kuwa shaqada qoraya, sidee ayay u noqonaysaa in wixii cadaalad noqdaan? Ama u cadaato in nin gole dhexe ka tirsani uu dhex-dhexaadnimadiisu sidee ayay u muuqan karaysaa? Markaa waxaanu ka soo qaadanay oo aanu leenahay hay'adaha sidooduba hadii aanu ahayn political post uu Madaxweynuhu uu magacaabay sida Wasiirad. Golayaasha Deegaanka, Golayaasha Baarlamaanka, dee intooda kale waa shaqaale u shaqeeya umada, markaa hadii uu hanti dhawrku uu Golaha dhexe soo fadhiisto sidoo ayuu u garsoorayaa?

**Md. Cabdiraxmaan;** waxaan odhan lahaa hay'adahaasi waa hay'ado siyaasi ah lagamana qaadi karo xuquuqdiisa ee waa in lala akhriyaa xeerka shaqaalaha Dawlada ayaan odhan lahaa. **Qodobka 82aad ee wax-ka-beddelka Gudidda farqadiisa 3aad ee ah; "**Waa inuu si rasmi ah u degan yahay degmada uu iska sharaxayo" waxaan soo jeedinayaa in la yidhaa **waa in uu 2sano ee u danbeeyay uu degaan degmada uu iska soo sharaxayo**.

**Qodobka 83aad Farqada 1aad,** waxaa ku jira qalad ee waa in la saxaa, oo halka hasayeeshee laga saaraa waayo inta kale ayaa isku xidhmaysa. Intaa ayaan ku dhaafayaa qaybta hore ee wax-ka-baddelka gudidu ku soo samaysaya, waxaan gudo galayaa qaybaha kale ee xeerka.

**Qodonka 2aad ee Eraybixinta;** waxaa isku noqnoqonaya erayada qaar oo codbixinta ku jira oo marba qaab yeelanaya erayadaas oo kala ah; **Diiwaangelinta cod-bixiyaha**, **Diiwaangelinta Muwaadinka**, **Diiwaanka Cod-bixiyaha, Diiwaanka Cod-bixiyeyaasha, Diiwaanka Gobolka ama Degmada, Diiwaanka Guud iyo Diiwaanka.** Ee waxaan soo jeedinayaa in erayadaa la isku saxo ee dib ha loo akhriyo waayo qaar ayaa dheeri ku ah.

**Golaha Degaanka:** - waxa loola jeedaa Golaha codbixiyayaasha degmadu u doortaan maamulka iyo sharci-dejinta D/Hoose ee degmada. Halkaa ay ku taalo Sharci-dejinta waa in laga saaraa waayo xeerka gobolada iyo Degmooyinka ayaynu ku saxnay oo aynu nyidhi waxaa loogu yeedhayaa consolers, waayo waxa kaliya oo ay samaystaan waa

xeer-hoosaadkooda ee xeerarka kale waxaa sameeyo ama ansixiya Golayaasha Baarlamaanka ee waa in halkaa laga saaraa **Xeer dajinta oo lagu beddelaa local consolers.**

**Xarun cod-bixineed: -** waxa loola jeedaa barta kulmisa hal ama in ka badan oo goobo codbixineed ah, oo la hawlgeliyo maalinta cobixinta. *Waa in la saxaa halkaasi maaha hal codbixneed*

**QAYBTA 2aad, Qodobka 3aad: Xayndaabka Adeegsiga Xeerka iyo Mabaa'diida Guud,** waxaan leeyahay mabaa'diida guud iyo xayndaabka xeerku isma galaan oo xadka xeer sharaxaad gooni ah ayuu leeyahay, halka mabaa'diida xeerkuna ay tahay waxa uu xeerku ku fadhiyo hogaamisana uuna xeerka ku yahay, markaa waxaan odhan lahaa halka **xayndaabka ah waa in Xadka laga dhigaa** oo ha noqodo qodobka 3aad Qodobka 4aad waa in uu noqdaa **Mabaa;diida Xeerka** waana in la saxaa oo aanay isku dhex milmin xadka xeerka loo sameeyay.

**Qodobka 4aad: Shuruudaha Cod-bixiyaha Farqada 6aad** oo u dhigan sidan; *Musharrixiinta u tartamaya doorashada Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynuhu waxa ay ka codayn karaan goob kasta oo cod-bixineed. Haseyeeshee hawl-wadeennada doorashada goobtu waa in ay arrintaas diiwaan-geliyaan. Waxase khasab ah in ay hal mar oo keliya* ay *codkooda dhiibtaan.* Farqadaasi waxay ka hor imanaysaa xeerka diwaan galinta oo aynu ku qornay "*muwaadinku waxa uu ka codaynkaraa goobta uu iska diwaan galiyay*" waayo Madaxweynaha iyo Ku xigeenkiisu waxay ka midyihiin muwaadinaanta sidaa awgeed waa inay ka codeeyaan meeshii ay ka diwaan gashanaayeen oo aanay xeerka jabin. *(3mudane ayaa taageeray)*

**Qodobka 14aad**: **Xubnaha Komishanka Doorashooyinka Farqadiisa 3aad oo u dhigan sidan;** Muddada xilka ee Komishanku waa 5 sano, oo ka bilaabmaysa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, waana loo cusboonaysiin karaa xilka. "***Waxaan soo jeedinayaa in la yidhaa hal mar ayaa loo cusboonaysiin karaa"***

**Qodobka 14aad**: **Xubnaha Komishanka Doorashooyinka Farqadiisa 5aad oo u dhigan sidan;** Komishanka xil-gudashadiisa wuxuu ku salaynayaa Dastuurka JSL, Xeerkan, iyo xeerarka kale ee khuseeya, shirarkoodu wuxuu ku qabsoomayaa Kooram, go'aanadoodu waxay ku ansaxayaan aqlabiyad."***Waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo aqlabiyada absolute majority ama badnaansho buuxa"***

**Qodobka 20aad**: **Xafiiska Goobta Cod-bixinta**; Haddii loo baahdo oo arrin deg deg ahi timaado, Hubiye ama xoghayaha waxa bedeli kara guddoomiyaha goobta cod-bixinta, iyadoo cod-bixintu socoto, waxaanu bedelkaas ka samayn karaa dadka goobta ku sugan ee leh xaqa cod-bixinta sida sharcigu xusayo. ***"Waxaan halkaa soo jeedinayaa in aan***

***dadka laga dhexdooran dadka waayo dadku dhex maaha ee cid ayay u socdaan ee waa in uu isku beddel ku sameeyo goobaha kale"***

**Qodobka 23aad**: **Reebanaanta fal kasta oo muujinayo inaanu dhexdhexaad ahayn,** qodobkan waxaan soo jeedinayaa in ciwaanka laga beddelo oo loo beddelo sidan; ***"dhex-dhexaad nimada shaqaalaha komishanka doorashooyinka qaranka"*** **waayo** reebanaantu waa sifo kale.

**Qodobka 33aad**: **Kaydinta diiwaangalinta cod-bixiyayaasha iyo soo saarista liisaska kama dambaysta ah ee u dhigan sidan;** Komishankuna waxa xil ka saaran yahay kaydinta, xafidaadda iyo soo saarida liiska kama dambeysta ah ee diiwaangalinta codbixiyayaasha 6 bilood gudahood ka hor maalinta doorasho kasta. ***"Halkaa ay 6bilood waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo 3bilood ka hor maalinta cod-bixinta"***

**Qodobka 35aad**: **Habka xafidaadda qalabka diiwaangelinta farqadiisa 2aad oo u dhigan sidan;** Meelaha ay jirto gaadiid xumo qalabka diiwaangelintu waxa ka mas'uul noqonaya diiwaangeliyaha oo marka uu shaqada dhameeyo hal mar u gudbinaya diiwaangeliyaha Degmada ama Gobolka, hase yeeshee mas'uulka diiwaangeliyaha ah waxa uu xil ka saaran yahay qorista iyo xafidaada diiwaanadda hawl-maalmeedka diiwaangelinta oo dhan. ***"Halka ay ku qorantahay hal mar waa in la saxaa wax looga jeedo"***

**Qodobka 43aad**: **Habka diiwaangelinta cod-bixiyeyaasha farqadiisa 2aad oo u dhignayd sidan;** Liiska diiwaanka cod-bixiyayaasha waxa soo saaraya Komishanka Doorashooyinka Qaranka Lixbilood (6) gudahood xilliga doorshada. ***"Waxaan soo jeedinayaa in sidii markii hore aan soo jeediyay laga dhigo 3bilood ka hor maalinta cod bixinta***"

**Qodobka 44aad**: **Shaqada komishanka doorashooyinka qaranka ee diiwaangelinta Farqadihiisa 1aad iyo 4aad oo u dhiga sidan;** Waxa uu dalka Somaliland ka dhaqan-gelinayaa hawsha diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha ka hor taariikhda doorashada**.** ***"Waxaan soo jeedinayaa sidii aan hore u soo sheegay waa in laga dhigaa 3bilood ka hor maalimta doorashada***" iyo farqada 4aad oo u dhigan sidan; Wuxu dib-ufuris ku samaynaya diiwaanka cod-bixiyayaasha ka hor doorasho kasta, Komishanka ayaa go'aamin doona hanaanka iyo habka dib-ufurista. ***"Halka ay ku qorantahau Wuxuu dib-ufuris ku samaynayaa diwaanka cod-bixiyayaasha ka hor doorasho kasta "waxaan soo jeedinayaa in la cayimo wakhiga"***

**Qodobka 51aad**: **Habka iyo goobaha diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha farqadiisa 3aad oo u dhigan sidan;** Sidoo kale waxa uu Komishanka Xeer- hoosaad ku saaraya in cod-bixiyuhu badelan karo goobta cod-bixinta doorashada ka hor ***" waxaan soo jeedinayaa in lagu daro ka hor doorasha iyo kadib doorasha"*** waayo waxa uu odhan karaa dhibaatada ayaa jirta ee ha la iga beddelo wuu odhan karaa.

**Qodobka 52aad**: **Wakiillada Xisbiyada/Ururada qaranka ee diiwaangelinta codbixiyaha farqadiisa 3aad oo u dhigan sidan;** Wakiillada Xisbiyadu way diiwaangelin karaan wixii cabasho ah ee arrimahaas ku saabsan. ***Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro "iyaga oo raacaya nidaamka u dajisan habka cabashada ayay ku diwaan galin karaan"*** **waayo** sida baryihii dhawayd dhacday iya oo aan nidaamkii la soo marin ayaa ka dib cabashooyin laga sheegtay, markaa waa in ay cabashooyinku cadaadaan procedure koodu goob ilaa national.

**Qodobka 79aad: Musharaxiinta Doorashada ku Guul-Daraysta Farqada 7aad oo u dhigan sidan;** Murashixiinta dumarka ahi iyo kuwa beesha gabooye ee aan ku guuleysan doorashada golaha wakiiladu waxay keyd u ahaanyaan kuraasta saamiga ah ee khuseysaa. Kursigii saamiga ah ee banaanaada, waxaa buuxinyaa murashaxa kaydka xisbiga ay ka soo jeedeen kuwa banneeyay, ***"waxana loo raacayaa sida ay ku kala cod badnaayeen. Waxaan soo jeedinayaa in laga saaro maadaamo oo ay hore gudiddu ug saartay arimaha kootada iyo beelaha laga tirada badan yahay"***

**Qodobka 85aad: Qaabka soo Bandhigida Musharaxiinta farqada 1aad** Liiska Murashixiinta Golayaasha degaanadana waa in la geeyo xafiisyada doorashada ee degmooyinka ka hor 6-da galabnimo maalinta 75aad intaanay codbixintu dhicin, iyadoo ay dhan yihiin lifaaqyadiisa ku tilmaaman Xeerka. ***"Waxa aan fahmi waayay maalinta 75aad ee ha saxo halkaa"***

**Qodobka 85aad: farqadiisa 7aad iyo 8aad oo u dhigan sidan;**

7. Haddii mid ka mid ah murashixiinta Golayaasha Deegaanka ee Xisbiyadu/ururada Siyaasaddu uu geeriyoodo kadib marka lasoo gudbiyo liiska murashixiinta, waxa uu xisbiga ay khuseysaa xaq u leeyahay in uu soo beddesho 30 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta.
8. Xisbi/urur ma soo badelan karo musharixiinta degaanka 30 malmood ee doorashada ka horeeya ***"Waxaan soo jeedinayaa in labadaa farqadood la isku saxo"***

Mudane Gudoomiye, Gudoomiye ku xigeen iyo mudanayaal intaa ayaan ku soo gabogabaynayaa laakiin waxaan soo jeedinayaa xeerkani waxa uu u bahanyahay arrimo farsomo oo aynu khibrado badan oo hore aynu ka soo marnay oo intaas oo doorasho ayaynu soo marnay oo xeerarkan aynu isticmaalay markaa waa in waxyaabihii qaladaad ahaa ee aynu soo aragnay xeerkan lagu saaxaa.

**Md. Xuseen Axmed Caydiid** **(47min 59sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, mudnayaasha, saxaafada iyo xoghaynta Asalaamu Calaykum Warax Matulahi Wa Barakaatu.

Marka ugu horaysa waxaan ka hadlayaa soo jeedinta Gudidda, marka labaadna waxaan u gudbi doonaa qodobada kale ee xeerka.

**Qodobka 6aad** ee Guddidu ka soo talo bixisay malaha farqada 8aad oo waxa uu ku eegyahay **farqada 7aad,** oo halkaa Guddidu laba farqadood ayey sheegtay oo ay saartay oo farqada 8aad ka mid tahay. Waxa meesha ka muuqata in farqadihii 5aad iyo 6aad mid la isugu keenay. Ta todobaadna ay u soo guurayso tii 6aad.

Markaa isu keenida **farqada 5aad iyo 6aad** in yar oo qabyo ah ayaa ku jirta oo doorsahdii Madaxweynaha iyo ta Golaha Wakiilada farqadihii ka hadlayey ayaa mid la isgu keenay. Sida dastuurku u sheegayana laba Qodob ee kala khuseeyana lagu xusay, markaa halkaa waxa ka maqan ama Golaha Wakiilada. Waxay u qoran tahay; "Haddii doorashada Madaxtooyada ay cadaato in aanay ku qabsoomi Karin wakhtigii loo cayimay" **Waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo si haddii Doorashada Madaxtooyada ama Golaha Wakiilada.** Xeer Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaanada Cod-bixiyayaasha Talo-bixinta Guddida laga beddelo in ahaan.

**Qodobka 1aad:** Magac xeerka ha loo dhigo sidan; Xeerkan waxa loogu yeedhayaa Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaangelinaha cod-bixiyaasha.

**Qodobka 6aad:** Wakhtiga qabashada Doorashooyinka. Guddidu halkaa ay ka tyidhia "waxa laga saaray Qodobka 6aad farqadiisa 5aad iyo 8aad" dadaba Qodobka 6aad ma laha farqada 8aad. Farqada la saaray ee 5aad waxa halkeedii la isugu keenay wixii ku kala qornaa farqada 5aad iyo 6aad. Waxaa soo jeedinayaa in laba farqadood ee mid la isugu geeyey loo dhigo sidan:

**Farqada 5aad** "Haddii Doorashooyinka Madaxtooyada ama Golaha Wakiiladu ay cadaato inaanay ku qabsoomi Karin wakhtigaii loo cayimay, Waxaan ku soo kor **dhiyey "Ama Golaha Wakiilada ". Farqada 7aad** waxay noqonaysaa **farqada 6aad. Farqada 3aad:** Ereyga **"Mar kaliya wada qaban karaa" Waxaan soo jeedinayaa i**n loo beddelo **"Markiiba qaban karaa hal doorasho ama ka badan"**

**Qodobka 9aad: Shaqaalaha Dawladda iyo hay'adaha Dawliga ah.** Ciwaanka ha loo beddelo **"Saraakiisha Dawaladda"** maadaama oo erey bixinta ereyada dhigtay **farqadaha 1aad, 2aad iyo 3aad** ee talo bixinta Guddida ha loo dhigo sidan**:**

**Farqada 1aad:** Saraakiisha Dawladda looma oggola in ay isu sharaxaan ilaa dhammaadka farqadda, **Farqada 2aad:** saraakiisha dawladda looma oggola in ay ka qayb-galaan ololaha doorashooyinka xisbiyada/ururada.

**Farqada 3aad:** Saraakiisha dawladda Kama mid noqon karaan Xisbiyad/ururada hoggaankooda, Guddoomiyaha fulinta, Goleyaashooda Dhexe iyo Xubinimadooda waanay reeban tahay. **Farqada 4aad:** Shaqo-ka-tegidda ku xusan farqada 1aad ee Qodobkan. **Farqada 5aad:** Cadaynta shaqo-ka tegista looma diidi karo qofka shaqaalaha ah ee shaqada uga tegaya si uu musharax uga noqdo doorasho.

**Qodobka 16aad:** Xil-ka-qaadista Koomiishanka. **Farqada 2aad:** Ereyga "**yimaadaan"** ee Guddida ku beddeshey ereygii hore ee ahaa **"la dareemo"** waxaan ku beddeli lahaa sidan; **Farqada 2aad "**Marka arrimaha kor ku xuseen xisbi/urur qoraal kaga soo dacwooda, waxa Madaxweynuhu u magacaabayaa Guddi Madax-bannaan". **Farqada 3aad:** dembiyada eedaymaha la cadeeyo waxa yeelanaya masuuliyiinta heer doorasho ee dembiga galay iyo heerka ama heerarka wax-ka- qabashadooda lahaa ee ka baaqsaday, waxaanay ku mutaysanayaan xadhig u dhexeeya 2 ilaa 3 sanno.

**Farqadaha 3aad iyo 4aad ee Qodobka 16aad waxay noqonayaan farqadaha 4aad iyo 5aad ee Qodobka 16aad. Qodobka 82aad: Shuruudaha Musharaxa Golaha Deegaanka Farqada 10aad:** ereyga "Hanti mood iyo noolba ah" **ha loo beddelo** "Hanti mood ama nool ama labadaba ah" ku leedahay degmada uu ka sharaxan yahay, waana in uu musharaxa.

**b)** Degmada darajada **"A"** u diiwaangashan tahay degmada hanti ma**-** huurto ah oo u qiimaheedu gaadhayo 600,000 SL.SH (Lix boqol oo milyan oo shilin).

**t)** Degmada darajada **"B"** ugu diiwaangashan tahay degmada hanti ma-guurto ah oo qiimaheedu gaadhayo 400,000 SL.SH (afar boqol oo milyan oo shilin).

**j)** Degmada darajada **"C"** ugu diiwaangashan tahay degmada hanti ma-guurto ah oo qiimaheedu gaadhayo 300,000 SL.SH (saddex boqol oo milyan oo shilin).

**x)** Musharaxu wuxuu maxkamadda Gobolka ee degmada uu musharaxa ka yahay ama haddii aanay lahayn Maxkamad Gobol, maxkamadda degmada ee degmada uu musharaxa ka yahay ka soo qaadanayaan nuqul saxnimadiisa ay soo caddaysay (Certified copy) oo sharciga hantidiisa ma-guurtada ah oo aan xayiraadi saarnayn iyo caddaynta qiimaha Hantida.

**Qodobka 112aad Tallaabooyinka ka horreeya Cod-bixinta Farqada 1aad:** Erey "isaga oo ku hubninaya habka indhaha (Biometric identification)" Ha loo beddelo**, Farqada 1aad:** "isaga oo qofka kaadhka sita ku hubinaya habka ku kala saaridda wiilka isha (iris identification system).

**Qodobka 121aad Codad Xunaada ama lagu muransan yahay Farqada 2aad: Ereyga ah** "Waxaana loo raacayaa Qodobka 121aad ee Xeerka" **Ha loo beddelo sidan: Farqada 2aad:** "Waxaana ka go'aan qaadanaya xafiiska doorashada ee degaamada iyadoo loo

raacayo Qodobka 121aad ee Xeerkan, haddii xal looga waayana xeerka anshaxa Doorashooyinka ee Koomiishanka iyo Xisbiyada/ururada Siyaasada".

**Qodobka 166aad Laalid Qodobku waa farqada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ma laha. Farqada 1aad:** Guddidu wax ku dartay ee xeerka Lr 2007, halka qorani waa xeer Lr. 37/2007 Waxaan soo jeedinayaa in farqadda 1aad halka dambe laga raaciyo: **"Marka laga reebo Qodobbada xeer Lr.** 37/2007 ee ku tilmaaman faradda 2aad ee Qodobkan"

**Qodobka 2aad:** Erey-bixnta **Diiwaanka:** oo dhigan "Waxa loola jeedaa diiwaanka lagu qoro xogta muwaadiniinta ee goob doorasho kasta" **Ha loo dhigo sidan: Diiwaanka** "Waxa loola jeedaa diiwaanka lagu qoro xogta muwaadiniinta ee warqadda aqoonsiga". Waxaan ka saaray ereyga ah "iyo cod-bixiyeyaasha ee goob doorasho kasta" waayo hadda liiska cod-bixiyeyaasha goobta oo daabacan ayaa goob kasta la dhigayaa diiwaan xog lagu qorayaa ma jiro. **Gobol doorasho:** oo dhigan "Waxa loola jeedaa soohdimaha kulmiya degmooyin doorasho" **Ha loo dhigo sidan Gobol doorasho:** " Waxa loola jeedaa baaxadda dhul ahaaneed ee ku gudo-jira xuduudaha gobolku la leeyahay Gobolada kale ee dalka, ama xuduudaha Gobolka kale ee dalka iyo xuduudaha u dalku la leeyahay dal ama dalal kale, baaxaddaa dhul ahaaneed oo meel laga wada maamulo"

**Liis/Liisaska:** oo u dhigan "Waxa loola jeedaa magacyada musharraxiinta uu soo gudbinyey Xisbi/urur ee u tartamaya doorasho mucayin ah"**Ha loo dhigo sidan: Liis/Liisaska:** "Waxa loola jeedaa magacyada musharraxiinta uu soo gudbinyey Xisbi/urur ee u tartamaya doorasho mucayin ah ama magacyada cod-bixiyeyaasha ka diiwaan-gashan goob-doorasho ee xaqa u leh in ay ay goobtaa ka codeeyaan".

**Saraakiisha Dawaldda:** - ee u qoran "Waxa loola jeedaa shaqaalaha masuuliyiinta ah eek u siman agaasime guud iyo wixii ka hooseeya iyo madaxda hay'adaha Madaxa bannaan ee dawladda iyo wixii ka hooseeya iyo sidoo kale saraakiisha ciidamada darajo kasta oo leeyihiin, Xaga dambe ha laga raaciyo **"iyo hay'adaha Garsoorka"**

**Qodobka 4aad: shuruudaha Cod-bixiyaha Farqada 2aad ee u dhigan sidan:** "Waa in aanay da'diisu ka yaraan 16 sanno". Ha loo dhiho sidan: **Farqada 2aad ee u dhigan sidan:** "Waa in aanay da'diisu ka yaraan 15 sanno". **Farqada 5aad ee u dhigan sidan:** "Haddii qofkaan buuxin shuruudaha cod-bixintu qaato kaadhka cod-bixinta si khaldan waxa koomiinshaka Doorashooyinka Qaranku awood u leeyahay in uu ka joojiyo dhiibashada codka maalinta cod-bixinta marka sidaa la cadeeyo laguna qanco."

**Ha loo dhigo sidaas** haddii qof aan buuxin shuruudaha codbixintii uu galo kaadhka codbixinta si khaladan waxa gudoomiyaha goobta doorashadu awood u leeyahay in uu ka joojiyo dhiibashada codka meelintaa codbixinta marka sidaa ay ku qancaan hawlwadeenka goobta doorashadu.

**Foqradda 6aad** ee ka hadlaysa in ay musharrixiinta u tartamaya doorashada madaxweynaha iyo ku xigeenka madaxwayahu ka codayn karayn goob kasta oo ay doonaan, ereyada goob kasta oo ay doonaan ha loo beddelo goobta ay doonaan iyadoo hawlwadeenadu goobtu arrintaas ee waxase weedha faqraddan 6 aad u dambaysa ee "waxase khasaba ah in ay hal mar oo kaliya cod kooda dhiibtaan' ha laga saaro.

**Qodobka 14aad** Xubnaha Komishanka Doorashooyinka; ha Lagu daro tirsinga xubnaha faqradda 1aad tiro ka duwan ta Farqaddaha sida b, T, J, X.

**Xubinta 4 aad ee** Foqradda 1aad ee u dhigan. 4. Shaqaale dawladeed xubin barlamaan xubnaha golaha wasiiradda ciidan qaran iyo xubin xil u haysa urur xisbi kama mid naqon karo komishanka.

**Ha loo dhigo sidan; X)** Shaqaale dawladeed, xubin barlamaan, xubnaha golaha wasiirrada, ciidan qaran ama xubin xil u haysa xisbi/urur kama mid naqon karto komishanka.

**Faqradda 5aad** ee u dhigan sidan; **5)** Komishaanka xil gudashadiisa wuxuu ku salaynayaa dastuurka JSL, xeerkan iyo xeerarka kale ee khuseeya shirarkoodu wuxuu ku qabsoomayaa kooram, go'aamadoodu waxay ku ansaxayaan aqlabiyada.

**Ereyga koorama ha la** cadeeyo tirade xubnaha komishanka ah oo ha loo dhigo qaybta dambe ee faqraddan 5 aad sidan:

"Shirarkoodu Waxay ku qabsoomayaan marka ay shirka ansaxayaan fadhiyaan 5 (shan) xubnood, go'aamadooduna waxay dhinac loo bato"

**Qodobka 16aad: xil ka qadista Koomiishanka Farqada 1aad c)** ee u dhigan "marka uu ku kaco anshax-xumo, xatooyo, musuq-maasuq ama eex"

**Qodobka 25aad: Hawlwadeenada xafiisyada doorashada.** Ciwaanka xaga dambe ha laga raaciyo **"Diwaan-gelin" Farqada 1aad:** Xagga dambe ha laga raaciyo **"Diwaan-gelinta"**

**Qodobka 32aad: Dadka ay ka reeban tahay in la diiwaangelin Farqada 4aad ee u dhigan** "qofaan gaadhin da'da cod-bixinta (lix iyo toban jir). **Ha laga dhiga "Da'da 15 jir"**

**Qodobka 36aad: Hab-qoraalka Magac muwaadinka ee u qoran sidan.** Magaca muwaadinka waa in lagu qoro xuruuf la isla sar-gooyey, waana in aanay kala duwanaanin.

**Ha loo qoro sidan:** "Magaca Muwaadinka waa in lagu qoro xuruufta waaweyn (capital letters) AF Soomaali ah, waana in si wanaagsan loo tixgeliyaa shaqallada dhaadheer iyo shibnanayaasha laban-laama si magacna aanu ugu qormin siyaabo kala duwan.

**Qodobka 79aad Musharaxiinta Doorashada ku guul-daraysta Farqada 7aad** ee u dhigan sidan: Musharaxiinta dumar ahi iyo kuwa beesha gabooye ee aanu ku guuleysan doorashada golaha Wakiiladu waxay keyd u ahaanayaana doorashada kuraasta saamiga ah ee khuseeyaa. Kursigii saamiga ee bannaanada =, waxa buuxinaya musharaxa kaydka xisbiga ay ka soo jeedaan kuwa baneeyey, waxaana loo raacayaa sida ay ku kale cod badnaayeen.

**Farqada 7aad ee Qodobka 79aad** waxay raacayaan Qodobka 76 (5), 78 (2 iyo 3) ee Guddida soo jeedisey in xeerka laga saaro. **Farqada 3aad ee u dhigan sidan:** "Liisaska Mushraxiinta ururka/xisbiga waxa kale oo la soo raacinayaa" **Xagga dambe ha laga raaciyo xaraf "E" noqda oo u dhigan sidan: E)** Caddaynta ku laasha degamada Hantida uu xeerka sharciga

**Qoodbka 102aad: Galabka Goobta Doorashada. Farqada 7aad ee u dhigan sidan:** "Koomiishan waa inay xafiisyadooda degmo, Gobolka u diyaariso waraaqo cod-bixineed oo dheeraad ahoo ku lingaxan kiishash si loo waajib tahay in ay soo sababeeyaan, goobta cod-bixinta"

Waxaa soo jeedinayaa in farqaddan meesha laga saaro, waxay ka mid tahay arrimahii diiwaangelinta lagu galo doorashada ka hor la isticmaali jirey ee goob waliba barqinka waraaqo u soo qaylin jirtay. Kol haddii cod-bixiye kasta oo ka codaynaya goobta ay warqaddiisu cod-bixintu goobta u taallo 2% warqadaha xumaada in la diro waraqo kale oo aanay goobuhu u sinayn oo goobo gaar ah la geeyo.

**Qoodbka 121aad: codadka xumaada ama lagu muransan yahay. Farqada 1aad (f) ee u dhigan sidan:** "haddii codbixiyuhu calaamadiyo astaanta hal musharax wax ka badan oo kala xisbi/Urur ah" **Xagga dambe ha laga raaciyo erayada ah "ama isku xisbi/urur ah"**

**Qoodbka 148aad: Dembiyada la xyidhiidha diwaangelinta cod-bixiyeyaasha Farqada 1aad ee u dhigan** sidan "Qof kasta oo is diwaan-geliya in badan hal mar ama been ka sheega xogtiisa waxa uu mutaysanayaa ciqaab dhan 3 bilood oo xadhig ah iyo ganaax lacageed oo dhan hal milyan (1,000,000 SL.SH).

Waxaan soo jeedinayaa in ereyga **"xogtiisa"** lagu daba qabto ereyada ah **"ama xogta qof kale"**

Waxa kale oo soo jeedinayaa in Qodobka lagu kordhiyo farqada cusub oo noqota **farqada 3aad** farqadaha kale hoos u riixda una qoranta sidan: **Farqada 3aad "**Qof kasta oo aan muwaadin ahayn oo qaata kaadhka cod-bixinta wuxuu galay fal-dambiyeed waxaanu mutaysanayaa ciqaab dhan 6 bilood ilaa 2 sanadoood iyo dalka oo laga mustaafuriyo, kaadhkii uu qaatay la tirtiro, magaciisana laga saaro liisaska diwaan-gelinta"

**Qodobka 153aad Dacwadaha Doorashada Golaha Wakiilada Farqada 7aad ee u dhigan sidan** "Maxkamadda sare waa in ay dacwadaha doorashada Golaha Wakiilada kaga go'aan gaadhaan muddo 30 casho gudahood ah" **Xagga dambe ha laga raaciyo ereyga ah** "oo ka bilaabanta maalintii ay maxkamadda ku dhawaaqday natiijada rasmiga ah"

**Md. Ibraahim Mahdi Buubaa** **(36min 57sec):- Qodobka 6aad farqada 3aad** waxaan leeyahay ha laga saaro ama Koomiishanka doorashooyinku kaliya wada qaban karaa hal doorasho iyo ka badan haddii ay haboonaato" halka mar kaliya ha laga dhigo "mar kasta"

Qodobka 6aad ee qabashada doorashada waxaan kaga duwanahay hal qodob**. Farqadaha 4aad, 5aad iyo 6aad** waxay ka dhigeen iyaga oo la tashanaya xisbiyada haddii doorashadu qabsoomi waydo inay jaangooyaan, Madaxweynuhu ku soo saarayo digreeto. Waxay ka reebeen Golayaashii deegaanka.

Waxaan leeyahay haddii doorashada Wakiilada, Madaxweynaha iyo Golayaasha deegaanku qabsoomi waydo, waxay ka horimanayaa qodob dastuuri ah **Qodobka 84aad** ee sheegayaa go'aan ka gaadhista xiliga doorashooyinku dalka qabsoomayaa. Waxaan leeyahay ha lagu daayo waxa go'aan ka gaadhista iska leh Golaha Guurtida, iyaga oo la tashanaya Koomiishanka Doorashooyinka.

**Qodobka 17aad** awoodaha Koomiishan: waxaan la qabaa in Gudidd Arrimaha Guduhu siday u soo jeedisay loo daayo.

**Qodobka 18** ee Miisaniyada Koomiishanka Doorashooyinka Qaranka **farqadiisa 2aad iyo 3aad** waxay **farqada 2aad** u dhignayd sidan **"**Miisaaniyadda doorashooyinka waxa koomiishanku u isticmaalayaa si madax bannaan, iyada oo ay waajib tahay in xisaab xidh saddex bilood ah u gudbiyaan xisaabiyaha Guud"

**Farqada 3aad** waxay u dhignayd sidan "Miisaaniyadda Koomiishanka waxa hanti dhawraya, Hanti dhawraha Guud ee Qaranka, si waafaqsan xeerka Hanti dhawrka guud ee Qaranka"

Madax-xiga dooarshada waxa la xisaab celinayaa, marka ay dhamaato diiwaagelinta ama dooarshada socotaa, si looga badbaado iyada oo dooarshadii ama shaqadii socoto hanti dhawrka guud soo galo.

**Farqada 3aad ee Qodobkan 18aad** Waxa lagu hanti dhawri karaa digreeto madaxweyne oo kaliyaata, iyada oo la tixgelinayo dhex-dhexaadnimada Koomiishanka doorashooyinka Qaranka iyo madax-bannaanidiisa.

**Qodobada 41aad iyo 52aad** waxaan ku raacsanahay soo jeedinta ay sameeyeen Guddida Arrimaha Guduhu ee ay u dhigtay.

Qodobka 62aad Musharaxiinta u tartamaya xilka Madaxweynaha iyo ku xigeenku waxay bixinayaa deebaaji aan celis lahayn oo kala noqonaya Madaxweynaha 150,000 SL.SH iyo Madaxweyne ku xigeenka 100,000 SL.SH.

Waxaan soo jeedinayaa in la kordhiyo lacagtaas, waayo 100,000 SL.SH ama 150,000 SL.SH ee Madaxweyne bixinayaa waa $ 20,000. Waxaan ka dhigi lahaa halka 100,000 SL.SH-150,000 SL.SH halka 150,000 SL.SH – 200,000 SL.SH.

**Qodobka 69aad** waxaan ku dari lahaa farqad kale ama iyada ayaan kordhin lahaa "Musharaxiinta u tartamaysa xubinimada Golaha Wakiilada, waxay bixinayaan deebaaji aan celis lahayn oo dhan 60,000 SL.SH oo lagu bixinaayo xafiiska cashuuraha Barriga ee Wasaarada maaliyadda, marka laga reebo dumarka iyo beelaha la hayb-sooco".

**Qodobka 78aad:** Habka Qaybinta kuraasta. Iyada oo mudnaanta la siinayo danta Qaranka si ay doorashadu u qabsoonto qabaybinta kuraasta Golaha Wakiilada oo sidan hoose oo ah sidii 2005 oo ah

| | |
|---|---|
| Gobolka Maroodi-jeex | 20 kursi |
| Gobolka Togdheer | 15 kursi |
| Gobolka Awdal | 13 kursi |
| Gobolka Sanaag | 12 kursi |
| Gobolka Sool | 12 kursi |
| Gobolka Saaxil | 10 kursi |

Waxay ku dareen **farqada 3aad "Ama in dastuurka loo furo"** waxaan leeyahay ama wax la yidhaa xeerka ma gasho. Xaga horana waxay ku sheegeen in dastuurka loo furo, markaa labada go'aan waan mid ay raacaan. Waxaan leeyahay arrintani waa arrin siyaasadeed waana inay ku daayaan oo kaliya in dastuurka loo furo.

Waan ku raacsanahay in da'da laga daayo 25jir oo laga dhigo 30jir. Waxa kale oo aan raacsanay in shuruuda golaha deegaanka laga dhigo heer Jaamacadeed iyo waayo aragnimo shaqo oo Shan sanno ah. Sidoo kale waa inuu hanti mood iyo noolba leh ku leeyahay deegaanka uu iska sharaxayo. Waxa kale oo ay sheegeen in ay u diiwaangashan tahay hanti ilaa 600,000 SL.SH gaadhaysa.

Tani waxay fursad siinaysa dadka Hantida leh ee haysta lacag gaadhaysa ilaa 600,000 SL.SH, halka muwaadinkii kale ee xaqa u lahaa aanay fursad u helayn inay leeyihiin hanti u diiwaangashan oo gaadhays 600,000 SL.SH.

Waxaan soo jeedinayaa in farqadaas meesha laga saaro, waayo waxay kala faquuqaysaa sinaanta muwaadiniinta, 600,000 SL.SH marka la waydiiyo macnaheedu waxa weeye in aanay isa soo sharaxin. Ha loo daayo aqoon iyo waayo aragnimo, da'diisuna aanay ka yaraa 30jir.

Waxaan ku bedelayaa **Qodobka 82aad farqada 7aad** sidan "Qofka isku soo sharaxaya Golaha deegaanku, degmada uu iska soo sharaxayo waa inuu ku dhex leeyahay sumcad iyo karaamo"

Sumcada iyo karaamada ayaa ka fiican inuu leeyahay 600,000 SL.SH, waxaaba laga yaaba qof intaas haysaa in aanu ku dhex lahayn sumcad iyo karaamo tuna.

**Qodobka 111aad: Goobaha Cod-bixinta**

Goobaha cod-bixintu waxa jira meel aad u kala fog fog oo isku jira ilaa 30KM, taas oo xaqa caqabad ku noqon karta in qofkii muwaadinka ahaa ee xaqa u lahaa inuu is diwaangeliyo aany u suurta-gelin. Halka meelaha qaarna ay isku jiraa in yar 2KM. sidaa daraadeed waxaan ku darayaa farqad cusub oo ah " In koomiishanka doorashooyinku dib u eegis ku sameeyaan, iyaga oo la kaashanaya Wasaarada arrimaha Gudaha iyo Maamulka Gobolada iyo degmooyinka iyo Maayirada dalka, iyo in muwaadiniintu si siman u helaan Goobaha cod-bixinta iyo maalinta cod-bixinta.

Waa in aynaan inagu ku raacin in la yidhaa goobaha cod-bixinta kordhintiisa looma hayo kharash ku filan, laakiin loo baahan yahay inu muwaadiintu helaan caddaalad iyo sinaan.

**Qodobka 136aad;** waa inu magac muwaadinka lagu qoraa xarfo la isku sargooyey oo aanay kala duwanaanin oo farwaaweyn lagu qoraa ama far yar yar lagu qoraa. Waxaan ku darayaa waa in aanu xuruufta Englisha iyo carabi midna la soo qaadan oo af-soomaali noqdaa. Sida xuseen sheegay oo aan ku raacsanahay waa in la ilaaliyaa shaqalka dheer iyo shaqalka gaaban labadaba.

**Qodobka 148aad farqada 1aad:** Dambiyada la xyidhiidhka diiwaagelinta cod-bixiyayaasha. "Qof kasta oo is diwaangeliya hal mar ama in ka badan oo been ka sheega waxa uu mutaysanayaa xadhiga dhan saddex bilood iyo lacag dhan 1,000,000 SL.SH". Waxaan soo jeedinayaa in xadhiga laga dhigo hal sanno.

**Farqada 2aad: "**Qofka is diwaangeliya hal mar wax ka badan, waxa uu waayayaa xaqa cod-binta doorasho ilaa inta laga gaadhayo is diwaangelin dambe" **farqadani waxa lala akhriyayaa farqada 1aad, iyada oo ku dhacayo xadhiga halka sanno ah.**

**Farqada 3aad** "qof kasta oo aan ahayn muwaadin Somalilander ah oo is diwaangeliya, wuxuu mutaysanayaa ciqaab Shan bilood ah"

Waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo sanad iyo badh, maadaama oo muwaadinkii laga dhigay sanad. Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in lagu ganaaxo 2,000,000 SL.SH marka uu soo baxana la mustaafuriyo.

**Farqada 4aad** "Masuul kasta oo ka shaqaynaya diwaangelinta kuna xad gudba 3 bilood" waxaan ka saaray saddexda bilood, maadaama uu yahay masuul waana inuu ka xadhig bataa qofka caadiha ah.

"Qof kasta oo been abuur ka sameeya ama diwaangelinta waxa uu mutaysanayaa ciqaab dhan 3 bilood". Waxaan soo jeedinayaa in halkaa saddexda bilood ah lagu bedelo saddex sanno" intaas ayaan ku soo ga.

**Md. Siciid Cilmi Rooble (7min 00sec):-** Gudoomiye waad mahadsantahay waxaan aad u hambalyaynayaa oo runtii qodobadii aan ka hadli lahaa oo dhan ka hadlay xuseen Axmed Caydiid; oo si aad iyo aad u wacan uga hadlay *dhamaan toodna waan wada taageersanahay.*

Waxaan ka hadlayaa dhawr meelood oo aanu ka hadal, waxaa jirta Gudeemiye murashixiin xukun dacwadeed ku socdo, oo isaga oo soo baxay xukunkii dhaco, markaa xeerku waxaa loo baahanyahay in uu wax kasta ka hadlo ayaa loo baahanyaha.
Ama marka uu soo baxo ayuu Xukunkii ku dhacayaa isaga oo 5sanadood ahi, markaa marka uu xilka u soo baxo ee uu noqdo Maayir ama wakiil ayaa waxa uu isticmaalayaa awood oo muwaadinkii ay is-hayeen ayuu ku jiifsanayaa ***sidaa looga baaqsado waxaan soo jeedinayaa in lagu daro xeerka Qodobka 83aad Farqadiisa 13aad iyo 14aad*** **Qodobka 51aad Habka iyo goobaha diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha Farqdiisa 3aad** oo u dhigan sidan; Sidoo kale waxa uu Komishanka Xeer- hoosaad ku saaraya in cod-bixiyuhu badelan karo goobta cod-bixinta doorashada ***"xiliga diwaan galinta ayaan soo jeedinayaa in lagu daro"*** xiligaas oo kaliya ayuu beddelan karaa ee xilikale oo lafurayaa ma jirto.

**Qodobkaa 51aad Farqadiisa 3aad** ee uu Cabdiraxmaan Dheere soo jeediyay in la saxo waxaan soo jeedinayaa in sidan loo dhigo; "***Sidoo kale waxa uu Komishanka Xeer-hoosaad ku saaraya in cod-bixiyuhu badelan karo goobta cod-bixinta doorashada xiliga diwaan galinta".***

Sidoo kale waxaan **qodobkaa 51aad** waxaan ku daray **farqad 5aad** oo odhanaysa sidan ***" cayimida Doorashada ee Degmo ama Gobol waxaa go'aan ka gaadhistooda iska leh komishanka Doorashooyinka Qaranka iyaga oo kala kaashanaya Gudoomiyayaasha Gobolada iyo Degmooyinka"*** waa in komishanka loo fududeeyaa shaqadiisa.

**Qodobka 82aad Shuruudaha Murashaxa Golaha Degaanka** waxaan soo jeedinayaa in lagu soo kordhiyo **Farqad 13aad iyo Farqad 14aad** Musharaxa ay dacwadi ku furantahay isna haystaan qof muwaadin ah oo kale marka uu soo baxo, si looga baaqdo in uu xukum ku dhaco isaga oo soo baxay ama awoodaa uu ku soo baxay uu ku istilmaamlo qof kale oo muwaadin ah waa in lagu daraa xeerka ***"in qof kasta oo is sharaxaya Golaha Deegaanka Dacwadina uga socoto maxkamada waa in uu iska oodo dacwadaha ugu furan maxkamadaha"*** waxaan soo jeedinayaa in qodobkaa lagu daro waayo marka uu mudane noqdo waxa uu isticmaalayaa awood.

Waxaa kale oo jira dad laayay oo gacan ku dhiiglayaal ah *"qof kasta oo muwaadin ah gacan ku dhiigle ah oo camdan qof u dilay wey ka reeban tahay is sharaxaadiisu Golayaasha Deeganka iyo Wakiilada" (4mudane ayaa taageeray)* waayo waxaa kuu soo fadhiisanaya Gole yaasha Gacan ku dhiiglayaal, waayo waxaa jira dad inta ay wax dilaan hadana dibada lagu dhameeyo hawshooda. Sidoo kale waxaan soo jeedinayaa in Qodobka 86 ee Golaha wakiilada in iyagana labadaa farqadood la raaciyo,

**Qodobka 68aad Shuruudaha Murashaxa Golaha Wakiilada.** Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro laba farqadood oo noqonaya Farqada 11aad iyo 12aad una dhigmaya sidan;

*"In qof kasta oo is sharaxaya Golaha Wakiilada Dacwadina uga socoto maxkamada waa in uu iska oodo dacwadaha ugu furan maxkamadaha"*

*"Qof kasta oo muwaadin ah gacan ku dhiigle ah oo camdan qof u dilay wey ka reeban tahay is sharaxaadiisu Golayaasha Deeganka iyo Wakiilada" (4mudanw ayaa taageeray)*

Ugu danbayntii Xuseen Axmed Caydiid waan ku taageersanahay dhamaan qodobadii uu soo jeediyay, lakiin waxaan kaga duwanahay hal qodob oo ah halka kooramka tusaale ahaan tiradu marka ay 7-ba tahay kooramku waa 4 oo waa sharci jira.

# Kal-fadhigii 43aad Fadhigii 18aad

**Arbaca 02 September 2020**

**Quraanka: -** Md. Obsiiye

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe M. Faarax

Ajandaha Fadhiga:- Doodda Xeerka Guud ee Doorashada Qaranka iyo Codbixiyayaasha. Maalinta 2aad

**Md. Cabdiqaadir Jaamac Xaamud** (11min 30sec) Shir-gudoonka, Mudanayaasha Shaqaalaha, marti-sharafta iyo Saxaafadaba waan salaamayaa Asc, Xeerkani waa xeer muhiim ah, runtiina Gudidda aad ayaa ugu mahadnaqayaa waayo dadaal badan ayay soo sameeyeen.

Haddii aan dhexgalo xeerka doorashooyinku wey isdaba socdaan dalkeena, dhaqaaleheenana waan ka warhaynaa, markaa ***qodobkaa 6aad Farqad cusub ayaan ku soo dari lahaa una dhigan sidan waa in doorashooyinka la isku geeyaa wixii wada qabsoomi karra iyada oo laga fikirayo xaga dhaqaalaha dalka.***

**Gudoomiye Baashe.** Xildhibaan Abdiqaadir xeerka ha akhriyine qodobada aad wax ka bedelayso is dul taag oo waxaad ka beddelayso sheeg xildhibaan walba wuu haystaa xeerkee.

**Abdiqaaqir; Qodobka 76 farqadiisa 5aad iyo Qodobka 78aad farqadihiisa 2aad** iyo **3aad** ay ka soo hor jeedaan Dastuurka, ogolayna wax kooto layidhaa Siiyayna Xuquuq siman Muwaadiniinta Somaliland, sidaa darteed waxaa la laalay Qodobada;

**Qodobka 76 farqadiisa 5aad iyo Qodobka 78aad farqadihiisa 2aad** iyo **3aad** ayay gudidda arimaha guduhu soo jeedisay sidaa awgeed in dastuurka loo furaa waa muhiim sababa jira awgood oo ay ka mid yihiin cabashooyin jira awgeed oo hadaba xildhibaanada gobolada qaarkood ka maqan yihiin fadhigan.

Hadda sidan uu goluhu yahayna xaq maaha waayo dadkii 60-kii ka isirnaa dhulkani waa in ay xuquuq isku mid ah yeeshaan, sidaa awgeed waxaan soo jeedinayaa in dastuurka la furo sababahaa jira awgood, haweenkana waynu ognahay waxyaabaha ay guriga ka qabtaan oo 75% sida ay u shaqeeyaan dedaal badana way sameeyaan, in badana waxaa lagu lahaa waxbaa la idin siinayaa ee waa in dastuurka loo furaa iyaga iyo beelahaa laga tirada badanyahayba lana qanciyo.

Qodobka kale ee aan ka hadlayaa waa qaybinta kuraasta oo hadda ay kala yihiin sidan:- Gobolka Maroodijeex, 20 kursi Gobolka Togdheer, 15 kursi Gobolka Awdal, 13 kursi

Gobolka Sanaag,12 kursi Gobolka Sool, 10kursi Gobolka Saaxil, markaa gobolka sanaag oo ah gobolka ugu balaadhani in uu intaa helo macquul maaha ee waa in ay iska soo cleiyaan gobolada haysta kuraasta oo la isku tanaasulaa.

Haddii aan wax ka idhaa dhanka deebaajiga xeerka ku qoran, Gobolada dalku isku mid maaha xaga duruufaha oo gobolka sanaag oo kale dagaalo ayaa hadheeyay, in kastoo uu dastuurku leeyahay dadku wey simanyihiin. Waxaan soo jeedinayaa halkaa ay ku qoran tahay 60,kan waa in 50ton laga dhigaa, dhanka kale waxaan soo jeedinayaa in aan 30kaa dhalin yarada aan laga hadal ee ay 30-kaa ahaato.

**Md. Bashiir Sh. Xuseen Tukaale** **(05min 29sec):-** Qoondadad Haweenka Mudanayaal qarankeennu wuxuu leeyahay dastuur jidaynaya xuquuqaha kala duwan ee muwaadiniinta, haweenka iyo dadka la hayb-soocaa waxay ka mid yihiin bulshooyinka aan helin xaqa siyaasiga ah, waxaa la isku waafaqay in nidaamka qoondada haweenka iyo dadka la hayb-soocaa aanay ka hor imanayn dastuurka, sido kale hirgalinta qoonadadu waxay xoojinaysaa in muwaadiniintu si siman u helaan xuquuqda siyaasiga ah, haweenka iyo dadka la hayb-soocaa ma helaan xaqa siyaasiga ah maadaama oo ay jiraan duruufo kala duwan oo aanay kaga mid noqon Karin golayaasha**.**

Haddaba, Iyada oo laga duulayo mudnaanta ay leedahay in haweenka iyo dadka la hayb-sooca ka qayb-qaataan metelaadda golayaasha waxay xukuumaddu soojeedisay in 22% tirada guud ee golaha wakiiladu ay noqdaan haween iyo in beelaha la hay-soocaa yeeshan hal kursi, Sidaa awgeed, waxaan golaha u soo jeedinayaa in ay hirgaliyaan soojeedinta xukuumadda iyada oo lagu salaynayo in gobol walba 22% boqollay ahaan loogu gooyo kuraasida ay haweenku ku yeelanayaan golayaasha.

Mudanayaal, xeerkani haddii uu ansaxo isla markaana dhaqan-galo wuxuu xoojinayaa in ay haweenka iyo dadka la hayb-soocaa ka qayb-qaataan siyaasadda golayaashana ku yeeshaan metelaad.

**Qodobka 8aad Ee Dastuurka**, Nuxurka qodobkani gaar ahaan faqraddiisa 1aad waxay jidaynaysaa sinnaanta muwaadiniinta in ay sharciga hortiisa ku leeyihiin sinnaan dhammaan xuquuqaha madaniga, sidaa darteed nuxurka qodobkan maadaama oo aanu tilmaamin xuquuqo siyaasi ah looma sharxi doono mabda'a sinaanta muwaadiniinta ee qodobkan ku xusan in loo raaco iyada oo laga duulayo sinnaanta muwaadiniinta hab-raacyada doorashada oo ah xaq siyaasi ah.

**Qodobka 22aad Ee Dastuurka,** maaddaama oo bulshada qayb ka mid ah oo ay ka mid yihiin haweenku aanay helin xaqa siyaasiga ah ee ah in la doorto caqabado u gaar awgeed, xeerkasta oo jidaynaya hannaan u gaar ah hab-raaca doorashada haweenka, isla markaana fududaynaya xaqa ay u leeyihiin in la doorto isma khilaafayaan.

**Qodobka 36aad faqaradiisa 1aad ee Dastuurka,** Nuxurka qodobkani haweenka kama reebayo in ay helaan hannaan u gaar ah oo ay kaga qayb-galaan doorashada Golaha Wakiillada iyo Golayaasha Deegaanka maadaama oo aanu qodobkani faah-faahin meelaha shareecadu jidaysay ee la xyidhiidha siyaasadda ee ka reebaya haweenku in ay ka qayb-galaan nuxurka looma tafsiiri Karo in siyaasadda shareecadu u gaar yeeshay ragga oo kaliya.

Waxaanu guddida ku raacnay soo jeedinta ah in aanu komishanku awood u lahayn uu ku jaan-gooyo maalinta doorashada, cayimaadda doorashada waxa lagu salaynayaa muddo-xileedka golayaasha, sidoo kale guddida waxaanu ku ayidsannahay soo-jeedinta ah in shaqaalaha komishanku madaxbannaanaado isla markaana lagu maamulo xeer-nidaamiye gaar ah.

**Md. Ibraahim Axmed Reygal** (13min 38sec):- Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Mudane Gudoomiye, Mudanayaasha Golaha iyo shacbiga Somaliland ee shaashadaha naga daawan doona insha allaah iyo saxaafadaba waan salaamayaa, salaam ka dib waxaa aad iyo aad sharaf u leh Gudidda kasoo shaqaysay xeerkan, xeerkan ina horyaalaana waa ilaa sadex xeer oo la isku soo min-guuriyay ayaan filayaa, waana dadaal wanaagsan.

Ugu horayn waxaan aad iyo aad ugu hambalyaynayaa xyidhibaanadii iga horeeyay iyo Gudidda arimaha Gudaha oo aad iyo aad iskaga xilsaartay. Intaa marka laga soo gudbo waxaan doonayaa in aan dhawr qodob oo yar-yar is dultaago kuna raagi maayo Gudoomiye.

**Qodobka 78aad farqadiisa 9aad** iyo **10aad** oo kala odhanaysa gobolkii ay doorasho ka qabsoomi weydo dusha ayay xisbiyadu ka qabsanayaa hadhawto sida ay u kala cod bataan qodobkaa waa ka soo hor jeedaa oo dadka xaqiisa ayaa ku lumaya ee waa in ay suuro gal noqotaa sidii ay doorashadu uga dhici lahayd meeshaa, (3 taageero ayuu helay qodobkaasi).

Waxaan u soo gudbayaa mid labaad, waxa jirta 6dii degmo ee lixdankii ee hada 6-da gobol noqday ayay hada doorashadu ka dhacaysaa ayaa la inoogu soo qoray xeerkan, sida caadada ah hada dadku waa isdhex galaan oo waxaad arkaysaa dad meel deganaa oo hadana meel kala u guuray oo dadku waa iska reer Guuraa, lakiin waa in ay dootashudu waa in ay ku fadhidaa xuduudihii lixdankii (60kii). Oo qofka muwaadinka ahi meeshii uu iska diwaan galiyay uu ka codeeyaa.

Waxaa kale oo aan soo gudbayaa **Qodobka 82aad**, ee shuruudaha Musharax Golaha Deegaanka halkaa ay gudiddu ay **ka dhigtay 30 jir waan kordhinayaa oo waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo 35jir aanu ka yaraan uuna ka weynaan 55sano.** Sidoo kale waxaan soo jeedinayaa in shahaadooyinka gole deegaan waa in tacliintiisu aanay ka hoosayn Dugsi sare ayaan soo jeedinayaa, waxaa kale oo aan wax ka odhanayaa dhanka dhaqaalaha in laga dhigo in qofka isku sharaxaya Golaha **Deegaanku waa in uu**

**dhaqaale ahaan isku filan yahay ayaan soo jeedinayaa.** Waayo waa in aan loo soo dhex marin reerka oo ah mid qabyaalada ah ee waa in uu isku filan yahay.

Qodobka waxaan ku soo kordhinayaa Farqado 13aad, oo u dhigmaya sidan; *degmada uu ka sharaxanyahay xyidhibaanka Golaha deegaanku waa in uu degmadaa dhaqan keeda garanaayo, waxaan ka wadaa degmo ayaa beeralay ah, degmaa xoolo dhaqato ah, degmaa kaluumaysato ah,* markaa waa in uu yaqaanaa meesha uu iska soo sharaxayo iyo dadkeedaba.

Farqada 14aad ee aan ku soo kordhinayaa waxay tahay *in uu shaqo ama caafimaad mooyaane uu kal-fadhigaya uu joogo,* oo yacnii uu yahay qof degmadii ku sugan si uu dadkiisa uga war-hayo.

Sidoo kale waxaan ka ilduufay oo aan farqad 15aad ka dhigayaa, *qofka xildhibaanka deegaanka loo dooranayo isla markaana lagu dabaqi karo xildhibaanada qaranka in uu diinta islaama yaqaano kuna dhaqmo ayaan soo jeedinayaa in lagu daro.*

**Md. Siciid Maxamed Cilmi (15min,16sec):-** Shir-gudoonka, Xildhibaanada, Xoghayayaasha Golaha, Saxaafada iyo Marti-sharafta marka hore waan idin salaamayaa ASC, salaantaas ka dib, waxaan si wayn ugu mahad celinayaa Ilaahay baa mahad lehe Gudidda Arrimaha oo Xeerka hawl wayn ka soo qabtay, mar labaad waxaan u mahad celinayaa Shir-gudoonka oo go'aamiyay si deg-dega maadaama Xaaladii doorashadu taagan tahay in loo keeno Golaha, waxa kale oo aan u mahad celinayaa Komishankii hore oo Xeerkan ka soo shaqeeyay iyo Xukuumada uu gadhwadeynta ka yahay Madaxweyne Muuse Biixi oo iyana ina soo hordhigay Golahana u soo gudbiyay Xeerkan.

Markan intaa ka soo gudbo, waxaan anigu ka hadlayaa Shan arrimood oo kala ah 1. Arrinta ku saabsan saami-qaybsiga, 2. Qodobka Deebaaji, 3. Shaqaalaha Dawlada, 4. Murashax madax-banaan oo aan ku soo darayo Xeerka iyo 5. Gabo-gabo.

Hadaan ku horeeyo arrinta ku saabsan saami-qaybsiga, saami-qaybsiga markaad eegto soo jeedinta Gudidda ee Qodobka 78aad, Gudiddu iyadoo ku mahadsan waxay inoo soo jeediyeen saddex option, option-ka kowaad anigu toos baan uga saaray oo wuxuu ka hadlayaa oo ay soo jeediyeen in Goluhu ka go'aan qaato arrimaha saami-qaybsiga, Goluhuna kama go'aan qaadan karo waayo kumaba heshiinayno, sababta aynaan ugu heshiinayn oo maaha arrintu sida looga hadlayo ee ah beesha dhexe iyo beelihii darafyada isku haysta saami-qaybsigii rag farabadan oo beelaha darafyada ahi ka hadlaan anigoo xushmaynaya.

Wax gaar ah oo aanu isku haysano beesha dhexe oo saami-qaybsi ahi ma jirto horta, waxaanan isku haysan waxa weeye miisaan baa loo sameeyay saami-qaybsiga oo tii 1960kii baa lagu saleeyay wixii dambe sida loo galayo waa halkeeda, waana tan ay ku soo qoreen in 2.5 lagu saleeyay saamigii 1960kii, maalmahan waxaan eegayay Xildhibaanada ka hadlayay arrinta saami-qabysiga oo maba aha Xildhibaanada qaylinayaa kuwii ay wax ka maqnaayeen, waxayna u badnaayeen Xildhibaanada

Deegaanka Boorama iyo Xildhibaanada ka soo jeeda Sanaag Barri, hadii aan sharaxo Awdal waxay lahaayeen 5 kursi oo 2 ka mid ahi Saylac lahayd halka 3 kursi Degmada Boorama ka lahayd, marka lagu dhufto 2.5 waxay noqonaysay 8 kursi hadana waxay ku fadhiyaan 11 kursi labadii Degmada Saylac lahayd lamaba hayo.

Marka Cidda wax ka maqan yihiin waa Degmada Saylac iyo Deegaanka Laascaanood oo aan anigu ka soo jeedo, marka anagu 12 kursi baanu lahayno 6 baa la qaatay, salalna 5 kursi bay lahaydo way kawada maqan yihiin, gar waa loo wada muslim, labadayadii maanu qaylin oo hadli mayno waxaanuna doonaynaa si degan wax u helaan. Marka waxaan qabaa cidda wax loo qaybinayaa maaha sidan, Qodobada ay Gudiddu halkan ku soo qortay anigu waan wada laalay, waxaana soo jeedinayaa, in Salal oo 5toodii kursi Boorama kaga maqan tahay ay helaan, anaga oo 6 kursi Caynaba nagaga maqan yihiina aanu helno, marka labadaas xaafadood ha noo soo celiyaan oo halkan ha lagu daro qaabkii loogu dari lahaa, laakiin Beel dhexe oo ay wax naga maqan yihiin ma jirto ee Awdal iyo Sool in wax loo qaybiyo oo loo kala rido waxay kala qaateen baan soo jeedinayaa.

Tan shaqaalaha Dawlada, anigoo ixtiraamaya Gudidda Qodobkaas inta ay ku soo dareen baan ka saari lahaa Shaqaalaha, waayo Xeerka Shaqaalaha Dawlada Xeer Lr. 7/96 oo ah Xeer u gaar ah shaqaalaha ayaa tilmaamaya arrinta siyaasada iyo shaqaaluhu waxay kala yeelayaan, waxa kale oo uu sharaxayaa Qodobadii 5aad, 6aad iyo 11aad marka Xeer u gaar ah baa jira shaqaalaha, Xeerkani waa xeer guud, marka waxaan soo jeedinayaa dhamaan in laga saaro qodobada Shaqaalaha ay Gudiddu wax kaga soo dareen.

Qodobka ku saabsan deebaajiga, anigu waxaan odhan lahaa deebaajiga wax ha laga dhimo waana sababaynayaa, Dastuurku wuxuu u ogaaladay qofkasta in la dooran karo waxna uu dooran karo, hadii aynu culeys sii saarno qofka in la dooran karo oo aynu sabab uga dhigno oo nidhaahno dhalinyaro doonaya inay doorashada ka qayb-qaataan waad faramadhan tihiin isagoo shacbiyad haysta aynu nidhaahno ma haysatid lacag oo ninka lacagta leh oo kaliya isa soo sharaxaya, waxay noqonaysa dabar aan gar ahayn oo aynu dabarnay Qodobkii dastuuriga ahaa, arrinta labaad qofka doorasho galayaa wuxuu galaa kharashyo ciida ka badan oo wareer qaarkoodna aanay sharci ahayn, sida kharashyadii kaambeynka.

Mid baaba ka sii daran, Xisbiyada xisbi ka mid ahi wuxuu isticmaala qofka musharaxa ee imanaya lacag baaba laga qaadaa, xisbigaasi wuxuu sugaa xiliga doorashada in qofka iska sharaxaya uu lacag ka qaado, marka waxaas oo kharash ah qofka ay sugayaan waxaan soo jeedinayaa in deebaajigii halkiisii lagu celiyo.

Arrinta ku saabsan Murashaxa madaxa banaan, waxaan soo jeedinayaa in Xeerka laga daro farqado tilmaamaya Murashax madax banaan qaabka loo samaynayo, waayo hadii saddexda xisbiba qofkii diidaan isagoo haysta shacbiyad xaq dastuuriyana ay tahay in

wuxuu dooran karo lana dooran karo, dee maaha in xaqii dastuuriga ahaa saddex oday oo meel fadhiya ku lumo, sidaa darteed, anigu waxaan soo jeedinayaa in Xeerkan lagu daro murashax madax-banaan.

***Gaba-gabadii***, Gudoomiyo iyo Xildhibaan idinkoo aad ugu mahadsan sida fiican ee aad ii dhageysateen, waxaan soo jeedinayaaa in Xeerkan la ansixiyo iyadoo lagu darayo lifaaqa Gudidda Arrimaha Gudaha oo laga saaray Qodobada aan soo jeediyay in laga saaro.

**Md. Maxamed Xuseen X. Ciise (14min, 10sec):-** Shir-gudoonka, Xildhibaanada, Shaqaalaha Golaha iyo Saxaafadaba dhamaantiin waan idin salaamayaa ASC, salaam ka dib, Mudanaayaal iyo Mudane Gudoomiye Xeerkan ina horyaal ee Dooraashooyinka Qaranka iyo Diiwaangalinta Codbixiyayaasha loo bixiyay iyo inta ay gudiddu ku dareen marka loo eego dhamaan waa xeer wanaagsan oo Qarankan anfacaya, laakiin ciladu waxa weyee runtii waa wax wanaagsan oo la rabo inuu baqal ka dhaliyo waxaan sidaa u leeyahay nidaamka doorasho ee Somaliland marxalado kala duwan buu soo maray oo mar Beelo ayaa lagu soo xuli jiray, markii dambena waxaa laga dhigay nidaam xisbi oo dimuqraadi ah, markii dambena waa tii loo taag waayay oo ay markii dambe noqotay in la isu guuriyo dameer iyo faras oo ah dhaqan iyo dimuqraadiyad la isku daray si ay baqal u dhasho, marka xeerkaasi maanta halkaasi taagan yahay oo baqal buu ka dhalinayaa, kamana dhalinayo nidaamkeenii dimuqraadiya meel buu taagan yahay 15 sano ka bacdi, sababtuna waa labada aynu ku darnay ee la israaciyay.

Waxa ka mid ah talooyinka ay gudiddu soo raacisay oo ka mid tahay saami-qaybsiga, Gudiddu horey u sheegeen oo Goboladay u baxeen ka dibna talooyin bay soo jeediyeen oo Madaxweyne Siilaanyo ayaa loo gudbiyay, xukuumadii Siilaanyo waa tii xisbiyada dib ugu celiysay, iyana waa kuwii yyidhi waanu ku dhici waynay hadhcad, tii ay ka baqeen ee dib inoogu soo celiyay sidii 2005tii, nidaamka dimuqraadigu waynu naqaano system baa loo maraa, kan dhaqankuna waa mid gooniya oo ilaa 2005tii baynu ku soo dhaqmaynay, markaa arrimahaas in xal loo raadiyo weeye oo waxaa lagu kala cabanayo meel la isla dhigo.

Waxaana lagu xalin karaa saddex mid uun kuwaas oo kala ah waa mide in tirakoob la sameeyo oo dadka la tiro koobo lix bilood inaga badan mayse, tan labaad waa in dastuurka in la furo oo tiro loogu daro dadka cabanaya iyo tan saddexaad oo noqon karta in tirade 82 ah dib loo habeeyo, saddexdaas waxaan ahayn oo xal u noqonaya doorasho ma jiraan, waa laga yaabaa in xisbiyadu ku fakaraan in doorasho caantayna la qabto, laakiin tiin bay beerayaane ha u qaadanina doorasho, waxaa la rabaa Somaliland la wada leeyahay oo ninka Awdal jooga ama Sool jooga uu dhiiga u shubayo, hadii taas la waayo sidaa loo kala cabanayo baa loo cabanayaa.

Marka si xal loo helo waa in Goluhu soo saaraa ama tallooyinkiisa ay ku jirta in dadka la tirakoobo si cidkasta waxay xaq u leedahay u hesho, sidaasa Somaliland lagu wada yeelan karayaa, sidaasaa doorasho raali laga wada yahay inoogu dhacaysaa, marka waa in la badheedhaa oo nidaamkan dimuqraadiga ah aynu ka midho dhalino ama nidaamkii lagu soo caano maalay ee dhaqan beelaha wax lagu qaybsanahay inagu celiya, labadaas mid uun bay noqonaysaa.

Hadaan inta arraarta kaga soo gudbo, Mudane Gudoomiye anigu Xeerka Magaciisa waxaan odhan lahaa ha laga dhigo Xeerka Doorashooyinka Qaranka, Diiwaangalinta iyo Komishanka Doorashooyinka Qaranka, madaama komishanku ka mid yahay xeerkan hay'ad guud oo madax banaana yahay, marka waa inay ka muuqataa madaama uu madax banaan yahay.

**Qodobka 82aad** shuruudaha Murashaxiinta Golayaasha Deegaanka waxaan ku daray farqad cusub oo aan soo jeedinayo, taas oo **"waa inuu yahay muwaadin lagu yaqaan ka qayb-qaadashada hawlaha horumarinta iyo arrimaha bulshada ee deegaanka uu ka sharaxan yahay"** marka Nin dibada ka yimi uun yaanu iska noqone waa Nin waxqabadkiisa.

**Qodobka 89aad** Olalaha Doorashooyinka Farqada 3aad halka ay ku qoran tahay "waa in aanay ka badnaan 18 cisho" waxaan soo jeedinayaa madaama Ururada la furi karo oo doorashoyinku kala duwan yihiin, waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo inta dambe **"mudadda ollalaha doorashooyinka iyagoo ku saleynayana nooca doorashu hadba tahay".**

**Qodobka 97aad** Ilaha dhaqaalaha Ololaha doorashooyinka **Farqada 2aad Xarafka (e) "Maaliyada ka baxsan Illaha dhaqaalaha"** taasi ma cadda waxa loola jeedaa, marka halka ha la cadeeyo ama ha laga saaro.

Mudane Gudoomiye waxa jira **Qodobada 152aad, 153aad iyo 154aad** oo ka hadlaya dacwadaha waxaana lagu dhex daray cutubka dambiyada, marka waxaan soo jeedinayaa inay cutub gaar ah noqdaan oo ah cutubka sagaalaad madaama ay kala nooc yihiin oo iyagu dacwadaha halka cutubka sideed ee lagu daray uu ka hadlayo dambiyada, marka cutubka 9aad ee Dacwadaha Doorashooyinka ha laga dhigo.

Waxa kale oo aan ku darayaa marka xeerka la dhameeyo meela u baahan in dib loo habeeyo oo wax ka dhi-dhiman yihiin oo urur iyo xisbi iyo waxba ka khaldan marka qolada hadal-qoraalka waan u dhiibayaa halka ha soo saxsaxaan, WSC.

**Md. Faarax Maxamuud Cabdille** (54min, 50sec)**:-** Bismilaahi Raxmaani raxiim, Aslaamu Calaykum Warax Matulahi Wa Barakaatu. Marka hore waxaan taageersanahay soo jeedintii Gudidda Arrimaha Gudaha nabadgelyada iyo Difaaca, marka laga reebo in yar oo aan soo qortay oo ah qodobadan soo socoda:

**Qodobka 60aad Deebaajiga** Waxaan soo jeedinayaa in qodobkan deebaajiga lagu daayo sidii xukumadu ku keentay, waxaan Gudidda ku khilaafsanahay qodobkaas.

Waxa kale oo aan Gudidda ku khilaafsanahay Qodobka **82aad Shuruudaha Musharaxa Golaha deegaanka.** Waxaan isaga taageersana farqada xaga da'da in laga dhigo 30 jir ka hadlaysa, laakiin **farqada 10aad** ee ka hadlaysa Hantida uu yeelano. Waxaan raacsanahay Xukumada oo waxaan ka soo horjeedaa soo jeedinta inuu yeesho Hanti gaadhaysa 600,000 SL.SH. Markaa waxaan soo jeedinayaa in sidisii hore lagu daayo ee ahayd inuu hanti mood iyo noolba ku leeyahay Degmada uu ka sharaxan yahay.

Sidoo kale Waxaan teersanahay soo jeedintii xukumada iyo sidii xildhibaanada qaar soo jeediyeen ee ahayd ka hadlaysa lacagta laga qaadayo musharaxiinta Golaha deegaanka iyo Wakiiladana waxaan ku raacsanahay sidii ay xukuumadu u soo gudbisay, waanan kaga soo hor-jeedaa sida ay gudiddu soo jeedisay.

**Qodobka 112aad** sida Gudiddu u soo jeedisay waan raacsanahay, halka ugu dambaysa ee odhonaysa **"Marka la hubinayo kaadhka waa inay isha sii maraiyaan Wakiilada Xisbiyadu haddii ay goobta ku sugan yihiin", waxaan soo jeedinayaa in laga saaro "Ha laga saaro haddii ay goobta ku sugan yihiin",** sababta oo ah waxaaba qasab ah inay ku sugnaadaan, markaa inagu yeynaan jidayn inay maqnaan karaan waa in ay goobta ku sugan yihiin, oo ay insha sii mariyaan. Qodobka waan taageersanahay intiisa kale, marka laga saaro intaas aan soo sheegay, waxaan intaa ku dhaafayaa wax-ka-beddelkii gudidda waxyaabixii aan ka beddelay mooyaane inta kale waan Raacsanahay.

Waxaan aaminsanahay runta lagama baydhee, qodobkan la leeyahay dumarka iyo dadka laga tirada badan yahay ama Kootada, horta maaha in aynu inagu dadka kala faquuqno. Xuquuq siman ayey leeyihiin muwaadiniita Somaliland, haddii inaynu wax u samayno waxa tilmaamaya Qodobada 8aad iyo 36aad ee dastuurka waan in qodobadaa la furaa oo wax laga bedelaa, haddi aynu u aragno in dad gaar wax gaar la siiyo oo ha la furo Dastuurka, laakiin dastuurka ayaa dabraya dumarka, si gaar ah wax loo siiyo iyo inReero gaar ah si gaar ah wax loo siiyo, gobol gaar ahna si gaar ah wax loo siiyo, markaa waxaan leeyahay Dastuurka ayaa Dabraya suuro galna maaha.

**Qodobka Saami Qaybsiga** 1960-kii ayaynu raacnay ee maanta ma jiro qodob kale oo aynu raacaynaa isaga ayaynu wax qaybsigeena aynu ku salayno, qodobkaa meesha looga gudbayaa waa tira koob dadweyne oo la qabto. Tira koobkaasna waxa uu xil ka saaranyahay dawlada Somaliland, inaguna qab ka nahay, taas waxaan qabaa in sidii hore

lagu galo doorashada hadii aan tira koobka la qaban oo gobol walba inta uu tirakoobkaasi uu u noqdo uu saamiga ku qaataa *(2mudane ayaa Taageeray).*

Waxaan ka soo horjeedaan in xildhibaada Gobolada qaar ay ka maqan yihiin maanta Golaha, waxay inay yimaadaan oo ka doodaan oo cod lagu kala baxo, haddii ay dhici waydana arrintu waa arrin siyaasadeede si siyaasiya loo galaa. Waa in qodobkani sidii uu markii hore u dabranaa uu u dabranaado ama waa ay soo fadhiistaan oo cod lagu kala baxaa labadaas waxaan ahayni waa khalad *(3Mudane ayaa taageeray).*

Haddii cid wax ka maqan yihiin sida aan ka maqlayay Siciid Maxamed Cilmi, oo lahaa waxay Caynabi naga haysataa 6-kursi iyo intaas ayaa meel hebla laga haystaa, waxaan qabaa Siciid isagaaba Tuurta lagu soo qaaday doorashadana xaq ayuu u leeyahay in uu galo.

**Gudoomiye** B**aashe; Xildhibaanka magiciisa hasoo qaadine Doodaada wado.**

**Faarax;** Gudoomiye xeerka ayaan ka hadlayaa hadii aan xeerka dhaafo waa khalad ee ha la ii daayo doodayda, Gudoomiye waxaan Qabaa hadi cid wax ka maqan yihiin Gobolka Saaxil ayay wax ka maqan yihin, 60-kii ayey ku fadhidaa xisaabta wax lagu qaybsaday oo waxa naga maqan 2-kursi oo nagaga maqan Gobolkan Maroodi-jeex. Ee waxaan leeyahay waa in labadaa wado mid uun la maraa oo ama sidii 60-kii waxa lagu qaybsaday ama waa in Tirakoob la sameeyaa,

Markaa waxaan leeyahay hadii uu caynabo ka soo baxay waxa uu ku fadhiyaa waa Gobol e waa in Gobolka Saaxil loo soo celiyo labadaa xildhibaan ee ka maqan, hadii si tirakoob ha la qabto wixii naga dhimana waanu ogol nahay ee waxaan Golaha ka codsanayaa in horta labadaa xubnood lagu soo daro *(3mudane ayaa taageeray).*

**Qodobka 1aad Erey Bixinta** Halka ay ku qoran tahay "Liiska ama Liisaska" waxaan soo jeedinayaa in lagu soo darro ama magacyada codbixiyaasha **"Liis ama Liisaska "** waxa loola jeedaa magacyada musharaxiinta uu soo gubiyey xisbi/urur ee u tartamaya doorasho mucayina. ***Ha lagu daro ama magacyada codbixiyayaasha.***

**Qodobka 4aad farqada 2aad** waxa qornayd "waa in aan da'diisu ka yaraan 16 sanno" waxaan leeyahay halkaa 16 jir, waxaan soo jeedinayaa in lagu beddelo 15jir

**Qodobka 4aad Farqada 5aad waxay leedahay** "Haddii qof aan buuxin shuruudaha cod-bixintu qaato kaadha si khaldan, waxa Koomiishanka Doorashooyinka Qaranku awood u leeyahay inuu ka joojiyo dhiibashada codka maalinta cod-bixinta, marka sidaas la cadeeyo laguna qanco" ***waxaan soo jeedinayaa in halkaa lagu sii daro ee ay sidaas ila qaataan Koomishanka iyo Wakiilada asxaabtu".***

**Qodobka 4aad Farqada 6aad waxay leedahay** "Musharaxiinta u tartamaya Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenku, waxay ka codayn karaan goob kasta oo cod-bixineed, hase yeeshee hawl-wadeenada goobta doorashadu waa inay diwaangeliyaan, waxaase khasab ah inay hal mar oo kaliya codkooda dhiibtaan". Waxaan leeyahay waa isku mid muwaadiniintu hadii uu Madaxweyne, Gole Wakiilo, Gole Degaan waa isku mid ee waa in uu codka ka dhiibanayaa halkii uu iska diwaangeliyey, waxaan soo jeedinayaa in taas meesha laga saaro waayo waa tii aan hada aan ka hadlaynay ee kootada ahayd.

**Qodobka 11aad farqadiisa 5aad** "Goobaha cod-bixinta haddii doorashadu ka qabsoomi waydo, tirade kuraasta loo qoondeeyey waxay ururada/Xisbiyadu ku kala qaadanayaan, saami u dhigma siday u kala heleen wadarta guud ee codadka ansaxay ee degmada" Waxaan soo jeedinayaa in qodobkaas meesha laga saaro, waayo maanta ma jirto meel aanay dalkeena meel aanay Diwaangalin doorashaduna way ka dhacaysaa, dawlada ayaa laga doonayaa inay gaadhsiiso oo ay meel kasta oo dalka ka mid ah ay codbixintu ka dhacdo. ***Sidaa awgeed waa in laga saaraa Waxaan leeyahay ha laga saaro. (2mudane ayaa taageeray).***

**Qodobka 4aad Farqada 6aad waxay leedahay "**haddii doorashadu ka qabsoomi waydo degmo dhan, waxay ururada/Xisbiyadu kuraasta degmada ku kala qaadanayaan, saami u dhigma siday u kala heleen wadarta guud ee codadka Gobolka ka ansaxay" taasna waxaan leeyahay tii hore ayey la mid tahay, Gobol iyo degmo walba waan in doorashadu ka dhacdaa dadkaana waa in xuquuqdooda loo tixgeliyaa oo is xambaar dambe iyo waxan aynu ka hadlaynaa aanay dhicin, waana in uu muwaadin kastaa uu xaqiisa helo oo la doortaa waxna uu doorto, oo labadooduba ay helaan Xaqooda. ***Sidaa awgeed waxaan leeyahay Farqadaa 5aad iyo 6aad waa in meesha laga saaraa. (2mudane ayaa taageeray).***

**Qodobka 4aad Farqada 7aad waxay leedahay** "Haddii ay ku kala bixi waayaan ururada/Asxaabtu Gobolka, waxa loo eegayaa wadarta guud ee codadka Qaranka. Waxaan leeyahay waxaynu dhiganay nidaan iyo hab lagu kala baxo, wax lagu kala bixi waayayaa ma jiro, Degmo kasta, Tuulo kasta iyo Gobolka kasta waa in lagu kala baxaa markaa **Waxaan jeedinayaa Qodobka 4aad laga saaro farqadaha 5aad, 6aad iyo 7aad meesha laga saaro. (*2mudanw ayaa taageeray*).**

**Qodobka 14aad farqada 2aad** "Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku xigeenka xubnaha komishanka ayaa iska dhex dooranaya"waa soo jeedinayaa in halkaa sidaas loo qoraa.

**Qodobka 14aad farwada 3aad wuxuu** leeyahay " Muddada xilka Koomiishanku waa 5 sanno, oo ka bilaabay marka Golaha wakiiladu ansixiyo waana loo cusboonaysiin karaa" ***waxaan soo jeedinayaan in loogu darri karo muddo aan ka badnayn 2 sanno***. Waayo

halkaa waxaa lala doonayay sida ay rag badani soo jeediyeen lakiin anigu waxaan u dhig lahaa sidaa.

**Qodobka 25aad farqada 2aad** "Qofkii loo magaacbo xafiiska Doorashooyinka, Diiwaangelinta mar marsiiyo shaqada loogama dayn karo, haddii aanu jirin cudurdaar dhab haddii koomiishanku qanci waayo***. Waxaan soo jeedinayaa in sidan laga dhigo Koomiishanka Doorashooyinka qaran waxay xubno u magacaabayaan xubno ay ku qanci karaan shaqadooda, haddii aanay iyagu cudurdaar keenin***. Hadii aanu qofku odhan anigu shaqadaa ma qaban karo.

**Qodobka 25aad farqada 7aad;** Gudoomiyayaasha Xafiisyada doorashooyinka ee Gobolada iyo Degmooyinku ma noqon karaan shaqaale dawladeed, Ciidan Qaran, xisbi ama urur. Shuruudaha lagu soo xulayaana waxay la mid yihiin kuwa koomiishan heer Qaran lagu soo xulayo, marka laga reebo inaanay da'diisu ka yarayn 35 jir, kana weynayn 60jir. Meel kale waxa ku qornayd 70 jir markaa dee ha la is waafajiyo ama 70 jir ha loo daayo.

**Qodobka 27aad farqadiisa 2aad iyo 3aad** waxay leeyihiin "hawl wadeenada musharaxiinta xafiiska doorashooyinku Wakiilada xisbi lama xyidhi karo xiliga doorashada haddii aanay la qaban iyaga oo ciqaab faraha kula jira. *Waxaan soo jeedinayaa in halkaa laga dhigo* ***"Dambi Ciqaaba faraha kula jira". Far*qada 3aad, Koomiishanku waxa uu leeyahay dhawrsanaan la mid ah ta Golaha Wasiirada Mudada uu xilka hayo, xil kasta ama dhawrsanaan ka qadistooda waxa loo marayaa sida uu tilmaamayo qodobka 94aad farqadiisa 8aad iyo Qodobka 96aad farqada 4aad ee dastuurku. Waxaan soo jeedinayaa in laga saaro waayo waynu soo sheegnay sida komishanka xilka looga qaadayo oo qodobo hore ayaa soo sheegaya.** Qodobadaa oo sheegaya in marka eed loo soo jeediyo Madaxweynuhuna uu gudi u diro uuna ku qanco eedaas loo soo jeediyay ayuu Madaxweynuhu soo jeedinaa.

**Qodobka 32aad** waxaan soo jeedinayaa in lagu daro **farqad 5aad una** dhigmaysa sidan **"qofku goob hore iska diwaangeliyey"** waa in halkaa iyadana lagu cadeeyaa.

**Qodobka 39aad oo ka hadlaya lumida kaadhka codbixinta, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro farqada 5aad** "Kaadhka marka la helo cidda loo dhiibay waa inay ku wargelisaa masuulka degmada, sida Guddoomiye degmo, haydh tuulo iyo xubin deegaan. Kuwaas oo gaadhsiin kara fariinta loo dhiibay. Waxaana la siinayaa kaadhkaa qofkii lahaa" waana in uu noqdaa qof la hubo gaadhsiin karnaa cidii kaadhkaa lahayd oo dadkiina kala garanaya. Waan soo jeedinayaa in farqadaa lagu daro.

**Qodobka 56aad** oo ka hadlaysa qaybinta kaadhka codbixinta; waxaan ku darayaa farqad cusub oo noqonaysa farqada 3aad ***"Kaadhkii lala waayey muwaadinkii lahaa, waxa la siinayaa diwaangelinta dambe, marka la qaybinayo kaadhadhka diwaagelinta dambe"*** *waxaan soo jeedinayaa in farqadaa qodobkan lagu daro.*

**Qodobka 57aad farqada 1aad "**Si loo diyaariyo hawlaha diwaangelinta isu duwidna lagu sameeyo hawlaha diwaangelinta, waxa koomiishanku magacaabayaa Guddi farsamo oo ka kala socda Koomiishanka Doorashooyinka heer Qaran, Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Xisbiyada/urur" ***Qodobkani ma cadda waxaan soo jeedinayaa in laga saaro.*** Awoodaha iyo waajibaadka Guddi farsamo waxa Koomishanka Qaranka doorashooyinku ku soo saarayaa xeer-hoosaad. Koomiishanka ha loo daayo waxa uu ku soo saarayo, maadaama qodobkaasi cadayn oo uu ka hadlaayo xisbiyo iyo Wasaarada Arrimo Gudadeed oo isku jira ayuu sheegayaa, waxaanan qabaa iyagu waxa ay soo saarayaan waa in ay xeer-hoosaadkooda ku soo saaraan.

**Qodobka 65aad farqada 1aad "**Musharaxa isku soo sharaxay jagada Madaxweynaha iyo Ku xigeenkiisu waxa uu xaq u leeyahay inuu ka tanaasulo, hase yeeshee waa inuu qoraal rasmi ah u soo gudbiyaa Xisbigii uu ka sharaxnaa iyo Koomiishanka Doorashooyinka Qaranka ugu yaraan 30 maalmood ka hor maalinta codbixinta". Halakaa waxan leeyahay Codbixintii ayaaba la galayaaye *Waxaan Soo jeedinayaa in lagu beddelo 40 maalmood ka hor maalinta cod-bixinta.*

**Qodobka 65aad farqada 2aad** "Xisbigii uu ka sharaxnaan Mausharaxaasi wuu soo bedeli karaa oo kaliya 20 maalmood maalinta cod-bixinta ka hor" ***Waxaan soo jeedinayaa way badan tahee si ay isku waafaqdo in 10maalmood ka hor laga dhigo maalinta doorashada***.

**Qodobka 68aad farqada 10aad shuruudaha Musharax Golaha Wakiilada "**Waa inuu yahay cod-bixiye ka diwaangashan Gobolka uu u tartamaayo***" halkaa waxaan soo jeedinayaa in lagu daro Deganaana labadii sanno ee ugu dambaysay Dalka"***

**Qodobka 78aad farqada 9aad waxay odhnaysaa** "cod-bixintu ka qabsoomi wayday tirade kuraasida loo qoondeeyey, Gobahaas waxay xisbiyadu ku kala qaadanayaan saami u dhigma siday u kala heleen wadarta guud ee codadka ansaxay" ***Waxaan soo jeedinayaa qodobka ha laga saaro meel aanay doorasho ka dhacayni ma jirto, markaa sabab halkan loogu qoraa ma jirto. Ha laga saaro ayaan leeyahay.***

**Qodobka 78aad farqada 10aad waxay odhanaysaa** "Haddii doorashadu Gobol dhan ka qabsoomi waydo tirade kuraasida loo qoondeeyey Gobolkaas waxay xisbiyadu u kala qaadanayaan saami u dhigma siday u kala heleen wadarta guud ee codadka ansaxay ee dalka, waxaana loo raacayaa sida magacyadoodu liiska ugu kala horreeyaan" Waxaan ***soo jeedinayaa labadaas farqadood ee 9aad iyo 10aad ha laga saaro. Qodob hore way ku qornayd kana way ku qoran tahay oo Gobol iyo Degmo aanay doorasho ka dhacayni ma jirto ha laga saaro ayaan leeyahay.*** Qodobkaasi mar hore ayaan ka saaray sidaa darteed waa in halkana laga saaro.

*Gudoomiye Baashe; Xildhibaan Faarax waxaa jirta goobo ayna ka dhacay dalka doorashadu ayaa jirta, Faarax Gudoomiye miyaad isaxaysaa Baashe haa Faarax. Waa tee ta aanay ka dhacayn*

*Doorashadu, Gudoomiye Baashe Badhan ayaanay ka dhacayn; Faarax Gudoomiye waa in ay ka dhacdaa oo dadla la diwaan galiyaa, Gudoomiye Baashe. Waa hadii ay dhacaan. Faarax way ka hadhayaan doorashada, Gudoomiye Baashe Doodaada Sii wado.*

**Qodobka 79aad faqrada 3aad waxay odhanaysaa** "Hadii laba murashax ay helaan coddad isku mid ah waxa u kala horaynayaan siday ugu kala horeeyaan liiska murashaxiinta xisbi soo gudbiyeen. **Waxaan soo jeedinayaa in taas laga daayo laga dhigo siday xarfaha alif-betada ugu kala horeeyaan ay u kala helaan. Axmed iyo Maxamed oo kale.**

**Qodobka 79aad farqada 5aad waxay odhnaysaa** "Haddii xubin kayd ahi uu ka baxo Xisbigii uu ka tirsanaa, waxa uu waayayaa xuquuqdii kaydka ee buuxinta kuraasta bannaan. Waxaan buuxinaya xubinta ku xigta ee liistada kaydka xisbiga u qoran" Waxaan soo jeedinayaa ha laga dhigo xildhibaanada kaydka ahi waxay u kala buuxinayaa siday u kala cod badan yihiin oo aan ta xisbiga la raacin.

**Qodobka 79aad farqada 7aad waxay odhanaysaa** "Musharixiinta Dumarka ah ama kuwa beesha gabooye ee aan ku guulaysan Doorashada, waxay kayd u ahaanayaan oo buuxinayaan kuwa ay ka soo jeedaan kuwa baneeyey, waxaana loo raacayaa siday u kala codeeyeen" **Waxaan soo jeedinayaa in laga saaro, aniga oo raacaya soo jeedintii Guddida ee ahayd inay dastuurka ka soo horjeedo.**

**Qodobka 81aad farqada 6aad waxay odhnaysaa** "Deegamada aanu tartan ka jirin ee la soo dhigo liis kaliya cod-bixin laga samayn maayo, waxaana laga qaadanayaan dadka loo soo magacaabay deegaanadaa, iyadoo ku dhan yihiin tiradii deegaanka laga doonayey, waxaana loo raacayaa sidii ay u soo kala horaysiyey *'Waxaan soo jeedinayaa waa in farqadan laga saaro, waayo deegaan kasta waa inay doorasho ka dhacdaa maanta.*

**Qodobka 88aad farqada 3aad waxay odhanaysaa** "Haddii laba musharax helaa codad isku mid ah, waxay u kala horaynayaan siday u kala horeeyaan liiska musharaxiinta Xisbiga ama ururku ku soo gudbiyey"**. Waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo siday xarfaha alif batada ugu kala horeeyaan.**

**Qodobka 89aad farqada 3aad waxay odhnaysaa** "Tartanka Ololaha waxa soo saarayaa Koomiishanka Doorashooyinka. Muddada Ololaha doorashooyinu waa in aanay ka badnaan 18 maalmood" **Waxaan soo jeedinayaa halka mudadad ololaha ee 18 casho way ku yar tahay ha laga dhigo 30 maalmood.**

**Qodobka 95aad farqadaha 2aad iyo 3aad ha laga saaro. "Reebanaanta ismaamulka Hantida danta guud" "**Xisbiyada iyo masharaxiintu uma istcimaali karaan Hantida danta guud arrimaha ololaha doorashada, haddii aanay sharciga ama sharci kale oo dalku leeyahay jidayn" waxaan leeyayay ha laga saaro. **Ha lagu bedelo** "hantida danta Qaran Looma isticmaali karo ololaha doorashada". **Qodobkan 95aad Faradaha 2aad iyo 3aad** ha la is waafajiyo oo **farqada 4aad** oo kaliya ayaa sheegaysa. **(*1mudane ayaa taageeray*)**

**Qodobka 96aad: Cidda awood u leh qaadhaan ururinta;** waxaan soo jeedinayaa in qodobkaa meesha laga saaro waayo xibigu waxa uu leeyahay xeer.sid uu wax u ursanayo iyo qaadhaankiisa xisbiga ayay u taalaa, qaadhaan kooda iyo sida ay u xisaabtamayaa waa hawl xisbi. **Sidoo kale Qodobka 97aad** isna waxa uu ka hadlayaa qaadhaan urursiga Xisbiga, markaa maaha hawsheena ee waxaan soo jeedinayaa in isna meesha laga saaro. Isla qodobka **Qodobka 100aad farqada 2aad** "Koomiishanka ayaa diyaarinaya xisbiyada u gudbinaya xisaabaadka" isna waxaan soo jeedinayaa in laga saaro qodobkan waxa uu la mid yahay kuwii hore.

**Qodobka 102aad farqada 7aad** "koomiishanku waa in xafiisyadooda gobol/degmo ku diyaarisaa xafiiskooda waraaqo codbixineed oo dheeraad ah oo ku lingaxan kiishash oo la siiyaa xafiiska soo codsada, iyada ay tahay inoo sababeeyaan waxaan la gudoonsiinayaa gudoomiyaha gobolka ee cod-bixinta"

***Waxaan soo jeedinayaa Iyana farqadaa 7aad*** meesha halaga saaro, waayo waxa goobta la gaynayaa warqaado diwaangashan oo lingaxan, markaa meesha laga saaro Guddoomiye ayaa waraaqo la gudoonsiinyaa. Waayo goob kasta waxa la gaynayaa cidii iska diwaagelisa. Sidaa awgeed waraaqo dheeraad ah meeshaa loogama baahna.

**Qodobka 121aad farqada 1aad xarafka "F"** wuxuu leeyahay "Haddii Cod-bixiyuhu calaamadiyo astaamaha hal musharax wax ka badan oo kala xisbi/urur ah" waa in lagu daraa ama isku xisbi ah ayaan soo jeedinayaa in lagu daro.

**Qodobka 148 farqada 1aad** "qof kasta oo is diwaangeliya in ka badan hal mar ama been ka sheega xogtiisa waxa uu mutaysanayaa ciqaab dhan 3-bilood oo xadhig ah iyo ganaax laacgeed oo dhan 1,000,000 SL.SH. **Halkaa waxaan soo jeedinayaa in lagu daro** "ama Xog qof kale" haddii oday ama caaqil qof kale xogtiisa been ka sheego waa in isna la mariyaa ciqaabtaa mid la mid ah. **(*1mudane ayaa taageeray*).**

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa sida ay Gudidda Ariamaha Guduhu soo qortay iyaga oo ku mahadsan sidii doorashooyinkii hore ka dhacay ee matlan doorashii Madaxtooyad ee dhaweyd Komishanku may keenin computer-kii iyo qalabkii isha lagu hibinay, waxaan is leeyahay hadii uu qaladaad jiray taas ayuu ka yimid waayo kaadhadhka way madoobaan karaan. *Waxaan soo* ***jeedinayaa oo aan adkaynayaa in la keeno qalabkii isha lagu hubinaayay waayo dadbadan ayaan wajigoodii si wanaagsan loo hubin karayn, sidaa awadeed waa in komishanka doorashoonyinka ay qalabkaa keenaan, waana in xeerka lagu soo daraa. (3mudane ayaa taageeray).*** *Waad salaamantihiin*.

## Kal-fadhigii 43aad Fadhigii 19aad

**Sabti 05 September 2020**

**Quraanka: -** Md. Obsiiye

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe M. Faarax

Ajandaha Fadhiga:- Doodda Xeerka Guud ee Doorashada Qaranka & Codbixiyayaasha Maalintii 3aad.

**Md. Cabdiqaadir X. Ismaaciil Jirde** **(21min, 12sec):-** Shir-gudoonka, Xildhibaanda Salaamulaahi Calaykum, anigu qodobo koob koobna baan ka hadlayaa, Xeerku waa xeer balaadhan oo wax walba taabanaya codeynta kaliyana taaban maaye wuxuu taabanaya hawlihii ka horeeyay oo dhan, haday tahay xulista musharaxiinta oo shuruudo u dhigayaa, wuxuu taabnaayaa oo aanu aad uga hadlayn awoodna loo siiyay maamulsita kaambeynka, maamulista kaambeynka ma tilmaamna waajibaadka ka saaran maamulka olalaha, ololaha kharash baa ku baxa, dimuqradiyadu halkay ka qaloocataana waxa weeye hadii lacago aan la garanayn ololaha lagu galo.

Waa la xakameeyaa lacagaha olalaha si aana Baarlamaanka soo socda aan influence logu yeelan oo aanu u noqon mid daymaysan, dalal badani waxay ka mamnuucaan shirkadaha inay xisbiyada siiyaan shirkadu ay kaambeynka ku finance-gareeyaan, marka sida kaambeynka loo financegareeyo xeer badan baa ka yaala xadidaya cida bixinaysa iyo cida aan bixin karin, inagu waxaynu ku dhaafnay way maamulayaan ee qaabkay u maamulayaan ma xeer-hoosaad bay samaynayaan, ma procedure baa ka soo baxaya, ma baarlamaanba qaar ansixinaya inooguma taalo, hadii ay xad yeelan waydona waxa iman doonta dawlado shisheeye inay doorashooyinkeena lacag bixiyaan, waa dariiq furan, dariiqa in la iska awdo weeyaan, waana practice caalamkoo dhan ka jira, dawladaha waaweyni uma ogola shirkadu inay axsaabta lacag siiyaan, waxa loo ogolyahay in shakhisyaad lacag bixiyaan, dalalka qaarna lacagtaas way xadidaan oo intaas ma dhaafi karto ayaa la yidhaahdaa.

Marka halkaasi waa black-hole in gacan la saaro oo shirkadaha, haya'adaha caalamiga ah iyo dawladaha shisheeye intaaba laga mamnuuco, marka side lagu ogaanayaa?

Komishankii hadaynu nyidhi isaga doorashadii maamulaya, siday axsaabtu u maalgalinayaan iyo lacagtay isticmaalyaana waa in Komishanku ogaadaa, axsaabta lacag baa la siiyaa xisaab celina way keenaan, tanina waa la mid, lacagtaasi halkay ka timi, intay le'eg tahay lacagta axsaabta la siin karo iyo siday u isticmaalaan waa Xeerka lagu sheegaa iyo cida bixin karta iyo cida mamnuuca ka ah, hadii kale dhibaata ka imanaysa, anigu cida farta ku fiiqi maayo laakiin waa ka digayaa, waa black hole ay uga maarmi waayeen dawladihii inaga waaweynaa oo xeerar bay u sameysteen election finance.

Tan kale, lacagtan lagu xukumayo ee qaadhaanka ee la leeyahay ha shubo ninka musharaxa ahi, iyana waxaan filayaa ma qurux badna, laakiinse hadii laga maarmi waayay in la yareeyo, *ayaan soo jeedinayaa.* waana inaynaan culeys sii saarin, marka waxaan taasna u arka in aanay meesha ku haboonayn.

**Arrinta saamiga**, Gudiddu way ka hadleen, laakiinse si dadban bay uga hadleen, waxay yidhaahdeen option-kii ay soo dhigeen waxa ku jirtay Goluhu go'aan ha ka gaadho, goluhuna go'aan kama gaadhi karo ilaa 2003dii bay taagnayn, golahanina golayaashii hore wuxuu dheer yahay ma jirto, waa lagu daalay, marka sida kaliya ee cadaaladi ku jirto ee cid waliba ku kalsoonaan karto waxa weeye tiro-koob, in tira koob la sameeyo, maanta waxa kale oo lagu saleeya ma jirto, in la yidhaahdo halkan ha laga qaado oo halkan ha la geeyo dee fidnay ina galinaysaa, waa in tiro-koob la helaa, waana lasameyn karaa oo wuu fududyahay in xukuumadu balan qaado oo miisaaniyad iyo structure wax walba loo sameeyo, tira koobkana wax walba wuu ku jiraa oo Qorsheynta isticmaalaysa dadka tiradiisa, beelaha, guryaha, meelaha dhaqaaluhu ka soo baxayo, tiro-koob cidina kama maaranto, marka waa in damaanad qaad la helo, hadaynu maanta xeerkan sida ku sii dayno oo ayanan qodobkaas waxba ka odhan, waa in la hela damaanad qaad iyo in hore laga bilaabayo hawsha tiro-koobka oo kooban xeerkeedii, hay'adda dhismeheedii, dadeynteedii iyo maaliyadeedii, marka waa inaynu Xeerka lifaaq raacinaa Gudoomiye oo khasab ka dhignaa in arrintaas lagu dhaqaaqo.

**Arrinta kootada**, Gudiddu waxay soo xigatay qodob dastuurka ku jira oo odhanaya muwaadiniintu way u siman yihiin xaq doorashada oo ah in la doorto iyo wax doortaan, taasi waxay ka dhigan tahay cadceedu bari bay ka soo baxdaa, may keenin xadiis, nas iyo sharci ama qodob dastuuri ah oo mamnuucaya kootada haweenka, waxay sheegeen waxay la mid tahay cadceedu bari bay ka soo baxda oo aan laga murmi karin, laakiinse wax u diidaya gari alay taqaane oo sharci, nas, xadiis ama dastuura may keenin. Anigu waxaan cadeynayaa uun meesha dulmi ku jiro oo wax u diidayaa aanu jirin.

**Codeynta,** dimuqraadiyada hadaan la cusbooneysiin xar baa gala oo dadku way ka niyad jabaan, inaga dadkeenu inay codeeyaan bay wada doonayaan, laakiin duruuf baa u diidaysa oo haysa, dadka magaalooyinku waxay jaanis u leeyihiin intay quraacdaan oo soo codeeyaan hadana inay qadada ka soo gaadhaan ama intuu qadeeyo oo safka galo oo codeeyo ayuu salaada casar ka soo gaadho, reer miyigu intaas ma haystaan xaq bayna

u leeyihiin inay codeeyaan, caalamka waxa la sameeyaa meelaha kala fog ee aan wadooyin jirin, reerkii sideed qof ahaa intii xooga ahaa baa kuu imanaysaa oo ragii ah dumarkii iyo kuu iman maayaano adhigii iyo xoolihii iyo reerkii baa laga imanayaa, waana muwaadin xaq u leh inuu codeeyo, duruufta halkaas ka taagani inay u kala hiiliso maaha kan magaalada iyo miyiga, marka dalalku meelaha noocaas ah laba maalmood baa looga dhigaa wax diidayaana ma jiraan, marka wixii ka baxsan lixda Magaalo ee waaweyn angina waxaan soo jeedinayaa in dalalkaas sida yeel lagu daydo lacag badan oo ku baxaysa ma jirte laba cisho looga dhigo codbixinta ***(10mudane ayaa taageeray).***

Halkan waxa ku taala muranada iyo cabashooyinka ka yimaada doorashada waxa xalinayaa komishanka doorashooyinka, xalintaasi waa maxay? Xalintii waa inay noqotaa waxa idaari ah ama ciqaabaad ah, labadaasi mid uun, waa in sanctions ka soo baxaan, way xalinayaan macnaheedu waa maxay, xisbi baa lagu gafayba xisbi kale ha ku gafo ama hay'adaha xukuumadu ha ku gafaane garnaqaasi muxuu noqonayaa? Ciqaabaad ma kala dhalayaan, xisbiga markuu olalaha baxayo taageerayashiisu rabshad sameeyaan oo xisbi kale weeraraan oo hantidiisa burburiyaan maxaa laga yeelayaa sanction ma jiraa komishanku xaq ma u leeyahay inuu xisbigaas ganaaxo, ciyaaraha waa idinka arkay taageerayaasha gaf sameeya ee tiimki martida ahaa ku gafa club-ka la ganaaxaa, Xisbiga xeerarka waaweyn ee doorashada ku gafa talaabada laga qaadayaa ma gaadhsiisan tahay in xisbinimada lagala noqdo, waa la sameeyaa. Maxaa ka yaala waa wax iman karee. Gafafka caynkaas ah maxaa laga yeelayaa, waa in la cadeeyaa, marka waxaan soo jeedinayaa in halkaas la cadeeyo oo wixii lagu ganaaxayay gafafkaas lagu daraa xeerkan.

***Waxaan soo jeedinayaa*** ugu dambeyn, in awood Komishanka loo siiyo inuu ogaado lacagta xisbigu kaambeynka ku galayo xagay ka timi, waa in laga mamnuucaa shirkadaha waaweyn, waa in qofka bixinaya loo sameeyaa xuduud, waa in xisbiga buugaagtoodu furnaataa oo xisaabtooda lala socdaa, waxaas oo dhan waxaan uga jeeda qurxinta dimuqraadiyada, marka waa in sidaan sheegay dawladaha iyo haya'adaha shisheeye iyo shirkadaha waaweyni aanay xisbiyadu lacag ka qaadan, xisbigii shisheeye ee lacag ka qaata waa in talaabo laga qaadi karo, waa in lacagta qaadhaanka musharaxu shubayo la yareeyaa, arrinta haweenka sharci ka mamnuucaya lama sheegin, WSC.

**Md. Cumar Axmed Saleebaan (Sanweyne)** **(10min, 8sec):-** Anigu badin maayo xeerkuna wuu badan yahay intii aan muhiim u arko ayaan ka hadlayaa

**Qodobka 6aad** wuxuu leeyahay hadii doorashu wakhtigeedii ku dhici waydo komishanka kordhinaya, meel ay dastuurka ka soo galayso komishanka wax kordhinaya anigu garan maayo, waxaana u arkaa kala xadaynta awoodaha haya'addaha dawlada inay xadgudub ka tahay, waayo meel ay dastuurka kaga taalo komishanka wax kordhin kara oo axsaab la tashan kara ma jirto, waana qayru dastuuri, marka halka waxaan leeyahay Gudooomiye hadii korodhsiimo timaado way dariiqii saxda ahaa martaa oo Guurtida la keenaa, ma aha komishanka kordhinaya, mana maqan intuu xeer-dejinta dhaafo waliba

la tashanaya axsaabta, marka qodobkaa cidii dastuurku u fasaxo ayuun baa kordhin kara waa in laga dhigaa.

**Qodobka 63aad** dadka haysta dhalasho kale, gudoomiye umad wada qaxootiya baynu nahay, Umadeena 80% baa qaxootiya oo dadka intooda badan boqolka dollar ee dibada looga soo diro bay ku nool yihiin, arrinkaas dastuurkuna ma qorin, marka waa in laga saaraa oo aan la odhan waa inuu dhalasho kale haysto ee laga saaraa qodobkaas.

**Qodobka 78aad** hadii Gobolada ka dhici waydo doorasho axsaabta qaybsanaysa, anigu taasna waxaan u arka iska horkeen, Gobol walba way ka dhaceysa baan aaminsanahay maanta laakiin degmo hadii ay ka dhiciwaydo u baabi'inmayno nidaamkii dorashadooyinkeenii hore ku salaysay hal degmo doorasho hadii ay gobol ka dhici waydo waa in sidii hore ee loogu soo galay lagu dabaqaa, laakiin ma aaminsani Goboladii Sool iyo Sanaag oo markii hore ay arrintaasi ka taagnayn maanta way ka dhaceysa, mana aha inaynu axsaabta ku sii dayno hadii ay ka dhici waydo meel.

**Arrinta tiro-koobka,** dadka tirakoobka ka hadlaya, war horta yaa ku faa'idaya tirakoobka, waa in lagu faa'iido oo wax isle'eg qaadano oo cid waliba hesho wax isle'eg, marka hadii tira koob la sameeyo tusaale eeg doorashadii madaxtooyada ee u dambeysay dee dadka ugu badan wuxuu ka codeeyay Hargeysa, had iyo jeerna afrikanku caasimaadu yimaadaa, inaga dadkii caasimadii bay isugu yimaadeen, tira koobku waa system wanaagsan oo wax badan inaga caawinayaa sida dhaqaalaha, caafimaadka oo waxyaalo badan lagu qiyaaso weeyeen, laakiin hadeynu nidhaahno aynu ku qiyaasno dadka per area inta joogta waxay noqonaysaa dhulka qaarkii inaan cidba laga helin sida xeebahaas oo kale dee dadku wuu ka baxaa, hadii la yidhhaahdo aynu tira koobno cadaalad noqonmayso, marka taasna waxaan leeyahay tira koobka ha laga daayo oo arrin kale ha la keeno.

**Arrinta kootada** Haweenka iyo beelaha gabooye, horta soo jeedinta xukuumada iyo xisbiyada ee ah in kooto loo gooyo haweenka iyo beelaha gabooye xaqiiqatan waa ku taageerayaa xukuumada, waayo inagu xeer-dejin baynu nahayo wax sharcigu qorayo kama talaabsan karno, laakiin hadii xisbiyadu soo jeedin dhexdooda keenaan waa waxaynu ku shaqayn karno oo waa maamul aad iyo aadna waan ugu taageerayaa.

Arrinta ugu dambeysa, waxaan ka hadlayaa hantida in la sheego, dadkeenu waa reer guuraa oo geel baynu leenahay hawdka daaqa, lo' baynu leenahay, adhi baynu leenahay, waana hanti oo ninka leh 100 geela oo waa nin boqol kun oo dollar ahaysta, markaa ha la sheego hantida ma guurta iyo kaash uyaala baananka waa in la cadeeyo si hadhaw loo ogaan karo intuu gacanta mariyay

**Md. Maxamed Jaamac Cabdi (19min, 57sec):-** Bismilaahi, dhamaan Xubnaha Golaha iyo Shir-gudoonka, saxaafada iyo dadweynahaba waan idn salamaayaa, bacda salaam,

waxaan doonayaa inaan dhowr arrimood xeerka wax ka idhaahdo kuna dheeraan maayo, siday u kala muhiimsan yihiin ayaan u galayaa.

Arrinta Saamiga, saamiga oo ah mushkilad ama carqalad mudo dheer xeerkani u dabaranaa, marka hore waxaan doonayaa inaan xuso oo cidii aan ogayn xasuusiyo tirade kuraasida ee golayaasha qaranka ay ku fadhiyaan waxay ahayd nidaamkii1960kii loogu fadhiyay kuraasta, waxa la yidhaahda 2.5 baa lagu dhuftay, laguma dhufan, kuraastii 1960kii oo 5 lagu dhuftay weeye, marka 5 lagu dhuftay 2.5 waxay noqotay Golahan Wakiilada, 2.5na waxay noqotay Golaha Guurtida oo waa isku baarlamaan. Tiradii aanu helnay ee Gobolka Sool ama dhulbahante helay 5 kursi marka 5 lagu dhufto12 ka mid ah ayaa Golahan ah, 12 ka mid ahina waa Golaha Guurtida, tiradii kuraasta Golaha Guurtida aanu 1993kii ka helnay kursi ka mid ah baa la waayay Gobolka Sool, sababtana adigu waxa la saari jiray Gudoomiye Xaabsade laakiin isagu eed kuma lahayn marka 11 bay noqdeen Golaha Guurtida oo sidii buu yahay wali, 12kii kale waxay ku soo aadeen golahan, cid kasta oo hal kursi lahaydna 5 kursi bay sida ku haysataa, xalka kaliya ee lagu heshiin karayay ee taagnaa kaas buu ahaa.

Hab beelo ah laguma qaybin kareyn oo ma jirto beel intay beel kale soo hor fadhiisato odhanaysa waan ka badanahay oo ka badsanayaa dhaqankeenana maba aha, waxay ahayd oo kaliya wixii inoo yaalay inaynu raad-raacno, wixii inoo yaalay waa sidan aynu ku fadhino, marka wixii waa la sharciyeeyay, laba sababoodna waa loo sharciyeeyay, waa mar oo horta xal kaleba ma hayno, tan labaad maxkamadii Dastuurku waxay ogolaatay in sidii hore lagu galo waynuna ku khasbanahay iyana, waxa jirta waxyaabaha qaarkood wax ku gadaaman ee carqaladaha in laga wada hadlo cid baa kuraas ka maqan tahay, waan qaabaa, waana ku ixtiraamayaa cidda leh ha naloo kordhiyo xaq bayna u leeyihiin, taasina waxay u baahan in lagu saleeyo dastuurka oo waxaynu u baahanahay in dastuurka la furo oo lagu dhiirado xukuumad iyo golayaalba, marka wax la kordhinayo qaabka wax loo kordhinayo iyo wax lagu saleynayo nidaamka dambe la isla eego.

Halkan waxaan ka maqlay Golahana in badan ka maqlaa, dooda qola reer Awdalna u badnayd tiro koob ha lagu saleeyo, war tiro koob lagu saleyn maayo suurtagalna maaha, nidaamyada wax lagu qaybsado kaas oo kaliya maahe way badan yihiin, waxa ka mid ah khayraadka, sida loo kala khayraadka badan yahay hadii anigu gobolkaygu khayraad badan yahay oo wax dalka lagu cuno khayraad aan soo saaro waa waxaan ku doodi karo oo aan shidaal leeyahay, gaas leeyahay, beero leeyahay waa nidaam wax lagu qaybsan karo, waxa kale oo wax lagu qaybsada badka dhulka oo hadaad 6km degan tahay aniguna 200km deganahay sabab aad tiraahdid aynu wax ku qaybsano tiro koob ma jirto, marka waxaan wax ku qaybsan karaa optionks ii suurtagalinaya waxaan anigu haysto. Marka anigu ma qabo waana ka soo horjeeda dadka leh in wax qaybsiga dambe lagu saleeyo tiro koob.

Anigu waxaan qabaa in tirada Maxkamadu goysay ee 1960kii in lagu galo oo qabiil ku salaysan, kuraastaas qabiilka ku salaysan hadana qabiil kuma kala qaadan karno, waxaynu ognahay Gobolka Sool iyo Degmada Saylac ayaa cabashada ugu badan leh, labaduba waxay ku cabanayaan kuraas baa naga maqan, labadaba waxaa loo eegayaa 1960kii waxay lahaayeen oo meeshay yaalaan baa looga qaadayaa, Sool 1960kii waxay leedahay 12 kursi, Caynaba Sool bay ka tirsanayd waxaana kursigeeda lahaa Dhulbahantaha degan, Buuhoodle waa Degmo B ah oo Gobolka Togdheer ah, dad badan baa degan ilaa saddex boqol oo kun baa degan, marka kursi bay xaq u leedahay wax macquula maaha, marka hadii Togdheer siiso Buuhoodle oo B ah laba kursi Soolna waxay Caynaba oo C ah aanu ogolnahay in laba kursi la siino, cabashada kale ee taalna waxay tahay war hadii Buuhoodle la siiyo laba kursi hadana waa lagaga daba-tagayaa, dhowr iyo sodon tuulay ka kooban tahay tuulo kaliyaa kursi soo qaadanaysa taasi waa arrin kale oo dhaawaca oo cadaalada ka horimanaysa.

Marka waxaan soo jeedinayaa 12 kursi ee Sool oo aan cid kale ku jirin cidii lahayd 1960kii oo lagu saleeyay in 12 koodii kursi ay iyagu ku tartamaan, marka waa in 12kii kursi cidii lahayd 1960kii oo ah beesha dhulbahante iyaga kaliya ku tartamaan oo iyadu hesho.

Arrinta la xyidhiidha kootada haweenka, arrintaas kootada waxaan ku saleynayaa saddex arrimood oo taagan sidaa darteed waxaan leeyahay suurtagal maaha kootadu, waa marka kowaad ee Shareecada Islaamku siday tilmaamtay Dastuurkana inoogu qoran dumarka iyo raga mid waliba wuxuu leeyahay wixii midkood laga reebay mooye xuquuq siman, dumarka shareecada islaamku hogaanka way ka reebtay, siyaasada way ka reebtay, waxaynu leenahay culimo shalay bay bayaan soo saareen horena waa loo soo saaray, waxay leeyihiin suurtagal maaha shareecada Islaamkana way khilaafsan tahay, Dastuurkuna waxaan qabaa sida Gudiddu soo jeedisayba inuu sidaas oo kale u reebayo oo aan suurtagal ahayn, arrinta saddexaad ee aan ku salaynaana waa heshiiska xisbiyada ee shalay oo ay ku heshiiyeen inaan kooto la sameyn laakiin dumarka laga sharaxo xisbiyada tiro ay isla garteen, sidaa darteed inagu xisbi afraad ama shanaad ma nihin, siyaasadana xisbiyadu iyagaa gooya wax inagu khasbaya ma jirto, waxan leh tiro go'an oo cayiman iyagay u taala halkay shareecada isla qabanayaan, laakiin Kootadu waa mid shareecada khilaafsan, dastuurkana khilaafasan aan suurtagalna ahayn.

Arrinta la xyidhiidha Deebaajiga ay gudiddu soo jeedisay, waxaan qabaa soo jeedintan Gudiddu iyo soo jeedinta Xukuumadu xeerka ku soo jeedisay labaduba waa culays, qofka muwaadinka ahi wuxuu xaq u leeyahay in la doorto waxna uu doorto, wax kasta oo caqabada oo xaqiisa ku waayi karo ma fiicna, waxa laga yaaba inuu lacagtaasba waayo musharaxu, sidaa daraadeed waxaan leeyahay culeyska in la saaro maaha, shuruudahana kuwa dastuurku tilmaamay ha lagu saleeyo.

Arrimaha la xyidhiidha xadgudubyo badan oo uu sheegay Mudanihii iga horeeyay ee C/qaadir Jirde Xeerkan ina horyaal bay intooda badan ku qoran yihiin, hadii ay jirto cid

hub ama nidaam ciidan xisbiga ama ururka isu abaabula xeerku wuu tilmaamay, hadii ay jirto dhaqaalaha qaybta labaad baa laga hadlayaa oo **Qodobka 94aad** baa dhaqaalaha iyo nidaamintiisa laga hadlayaa, cid awooda u leh qaadhaan ururinta iyo habka reeban ee hanti lagu heli karayo waxay ku-xigaan **Qodobkaas 92aad.**

**Qodobka 17aad** ee awoodaha Komishanka baan ku dari lahaa farqad cusub oo ah "waa in ay yeeshaan awood ay ku baadhaan hadii ay timaado cabashooyinka noocan ahi" waa inay audit-gareyn karaan xisbiga, hadii ay arrin amaan tahay waa inay baadhi karaan marka cabasho loo soo gudbiyo oo hadii xisbi ama urur ay ka timaado cabasho ah inuu isticmaalay ciidan ama isticmaalay hub ama isticmaalay lacag shisheeye ama lacag meel khaldan uu ka helay, sidaa darteed waa in la helaa awood dhaqaajisa oo suurta-galinaysa baadhista dacwadaas, marka waa in la siiyaa awoodaas baadhiseed oo lagu daraa Qodobkaas 17aad, wixii kale oo dhami way inoo taxan yihiin.

Arrinta la xyidhiidha beelaha la hayb sooco iyo kuraastooda, waxaan qabaa in lixda Gobol laga sharaxo sida la soo jeediyay xisbi waliba lix ka sharaxaa sidaa daraadeed hadii la dooran waayo oo iyagu is dooran waayaan kuma xidhna, intaasaan ku koobayaa waad-mahadsan tahay Gudoomiye.

**Md. Cabdiraxman Yuusuf Cartan** **(20min, 26sec):-** Bacda salaam, horta xeerkan sida hore loo sheegay wuxuu **isugu jiraa dhawr sharci, oo isku soo noqnoqonaya hadaan ku bilaabo Qodobka 4aad faqradiisa 7aad** cod bixiyayaasha doorasho heer gobol wakiilo oo ay ku jiraan murashaxiintu waxay ka codayn karaan goobta cod bixineed. Waxaa ku qoran goobtay iska diwaan galiyaan bay ka codaynayaan.

Waxaan Gudoomiye soo jeedinayaa Gudoomiye dhulku waa kala fog yahay murashaxa iyo dadweynuhuba, eeg dooroshooyinku saddex nooc weeye waa heer qaran heer gobol iyo heer degmo waxaa qoran doorashada Madaxweynahaa heer qaran ah madaxweynaha iyo ku xigeenku meel kasta oo qaranka ka mida ayay ka codayn karaan baa qoran oo ay markaa joogaan waxaan soo jeedinayaa sidaa si leeg Golaha wakiiladu gobolka ay ka sharaxan yihiin meesha ugu dhow ee cod bixineed inay ka codayn karaan. Dadweynaha u codaynaya golaha wakiiladuna waa in codbixinta ugu dhow qorka reer miiga ah, qofka meel degan oo iska diwaan galiyay meel kale la odhan kari maayo ha tago halkii uu iska diwaan galiyay, markaa waa inuu goobta ugu dhow ee cod bixinta ka codayn karaa oo uu tagaa ee gobolkii ah.

Dooroshooyinka degmooyinka sidaa si leeg xildhibaanada u tartamaya golayaasha deegaanku waa inay iyaguna ka codayn karaan goob kasta oo degmadaa uu ka sharaxan yahay ah. Dadweynaha degmadaa ka diwaangashinana waa inay goobta cod bixinta ugu dhow ee cod bixineed ka codayn karaan. Taasi waxay keenaysaa in liiska cod bixiyayaashu ee Golaha wakiiladu oo goob kasta yaalo oo cod bixineed soo jeedimahaasaan samaynayaa.

**Qodobka 27aad** farqada 1aad waxaa inoo qoran public officer AF ingiriisi baa inoo qoran waxay ku turjuman tahay sarkaal guud, sarkaal guud maahee waa sarkaal dawladeed hala badalo halkaas. waxaa kaloo jira arin aad iyo aad halkan diwaan galinta, si fiican oo faahfaasan baa looga hadlay, laakiin ma cada oo xeerkan qodob qudha oo sheegayaa ma jiro in diwaan galintii hore ay ku dul dhismayso oo diwaana galintii hore waxaan kusoo kordhiyay oo dadka la diwaan galinayaa ay yihiin wixii gaadhay 16 jir iyo dadkii hore ee aan codaynin soo jeedintaydu waxaa weeye waa inay cadaataa in dadka la diwaan galinayaa aanay umadoo dhan ahayne ay yihiin wixii 16 ka weyn iyo dadka doorashadii u dambaysay ee madaxweynaha aan kaadhka qaadan .

Waxaan kaloo soo qaatay **Qodobka 56aad** waxaa ku qoran madaxweynaha ama qofka madaxweyne isku sharaxaya ee haysta baasaboor ajanabiya sidaa ay u qoran tahay si khaldan weeye waa in si cad loo qoraa loo baahan yahay oo ay tahay micneheedu qofka doonaya inuu madaxweyne ka noqdo Somaliland ee baasaboor ajanabiya haystaa waa inuu wakhti ka hor uu ka noqdaa muwaadinimadii uu dalkaa ka joogay dabeetana uu keenaa immigration ka dalkaas inuu ka noqday jinsiyadii uu dalkaa ku jiray. Waayo Nin laba wadan u dhaartay ma aamini karayno qodobkaasaan soo jeedinayaa. Waxaa kaloo jira qodob muujinaya xogta ay soo jeediyaan, xogta marka ay xisbiyada iyo komishankuba waxay baadhaan xogta ay soo jeediyaan soo qortaan dadka doonaya madaxweyne nibada ku xigeenka iyo golaha wakiilada, xogtaas xildhibaanka ama Madaxweynaha been ka sheega xogtaa ama sheegta shahaadooyin aanu lahayn ama shaqooyin uusoo qabtay, qofkaasi been buu sheegay qof been sheegayna madaxweyne kama dhigan karno markaa waa in baadhis lagu sameeyaa xisbiguna soo baadhaa komishankuna soo baadhaa marka lasoo gudbiyo qofka murashaxa ah in xogtaas xildhibaankaas ama madaxweynuhu ay sax tahay waxaa ina soo maray dad aan secondary ka bixin oo PHD inoo sheegtay hadii xogtaas cadaato inay been tahay waa in laga joojiyaa inuu is sharaxo madaxweynaha iyo xildhibaanka oo kii lagu badali lahaa la keeno, hadii xildhibaanku marka uu soo baxo cadaato in xogtiisi been ahay waxaa badalaya xildhibaankii ku xigay ee xisbigiisa ahaa waana laga saarayaa isaga .

**Qodobka deebaajiga** waxaan u malaynayaa gudoomiye guddidu nasteexeeyey is lahaayeene markay sidaa soo qoreen oo fowdo ayaa laga baqayaa in cidkastaa tidhaa murashax baan ahay waxaan soo jeedin lahaa gudoomiye deebaajiga madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa ma taabanayno waxaan soo jeedinayaa xildhibaanada deebaajigoodu ha noqdo **17,000,000 slsh (todoba iyo toban milyan Kun)** una dhiganta **$2000 (laba Kun oo dollar)**. Golayaasha deegaanka kuwa A da ah **$500** kuwa B da iyo Cida waxaan odhan lahaa **$300** lacag u dhiganta halaga qaado. Hadii aynu kusii dayno lacagahaa faraha badan dee dad gaara baynu u xidhaynaa waana ayaan daro inteena lacagta haysataa waa in yar oo budhcada aflagaadana hayga ahaatee. Markaa dadkii dhawrsoonaa ee wanaagsanaa ee sharafta lahaa lacag ma haystaan hadaynu markaa nidhaa toban Kun oo

doolar ha bixiyaan ninka soo galaya golaha wakiilada ama ka soo galaya golayaasha deegaanka ha bixiyo lix Kun oo doolar dadkiibaynu ka saaraynaa meeshii.

Waxaan kaloon gudoomiye soo jeedinayaa in maayarka degmooyinka A da iyo B ah gaar oo doorto. Maanta caasimadu Nin ay garanayso oo shicibku ku kalsoon yahay ama gabadh ama wiil kuu noqdaba doortaan oo aan lagu sii dhex dayn inuu shaydaan soo baxo uun, waayo maayarku waa muhiin. Waxaan odhan lahaana in Shan Kun oo qof soo saxeexaan oo ay idhaahdaan Nama anfacayo **(petition)**

**Qodobka 78aad** aniga horta waxay ilatahay xisbiyadii hadlay qardajeex weyn bay sameeyeen haday ka hadlayaan 18 ka xubnood ee xeerka ku jira, qalad bay galeenoo xeer laga doodayo inay ka hadlaan may ahayn. Hadii ay ka hadlayaan sida xildhibaanada qaar sheegeen inay soo jeedinayo ay intaa sharaxayaan taana iyagaaba dambi ka galay haweenkii sababtoo ay tahay dooroshooyinkii hore 45 dumar ah baaba isa sharixi jiray 18 murashaxna ma hadalbaa maxay u goynayaan hadaanay iyagu waxba siinayn waa in dumarka intii doonaa isa sharixi kartaa markaa labada jeerba khalad bay galeen haday xeerka ka hadlayeen isagoo laga doodayo inay ka hadlaan may ahayn haday leeyihiin saddexdaayada xisbibaa 18 qof baanu siinaynana taasina waa dambi kale.

Waxay ilatahay xildhibaanadu aadbay uga hadleen arinta kootada ragbaa waxay idhaahdeen dastuurkaa kasoo horjeeda, dastuurku kama soo hor jeedo kootada aad iyo aad buu u taageersan yahay shareecada islaamkuma kama soo horjeedo doorashada madaxweynayaal iyo raysal wasaarayaal badan baa ka ah dalalka muslimka ah. Dastuurku sinaanta muwaadiniintuu ka hadlayaa qodobka 8aad ee dastuurka wuxuu odhanayaa muwaadiniinta Somaliland iyada oo aan lagu kala sarayn midabka, qabiilka, dhalashada, luuqada, lab iyo dhedig, hantida mudnaanta afkaarta waxaa sharciga hortiisa ku leeyihiin xuquuq iyo waajibaad siman waa qodobka ay xildhibaanada badankoodu tix raacayeen oo ay leeyihiin maadaama gabdhuhu leeyihiin xuquuq la siman ta raga maxaa loo gaar yeelayaa, waxaa loo gaar yeelayana waan idiin sheegayaa.

**Qodobka 36aad** ee dastuurka waxaa ku qoran xuquuqda haweenka , dastuurku isagoo xuquuqdii muwaadiniinta oo dhan kusoo sheegay qodobka 8aad ayuu qodobkani si gaara u tilmaamayaa xuquuq gaara oo haweenku ay leeyihiin wuxuuna odhanayaa xuquuqda, xoriyaadka iyo waajibaadka uu dastuurku u xaqiijiyay haweenka iyo raga ula siman yihiin wixii shareecada gaar u yeeshay mooyaane qodobka kale xukuumadu waa inay dhiiri galisaa xeerna kasoo saartaa xaqa ay haweenku leeyihiin inay ka xoroobaan dhaqamada aan shareecada waafaqsanayn ee waxyeelada u leh jidhkooda iyo damiirkooda waa dastuuri. Waa inay Baarlamaanka gali karaan waa inaan la dilin. Hadii qabiilka iyo odoyaashu u ogol yihiin ma baryootanteenba cidba wax ma waydiisateen.

**Md. Saleebaan Diiriye Barre** **(23min 31sec):-** Ugu horay shir-gudoonka, Mudanayaasha, Saxaafada Dawlada, Ta madaxabanaanba iyo marti-sharaftaba waxan ku salaamayaa salaanta Islaamka Asc wr wr, Marka hore waxaan aad iyo aad ugu xumahay in Gole ahaan xildhibaanadii ay qaybi maqantahay aynanu ku qancin kari weynay in shirkayn soo galaan.

Xeerkan halkan ina horyaalaa waa xeer aad u miisaan weyn, waxaana isku jira xeerkii doorashooyinka Qaranka, Xeerkii doorasha Golaha wakiilada iyo deegaanka iyo madaxweynaha, waxaa ku jira xeerkii Komishanka qaranka, waxaa ku jira xeerkii Cod-biyayaasha, waxaa ku jira xeerkii lala saarista Ururada/Xisbiyada waxaanan qabaa in uu xeerkanu u baahanyahay in la furfuro si ay u yaraato Su'aasha ay muwaadiniintu soo jeedinayaa ee ah "*xeerkaasi halkuu ku jiraa*" ***waxaanan soo jeedinayaa in xeer walba magiciisa loogu yeedho oo la furfuro.***

**Cutubka 1aad qaybtiisa 2aad iyo cutubka 3aad qaybtiisa 1aad** intuba waxay ka hadlayaa codbixiyayaal waxaanan aamin sanahay in uu isku daadsanyahay, markaa Gudoomiye waxaa loo baahanyahay in dib loo celiyo oo dib loo review-gareeyo oo xeerarku marka ay Golaha imanayaan loo gudbiyo Garyaqaanka Golaha.

**Qodobka 4aad farqadiisa 4aad ee** shuruudaha codbixiyaha; Waa in uu yahay cod-bixiye ka diiwaangashan goobta uu ka codaynayo, haddii aanu kamid ahayn hawl-wadeennadda xafiiska goobta codbixinta, wakiillada xisbiyada/ururrada ee goobta ama ciidanka booliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka goobta cod-bixinta. maadaama oo dalku uu kala duwanyahay deegaan ahaan iyo dhaqan ahaanba oo dadka qaar yihiin dad xoolo dhaqato ah, qaar yihiin qaar aan guurinba *waxaan soo jeedinayaa in qodobkaa la beddelo oo Doorashada Golaha Wakiilada, Doorashada Golaha Deegaaka oo kale maadaama oo ay bulshadii saamaynayaan oo ka duwanyihiin Doorashada Madaxtooyada waxaan soo jeedinayaa in laga dhigi marka ay doorashadu tahay heer golbol ay Xildhibaanadu ka Cadayn karaan Goob kasta oo Gobolkaa ka mid ah, muwaadiniintuna ay ka cadayn karaan sidoo kale meel kasta oo gobolkaas ka mid ah, maadaama oo liisku yaalo goob walba oo la mid ah gobolkaas oo xayiraada laga qaado. (4mudane ayaa taageeray).*

**Qodobka 6aad,** musharixiinta u tartamaya Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa waxay ka codayn karaan Goobkasta oo doonaan waan in sida qodobkaas oo kale la waafajiyo in xildhibaanada Golaha deegaanka u tartamaya iyo xyidhibaanada Golaha Wakiilada u tartamaya.

**Qodobka 5aad**, Xuquuqaha codbixiyaha, **Farqada 1aad** oo ah; Inuu codkiisa ka dhiibto goobta uu cod-bixiye ahaan uga diiwaangashan yahay. ***Waxaan soo jeedinayaa in farqadaa lagu beddelo; in uu codkiisa ka dhiiban karo goob kasta oo gobolka ka mid ah iyada oo loo diwaan galinayo goobta uu ka diwaan gashanyahay codbixiyuhu loona eegayo***

***sharciyada in kaadhka uu haystaa uu saxyahay isla markaana loo diwaan galiyaa si waafaqsan xeerka.***

**Qodobka 5aad Farqadiisa 2aad;** Cod-bixiyaha ka maqan dalka JSL wuxuu ka codaynayaa xafiisyada diblomaasiyadeed ee JSL ku leedahay dibedda ee ugu dhow, haddii aanay jirin ama aanay suuragal ahayn waxa tallo ka gaadhaya Komishanka. Waa dhaliilaha ku jira xeerka oo qofka Hargiesa Jooga ayaa la leeyahay kama codayn karo Laas-caanood, kama codayn karo Boorama, ***markaa waxaan leeyahay caqli galmaaha in aanu nidhaa nin Inriiska jooga ayaynu odhanaynaa wuxuu ka codaynayaa safaarada oo halkan ayaynu keenayaa*** waayo ma haysano tasiilaad fududeeya waxaas oo dhan. Si ka halkan jooga ee laascaanood ama boorama ka soo qaatay ayaynaan u sixi karin ***sidaa awgeed waxaan soo jeedinayaa in Farqadaa 2aad kabi ahaanba meesha laga saaro lana laalo.***

**Qodobka 6aad farqadihiisa 4aad, 5aad iyo 6aad** waxay xadgudub ku yihiin dastuurka Qaranka wuuna ka hor imanayaa markaa ***waxaan soo jeedinayaa in laga saaro xeerka.*** aniga oo u cuskanaya in ay dhamaanba ka hor imanayaan dastuurka Qaranka jamhuuriyada Somaliland in komishanka Qaranka la siiyay awood aanu lahay oo ah awoodii ay lahaayeen Golaha Guurtidu, sidoo kale mudo kordhinta mar ay xaqiiqada ka hadalno waxaa iska leh Golaha Guurtida, mana aha in aynu ku xad gudubno ee waa in aynu ixtiraamnaa mana aha in aynu xeerar is khilaafaya aynu soo saarno. ***Waxaan soo jeedinayaa in Golaha Guurtida loo daayo komishankuna ay ku ekaadaan Xeerkooda oo ah inay ka shaqeeyaan wixii farsamo ah ayna mudo kordhin u sameeyaan.*** ***(3mudane yaa taageeray)***

**Qodobka 7aad farqadiisa 1aad;** Si waafaqsan Qodobka 22aad ee Dastuurka dalka iyo shuruudaha Xeerkani jideeyay, marka uu soo magacaabo xisbiga/ururka uu ka tirsan yahay muwaaddin kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu isu taago doorashayooyinka kala duwan ee madaxtooyada, Golaha wakiillada iyo Golayaasha Deegaanka. ***Marka hore waxaan doonayaa in farqadaa ka saaro Ururo ma soo magacaabaa xubno Gole wakiilo iyo Gole deegaan midna iyo mid madaxweyne, waxaan soo jeedinayaa in qodobkaa laga saarao "URURKA"***. *Oo uu noqdaa marka uu soo magacaabo xisbigu.*

**Farqada 2aad ee Qodobka 7aad;** Xisbiyada Qaranku waa in ay u soo xulaan musharixiinta doorashada uga qayb galaya si Xeerkan waafaqsan, caadalad ah, daahfuran una adeegsaysa ujeeddooyinka Xeerkan. Waxaa soo jeedinayaa in farqadaa laga dhigo ama lagu beddelo ***"si waafaqsan qodobka 22aad ee dasuurka qaranka jamhuuriyada Somaliland farqadiisa 1aad".***

Sidoo kale waxaan soo jeedinayaa in jaanis la siiyo muwaadiniinta aan u jaanis u helin in ay xisbi ka soo baxaan oo aynu dabarka ka qaadno muwaadiniinta leh Han siyaasadeed oo uu tartanka uu soo gali karo "MUSHARAX MADAXBANAANI" oo doorashada madaxweynaha gali karo, oo ta Golaha Wakiiladda gali karo, oo taga Golayaasha Deegaanka uu soo gali karo. Waxaanan ku sababaynayaa iyada oo laga duulayo muwaadiniinta doonaya inay tijaabiyaan hankooda siyaasadeed, inaga oo eegayna maadaama oo qarankani uu jilicsanyahay dhaqaale, dadka faraha badan ee dhamaantood doonaya in ay is sharaxaan waa in xeer loo sameeyo oo ay dawladu dhaqaale ka hesho, uuna noqdaa tartan daah-furan oo hadii uu soo boxo xisbiga uu ku biirayo lagu cadeeyaa xeerkooda. *(3mudan ayaa taageeray)*

**Qodobka 8aad farqadiisa 3aad** waxaan soo jeedinayaa in laga saaraa xeerka, waayo waxay ka hor imanayaa xeerarka dalka u yaala, waayo komishanku waxay soo bandhigayaan siyaasada doorashooyinka qaranka, marka ay la tashadaan Asxaabta qaranka, Baarlamaanka, iyo markay la tashadaan Madaxweynaha Qaranka laakiin maaha in ay kaligood talo bixiyaan.

**Qodobka 11aad ee goobaha doorashada;** waxaa ku jira wax aynaan hore u arki jirin oo xeerarkii hore aan ku jirin, waxaanu dhamaantii ka soo horjeedaa qawaaniinta dalka waxaanan soo jeedinayaa ***"in dhamaantii qodobkaa meesha laga saaro"*** waayo waxaynu nahay qaran 30jirsaday mana qabo in dalka ay jirto meel aanay doorasho ka qabsoomayn, hadii ay jiraan xurgufo siyaasadeena, qaranka cid ayaa amnigiisa u xilsaaran, waxaanan qabaa hay'adeheena 30jirka ahi in ay ku filanyihiin, xalintooda iyo dejintooda meelaha muranada siyaasiga ahi ka jiraan, maadaamo oo aan meel shisheeye la inaga soo duulayn waa in aan la odhan komishanka ayaa halkaa go'aan ka gaadhaya ama xukuumada ayaa go'aan ka gaadhaysa, ama dad xaq u leh inay codeeyaan ayaa xaqooda la qaybsanayaa oo dusha laga qaybsanayaa. *(2mudanye ayaa taageeray)*

**Qodobka 16aad**; **Xil ka Qaadista Komishanka** waxaan soo jeedinayaa in aanu Madaxweynuhu aanu xilka ka qaadi karin xubinta komishanka, waayo inta uu ka baqayo xilka ayaa lagaa qaadayaa, dadka uu u garsoorayo dhex ka noqon maayo, sidoo kale halka marka ay Golaha wakiiladu xilka ka qaadayaan Xubinta komishanka waa in aanay noqon SIMPLE MAJORITY EE *waxaan soo jeeinayaa in laga dhigi "ABSULTE MAJORITY"*

**Qodobka 17aad** ee Awoodaha Komishanka waxaa ku qoran farqadiisa 5aad Inay komishanku ku dhawaaqaan natiijooyinka doorashooyinka Madaxweynaha iyo ku-xigeenka si ku meel gaadh ah, inta aan Maxkamadda Sare ansixin. yaa ku dhawaaqaya ta Golaha Wakiilada iyo Golaha Deegaanka ma cid aan komishanka ahayn ayaa loo igmanayaa"***waxaan soo jeedinayaa in qodobkaa in laga dhigo komishanka***

***doorashooyinka qaranku waxay ku dhawaaqayaan xubnaha u soo baxay Golaha Wakiilada iyo Golaha Deegaanka inay ku dhawaaqaan in ta aan Maxkamada Sare ansixin."***

**Qodobka 32aad da'da Xaqa codbixinta;** waxaa xeerka ku qoran Da'ada Codbixin kartaa waa 16 jir  waxaan qabaa in ay midaasi bahdil tahay, waa diita islaamka qofku inta uu ku qaangaadhaa waa 15jir waana in aynu waafajinaa sunaheena

**Qodobka ah Cida isku Sharaxaysa Golaha Wakiilada iyo Golaha Deegaan;** waxaan soo jeedinayaa aniga oo ixtiraamaha da'yarta aqoonta leh ee dalka joogta, aniga oo sharaf u haya haween ama rag kuudoona ha noqdee in da'da Qofka isku sharaxaya Golayaasha qaranka in lagu soo koobo 40 sanadood, waayo waa marka uu qofku majuurka yahay ee uu sax iyo khalad uu kala saari karayo waayo da'dii NNKH Nabigeena lagu soo dajiyay Waxyiga intii ka horaysayna waa la barbaarinayay.

**Qodobka 78aad ee habka qaybinta Kuraasta;** waxan leeyahay qodobkaa ka gole ahaan waxyaabo badan oo aynu u qaban karno ayaa jira, waxa aynu nahay dad Islaam ah, waxa aynu nahay dad Ehel ah, waxaynu nahay dad 30kii sano ee la soo dhaafay xalisan jiray mushkiladaha dhexdooda yimaada, waxaan u arkaa in ay maanta tahay khalad iyo hogaamin la'aan in maanta Goleheenii uu maanta badh dibada joogo, "*waxaan qabaa marka laga hadlayo beelaha Darafyada  cabasho ka jiro waxaan soo jeedinayaa in Gobolka Maroodi-jeed uu yahay uu meel la isgu yimid oo xarumihii dawladu ku dhanyihiin, oo marka uu qof gurigiisu gubto ama daad qaado Madaxweynuhu uu tagayo, waxaan qabaa 20 xildhibaan in badh laga jaro ayanu u jarno beelaha darafyada oo laga jaro 2xuboon.*

**Qodobka kootada;** waxa aynu nahay dad Islaam ah dastuurkeenana waxaa ku qoran wax-kasta oo diinteena ka soo hor jeedaa waa baadil ama waa waxba kama jiraan waanay reebantahay, ***qodbkaa waxaan taageerayaa oo aan ku waafaqsanahay soo jeedinta Gudidda Arrimaha Guha***da. Waxaanan qabaa in muwaadiniintu siman yihiim si simana loo doorankaro waxna u dooran karaan, waayo hore ayay u galeen wayna ku soo bexeen, markaa waxaan leeyahay waxaynu leenahay ayaad iyo nas, waa in aynu wixii ay ina fareena qaadanaa wixii kalana aynu ka taganaa.

Sidoo kale qolyaha dabada ka riixaya arintan aniga oo ixtiraam u haya sida midawga yurub, marka ay taariikhda ku noqono qarnigii 19aad badhtamihiisii ayaa ugu horaysay inay cod yeeshaan haweenka Yurub iyo Maraykan ku nooli, inagana waad ogtihiin halka ay diinteenu gaysay, mana jirto meel ka sarayso meesha diinteenu gaysay, hableheena waxaan u sheegayaa in aana la gaynany meel ka saraysa meesha ay diintu gaysay. Sidaa awgeed iyaga oo midawga yurub nagala shaqeeyay dhismaha qaranimada Somaliland,

waxaan u soo jeedinayaa in aanay ka shaqay duminta qaranimada, waana in ay nagu ixtiraamaan diintayada.

**Qodobka Deebaajiga Musharixiinta;** waxaan qabaa marka laga hadlayo Degmooyinka "A" ah marka aynu qiimayno maanta bulshadeen %70-tan maanta waa musharixiin, markaa waxaan la qabaa xildhibaano badan in maanta dadka lacagta haystaa ayna ahayn dadkii ku haboonaa inay is sharaxaan, lakiin dadkii dadkan iyo dalkan wax ka beddelilahaa ay yihiin dad badan oo aan maanta waxba haysan, markaa waxaan soo jeedinayaa in si kor loogu qaado dadka meesha imanaya in Golaha Wakiilada laga dhigi Master's Degree, ta golayaasha deegaanka waxaan soo jeedinayaa in Maayirada Caasimada la doorto *(5 mudane ayaa taageeray ).*

***Waxaan soo jeedinayaa** in Musharixiinta u tartamaya Goha Wakiilada maadaamo oo uu yahay Golihii u sareeyay ee xeer dejinta iyo goleyaasha Deeganka in xildhibaanad isku sharaxayaa aanay haysan Jinsiyada kale, waana musharaxa haystaa lixbilood gudahood uu cadeeyo in uu celiyay jisiyadii dadka kale ee uu haystay maadaama oo uu yahay qof muwaadin ah xaqna uu u leeyahay in uu is sharaxo, lana doorto waxna doorto. Markaa waa in uuna haysan qofka isku sharaxaya Madaxweyne, Gole Wakiilo Iyo Gole Deegaanba. (2mudane ayaa taageeray).* Waad mahadsantihiin wsc.

**Md. Ibraahim Jaamac Cali (Rayte) (24min 33sec):-** Gudoomiye waad mahadsatahay waan salamayaa xildhibaanada, waa markii ugu horaysay ee xeer distooriya oo dalka oo dhan taabaya ay xildhiaanada qaar ka baxaan doodiis inta kalana iska wadato, taasi oo markhaati u ah tabashooyinkii markii horaba la sheeganayay in ay xaqiiqo yihiin ayay muujinaysaa waa wax laga xumaado, waxaanan qabaa in xeerkan ansixintiisu inagu adkaan doonto iyada oo gobolada qaar ka maqan yihiin dhaawac weyn ayay Somaliland ku noqon doontaa oo dhismihiisa iyo qodax tirkiisii aynu ka baydh baydhnay.

Doodana waxaan u galay in aan wax iimuuqda wax ka idhaahdo dooda iyada oo laga yaabo in xeerka sidaa lagu ansixiyo, ugu horayn waxaan ka hadlayaa waxa aynu nahay dal dimuquraadi ah oo distoor leh ay ku socdaan, iyada oo dimuquraadiyaduna inagu cusub, iyada oo dhanka kale aynu ka wadano dhaqamo ayna wali is dhexgalin dimuquraadiyadana weynu wadanaa, inta ay is dhexgalkaasi imanayana waxaa haboob in lagu socdo consciences iyad oo xeerka ay bulshada qaybi ogoshahay qaybina diidan tahay hir galitiisu way inagu adkaan doontaa.

Dimuquraadiyada lafteeda waxaa ku jira, oo mabaadii'ddeeda ka mid ah oo ay diidantahay iyada oo rule ka ay ku socotaa uu yahay Majority rule minority hadana waxaa jira wax la yidhaa dictatorship of the majority, mararka ma majority-gu damco in

uu awood ku muquuniyo oo ay mujtamaca qaybo ka mid ahi ay noqdaan in dhinac la iskaga riixo taasi dhaawac ayay dimuquraadiyada u keenaysaa.

Iyada oo uu dastuurkeenu ku salaysanyahay wadatashi ay Somaliland talada ku kala qaadato, hadii aynu taas diidno Dastuurkii ayaynu jabinay ayaan qabaa anigu, waxaanan leeyahay xeerarka iyo dalkaba ha loo sinaado oo hadii ay cabasho soo baxdo la isku tixgaliyo, hadii kale waxaynu noqonaynaa gardiid.

Hadii aan xeerka u soo dago xeerkani waa xeer aad u wayn kana kooban 157qodob isga oo wakhtiguna cyidhiyidhi inagu ahaa oo ay ahayd in mudo bil ah ay doodiisu socoto, hadana waxbadan ka odhan maayo soo jeedinta gudidda laba eray ayaan ka odhanayaa xeerkana laba ama saddex eray ayaan ka odhanayaa.

Soo jeedinta gudidda gudoomiyo meelo badan waxaa ku qoran sidan ayaa loo beddelaya markaa waxaan leeyahay gudidu awood ay wax ku beddesho malahan ee waxay leedahay soo jeedin, sida dooda Golaha ka socota oo ay sharciyan la qiimo tahay kaliya waxaa gudidda awoodaa loo siiyay inay inoo soo koobaan xeerka ee maaha inay wax baddelaan, kaliya waa in ay soo jeedin sameeyaan ee waxaan jeclaaday Gudoomiye iyana aan saxo.

Gudoomiye waxan is leeyahay wey jiraan waxyaabo badan oo u baahan in la saxo, kaliya waxaan saxayaa waxyaabo aan isleeyahay waxay ka hor imanayaan dastuurka sida xyidhibaanada deegaanada ee lagu xidhay hantida iyo lacagta faraha badan ee deebaajiga ah iyo shahaadada sare, distoorku Golaha wakiilada oo ah hay'ada ugu saraysa xeer-djinta kuma uu xyidhin taas ee waxa uu ku xidhay dugsi sare, wax hanti ah oo uu ku xidhayna ma jirto, markaa distooriyan ayay qalad u tahay arinkaasi, waayo qof kastaa xaq ayuu u leeyahay in la doorto waxna uu doorto.

Markaa waxaan qabaa hadii inta wax haysata loo xidho intii xilkaska ahayd ayaa badan koodi laga yaabaa in ay meesha ka baxaan, waxaa kale oo qalad ah in qofku kuwaayo xaqiisii distooriga ahaa hanti in aanu haysan oo lagu xidho. *Waxaan soo jeedinayaa in dugsi sare lagu koobo oo laga saaro jaamacada, waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in da'da lagu dooyo 25jir waayo waxaad arkaysaa Nin ka masuul san 30jirka.*

Marka aan intaa ka gudbo waxaa laba eray ka odhanayaa arinta kootada, mudane Gudoomiye inaga oo in badan golahan fadhinay in aan wali xildhibaano badani aanay fahan u lahayn Distoorka, oo aanay minihiisa haba yaraayee u gondadagin ama ay ka baydh baydhayaan, waayo waxaan arkay tafsiiro badan oo aanay Maxkamada dastuuriga ahi keenin oo aan Golahani isku raacin oo aad moodo in dadbadni isla qaateen.

**Qododka 8aad** ee Dastuurku waxa uu sheegayaa in ay dadku u simanyihiin Sharciga, sinaantaasina waa xaquuq muwaadin, arinta kootada ee laga hadlayaana waxaan qabaa in ay tahay arin Distoori ah, tusaale ahaan hadii halkaa cisbitaal laga dhiso oo aan loo samayn meeshii curyaamiinta lana yidhaa dadku way u simanyihiin, waxaa halka ka cad in aan loo sinayn adeegiisii iyo xuquudii cisbitaalkaa, markaa waa in loo sameeyaa meel gaadhi curyaanku uu maro si xaq isku mid ah looga helo.

Markaa dumarka iyo dadkaa la takooraa waxay wataan gaadhi curyaan meeshuna waa jaranjaro ee waa in laga qaadaa jaranjaradaa distoorkuna wuu waajibinayaa oo waxa uu ku waajibinayaa isla qodobkaa sideedaad farqadiisa labaad oo sheegaysa in dhaqamada xun xun ee soo jireenka ah lala dagaalamo, iyada oo caqabada kaliya ee hor taagani ay tahay afkaartaa, ee ma jirto micne kale oo ay leedahay kootadu, ee waa in laga hor qaadaa.

Qodobka 21aad farqadiisa 1aad iyo 2aad ee Dastuurku hadiii aan idiin akhriyo waxa uu odhanayaa;

1. Waaxaha Xeer-dejinta, Fulinta iyo Garsoorka ee Qaranka iyo kuwa dawladaha hoose ee gobollada iyo degmooyinka Jamhuuriyadda Somaliland heer kasta ha ahaadeene, waxay u hoggaansamayaan shuruucda ku cad qodobada xubintan.

2. Qodobada la xyidhiidha xuquuqda iyo xorriyaadka aasaasiga ah waxa loo fasirayaa si waafaqsan bayaannada caalamiga ah ee xuquuqda aadamaha iyo xeerarka caalamiga ah ee Dastuurka ku xusan.

Markaa waa in la raacaa Qodobadaa dastuuriga ah, waana in meesha laga saaraa afkaaraha iyo dhaqamadaa soo jireenka ah kana hortaagan in ay golayaasha soo galaan Dumarku, hadii aynu diidnana distoorkii ayaynu ku jabinay, distoorkuna waxa uu leeyahay in golahani aanu baal mari karin qodobada dastuuriga, markii la qorayay qodobkan 8aad waxaa laga hadlayay kootada haweenka iyo dadka la haybsooco ee wax kale looguma qorin waxaanan qabaa inaan dastuurka ka hor imanaynaa.

Dad qaar ayaa waxay leeyihiin diinta islaamka ayay ka soo hor jeedaa, diinta Somali oo kali ahi ma lahan oo wadamo badan oo islaam ah ayay Raysal wasaarayaal ka yihiin, markaa ma macquul ayay tahay iyaga oo wasiiro ka ah wasaarado in la yidhaa Baarlamaanka gali maayaan, dee diin ka hadli maynee wax kale ayaa laga hadlayaa ee waa in Dastuurka la raacaa waayo isaga ayaa ina xukuma.

Laba eray ayaan ka odhanayaa xeerka, xeerkan waxaa ku jira waxyaabo badan oo farsamo ahaan u baahan in la hagaajiyo, laakiin anigu waxaan farta ku fiiqayaa Qodobka 78aad farqadiisa 1aad Haddii deegaano dalka ka mid ah ay la soo gudboonaato duruufo culus ama xaalado aan saamaxahayn in doorasho ka qabsoonto, waxa soo qiimaynaya go'aana ka gaadhaya

xaaladahaas Komishanka Doorashooyinka Qaranka, markay sidaas isla gartaan Xukuumadda iyo Axsaabta Qaranka. Anigu ma qabo in xukuumada awoodaa go'aan gaadhista in la siiyo, mana jirto meel ay aduunku ku leedahay awoodaa go'aan gaadhiseed kaliya waxay lug ku leedahay Amniga oo kaliya. *"Waxaan soo jeedinayaa in Erayga Xukuumada laga saaro farqadaa" waxaa kale oo aan meesha ka saari lahaa farqadaha 8aad, 9aad iyo 10aad.*

way jiraan meelo yar yar oo ayna doorasho ka dhacayni, ee dalka oo dhan waa lawada diwaan gashanyahay inta kalana waatan hada la wado ee ha is di waan galiyeen ayaan leeyahay, waxaa kale oo aan taageerayaa codkaygana ku darayaa ***"Magaalooyinka waaweyn ee "A"-da ah waa in maayiradooda la doortaa inta kalana ee doorashadu ka dhacaysaana waa in ay sidii caadi ahayd iska dhex doortaan" (5mudane ayaa taageeray).***

**Md. Cabdiraxmaan Maxamed Jaamac** **(12min 58sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shirgudoonka iyo mudanayaashaba waan salaamayaa, ugu horayn waxaan ayidayaa Arinka xildhibaano badani soo jeediyeen ana waan ku darayaa codkayga waanan taageeraya, maadaama oo mudanayaal badani soo jeedinyeen waa in xeerka lagu soo daraa.

Sida ay gudidu sheegtay waxa ay yidhaahdeen waxaan beddelay macaga xeerka, magaca xeerka lama badaline waxaa la beddelay lanbarka xeerka, waxanan halkaa ku kordhin lahaa si loo sheegay in xeerkani uu yahay xeer cusub ee aanu ahay wax-ka-beddel iyo kaabis oo labanbar cusubna leh.

**Qodobka 5aad** oo loo beddelay Qodobka 6aad, qodobkaa waxa loo beddelay ma cada qodobkaasina markiisa horaba wuu qaldanaa waxa uu sheegayaa; Hadii doorashada Golaha Wakiiladu ay cadaato inaanay ku qabsoomi karin wakhtigii loo asteeyey arrimo farsamo awgeed ama arrimo kale waxa go'aan ka gaadhaya wakhtiga mudo xilkeed la kordhinaayo Komishanka Doorashooyinka Qaranka oo la tashanaaya Xisbiyada Qaranka/Ururada siyaasada mudadaas oo aan ka badnaan karin lix bilood, waxaana sidaas wareegto ku soo saaraya Madaxeynaha mudo aan badnayn 15 cisho gudahood marka uu helo soo jeedinta Komishank.

Markaa anigu garan maayo goorta lalaalay Dastuurkii oo awoodaa komishanka la siiyay anigu garan maayo, "*waxay ahayd in loo qoro hadii doorashadu qabsoomi weydo way soo qiimaynayaan waxaana loo gudbinayaa Golaha Guurtida oo go'aam ka gaadhay".*

**Qodobka 6aad** ee ay u beddeleen si kale ayuu u qoran yahay markaa waxaan soo jeedijayaa in Qodobkaa ay ku soo noqdaa oo awooda u daayaan Golaha Guurtida uu ansixiyo. Waxaa kale oo aan leeyahay maanta waxaa Golaha ka maqan saaxiibadii aanu isku ahaan jirnay UDUB, taas micneheeduna waa xeer ay beesha dhexe wadato, sababta oo ah waxay ka somaaliland ahaan ku soo caanomaalnay saldhigna u ah nidaamka talo wadaaga iyo dastuurka dalka iyo hanaan ka

xisbiyada badan, iyada oo ay jiraan intii kale waxaad moodaa in laga boodayo nidaamkii talo wadaaga ahaa. Loo joojin maayo waa qalan ayaan qabaa, waana in ergo loo diraa xildhibaanadaa inaga maqan kana kooban saddexda Gole.*( 4mudane ayaa taageeray)*

Sidoo kale waxaa jirta in ay maxkamadu laashay qodobkii dabarka ahaa oo sidii barigii Madaxweyne riyaale ayuunbay yidhaahdeen tana ha lagu galo, laakiin bulshada wali uma cada, oo dadweyunu waxay u haystaan in aynu inagu leenahay arinta Tira koobka, inagu ma lihin ee xukuumadihii kala danbeeyay ayay ahayd inay qabtaan Tirakoobka, mana haboona in la yidhaa mar walba sidii ayaa lagu galayaa.

Gobolkan aan ka soo jeedo ee caadsimada 350 kun oo qof ayaa iska diwaan galiyay, waxaanay ahayd in aanu anagu horta cabano, hadii tirakood la qaadana gobolkani wax badan ayuu helayaa, lakiin maan garan waxa Tirakoob loo samayn waayay, waxaanan qabaa in cida cabanaysa cabashadooda dib loo eegaa.

**Qodobka 11aad Goobaha codbixinta;** Awooda dib u eegista waxaa iska leh komishanka doorashooyinka qaranka, sidaa awgeed waxaan jirta in sanaadiiqda codbixinta ay ku urursanyihiin 40km. waxaana laga cabanayaa meelo fog-fog, buuro iyo qaar in badan loo soconayo, ***waxaanan ayidsanahay sidii uu soo jeediyay xildhibaan Cabdiqadir X. Ismaacil ee uu yyidhi dadka meelaha fog-fog iyo Buuraha ku dhaqan waan in la siiyaa maalintan lagu soo gabagabeeyo doorashada (6 mudane ayaa taageeray)***

*Qodobka 69aad* ***ee Deebaajiga laga qaadayo musharixiinta;*** *waana qodobka ay xildhibaano badani yaabeen, waar inaga markii la ina dooranayay waxaan la inaga qaaday 1.000.000 Sl Sh oo barigaa u dhigmaysay $200, markaa waxaan qodobkaa u arkaa in dad dangaar ah leh ay dabada ka riixayaa oo ay leeyihiin dadka aan lacagta haysan halaga joojiyo waayo $7,000 cid haysataa ma jirto.*

*Waxaan soo jeedinayaa in xildhibaanka Golaha Wakiilada isku Sharaxaya waa in laga dhigaa deebaajiga laga qaadayo $1000,* lakiin 600,000,000 milyan shilin waa waali, *musharixiinta u tartamaya Golayaasha deegaankana waxaa soo jeeinayaa in laga dhigo lacag u dhiganta $500 (3mudane ayaa taageeray).*

**Qodobka 82aad;** Musharixiinta Golaha deegaanka waxaa lagu xidhay Aqoonta darajada heerka 1aad waxay arintaasi ka hor imanaysaa Dastuurka Somaliland, Sababta oo ah Golihii wakiilada ee Golahan ka sareeyay ayaa Dugsi sare lagu xidhay *"markaa waxaan soo jeedinayaa in lagu celiyo dugsi sare oo laga saaro Jaamacada"*

Dadka Somaliland %50 ayaa dabadaha ku maqan markaa xageebaad ka keenteen in la soo cadeeyo qofku marka uu shahaada keeno, anigu waxaan ka tirsanaan jiray Gudidda arimaha Gudaha markii aanu shahaadoonyina weydiinay komishanka waa lakari waayay qof soo cadeeya shahaadooyinkaasi in ay saxyihiin " *sidaa awgeed waxaan soo jeedinayaa in qodobka 63aad farqadiisa 1aad ee u dhigan sidan;* Waa in uu yahay muwaadin u

dhashay Somaliland oo muwaadinimo dawlad kale haysan, balse wuu noqon karaa qoxooti dal kale deggan. *Waa in gabi ahaanba laga saaraa).* *2 mudane ayaa taageeray).*

**Qodobka 78aad farqadiisa 10aad;** ee odhanaya Haddii se ay doorashadu gobol dhan ka qabsoomi weydo tirada kuraasida loo qoondeeyey gobolkaas waxa xisbiyadu u kala qaadanayaan saami u dhigma sida ay u kala heleen wadarta guud ee codadka ansaxay ee dalka. Waxana loo raacayaa sida magacyadoodu liiska ugu kala horreeyaan. Waa meelma meesha aanay doorasho ka dhacayni? Iyada oo dadkii oo dhan lawada diwaan galiyay, ***"waxaan soo jeedinayaa in Qodobka 78aad farqadiisa 10aad meesha laga saaro"*** *(3 mudane ayaa taageeray).*

**Md. Siciid warsame Ismaaciil** **(08min 40sec):-** ugu horayn waxaan soo jeedinayaa in Soo jeedinta Gudidda la saxo oo meelna waxaa ku qoran lr xeer oo ah 88 meel kalana waxaa ku qoran 90 ee waa in la iswaafajiyaa ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 76aad;** waxay Gudiddu soo jeedisay in meesha laga saaro kootada dumarka anigu taas waa deedifaynayaa aniga oo raacaya qodobka 8aad farqadiisa 1aad, qodobka 36aad farqadiisa 1aad iyo 2aad iyo qodobka 21aad farqadiisa 1aad iyo 2aad ee dastuurka waxaan leeyahay "***kootada dumarku waa mid sharci ah sida ay qodobadaasi ay tilmaamayaan waa in xeerka lagu soo celiyaa isla markaana lagu daraa farqad cusub oo odhanaysa mudanayaasha Golaha deegaanka waan in dumarka laga siiyaa %30" (1mudane ayaa taageeray) .***

Sidoo kale waxaan raacin lahaa farqad kale oo odhanasa "nooca *kootada oo noqonaysa mid ay xisbiyadu ku tartamaan gobol walba inta gaarka loo siiyay ee 3da ah ee xisbi kasta dhexdiisa"* ***(1mudane ayaa taageeray)*****.** Oo ay noqdaan Musharixiintaasi mid u kala xidhan xisbiyada.

Waxaan arinkaa kootada ku sii adkaynayaa in ay 29wadan oo islaam ahi ay u xidheen dumarka kooto meel ay diinteena iyo dastuukeenu ku diidantahayna ma jiro, hadii dastuurku cid wax uu xaq u leeyahay uu u diidana waa xaaraan. Mana aha mid matalaya arimaha xuquuqan iinsaanka.

Kootada macneheedu maaha in dumarka wasiiro loo ogolyahay, agaasimayaalna loo ogolyahay golayaashana loo diidanyahay ***"waxaan soo jeedinyaa in qodobkaa sidiisa lagu soo celiyo labadaa farqadood ee aan ku soo darayna lagu daro"***

**Goobaha Codbixinta;** waxaan aamin sanahay in aanay ku salaysnay sifo sharci ah oo u adeegta bulshada, hadii ay tahay mid u adeegaysa waa in ay isku mid u jiraan goobtaa cobixina, xaqna maaha in muwaadina 40km uu u socdo midna u socdo 500Mtr, waana in la helaa qodob u xaq sooraya muwaadiniinta. Markaa goobta codbixinta iyo sanduuqu waxay la midyihiin kursiga, markaa hadii kuraastii lagu dhuftay iyada oo la raacayo tii

60kii kuraastana waa in lagu dhuftaa 2.5kii si ay isku xuquuq u helaan kuraasidu, mana aha in kursina uu yeesho labaadan Goobood midna uu leeyahay 2-ba goobood.

Waana in xeer loo sameeyaa Goobahaa iyo kuraastaa sifo sharci ah oo ku salaysanyihiin, maaha in la yidhaa hebena waa loo kordhiyay hebelna looma kordhin maadaama oo ay kuraastii matalayaan waa in la helaa wax ay ku salaysanyihiin. Tuaale ahaan hadii lixdankii kursiga lagu dhuftay tiro waan in lagu dhuftaa goobahana tiro isku mid ah si loo helo xaqa muwaadinka.

***Qodobka ka hadlaya hadii ay doorasho meelaha qaar ka qabsoomi weydo***, waxaan soo jeedinayaa in meesha laha saaro waayo ma jirto dalaka meel aanay doorasho ka dhacay, sidaa awgeed waxaan ku taageersanay xildhibaanadii iga horeeyay siday u soo jeediyee

**Qodobka qaybita kuraasta;** waxaa leeyahay halka maanta Maxkamada, Madaxweynaha iyo Xibiyada oo ilmaadeer ahi ay doonayaa inay muquuniyaan dadka tabashadooda, waxaan leeyahay waa wax ka soo hor-jeeda sinaanta, xasiloonida shacabka Somaliland ayaan leeyahay.

Madaxweyne Daahir Riyaale waxa uu sameeyay Xal, waxaan leeyahay dadka maanta xukunka jooga xal-keena, waxaana soo jeedinayaa in Togdheer iyo Maroodi jeex laga Jaro laba kusi lana siiyo Sool Iyo Awadal, waxaanan leeyahay beesha dhexe ee la sheegayaa waa in ay tanaasushaa in kastoo aanan garanayn beel Dhex oo wada socota.

# Kal-fadhigii 43aad Fadhigii 20aad

**Axad 06 September 2020**

**Quraanka: -** Md. Xaamud

**Gudoonka: -** Md Axmed-yaasiin Sh. Cali Ayaanle.

Ajandaha Fadhiga:- Doodda Xeerka Guud ee Doorashada Qaranka iyo Codbixiyayaasha. Maalinta 4aad.

**Md. Maxamed Faarax Qabile** **(22min, 16sec):-** Ma qabo cid aan maxkamadii dhigtay ahayni inay awood sharci leedahay inay badasho sax baanan u arkaa go'aankii maxkamada ee dabarka kaga qaaday doorashada, maadaama wixii loo baahnaa aanay fulina ilaa maanta in ta ku meel gaadhka lagu galana waxay ila tahay wax ka sokeeyaa inaanu jirin.

Waan qabaa inay ahayd mar hore in xukuumadaha kala dambeeyey iyo tan maanta joogtaaba inay ka dareen yeeshaan si aanay cidina ugu marmarsoonin tirikoobkaa in la qabtaa bay ahayd. Tan maantana goaanka ay maxkamadu soo saartay anuu sidiisa kale waan u raacsanahay in lagu daro bayse ahayd xukuumada imika joogtaa inay bilowdo doorashada ka dib tirokoobkaa laakiin ma qabo xal kale oo looga wareegi lahaa inuu jiro.

Arinta kale kuraasta kordhinteeda dastuurkaa qoondeeyey wuu dhigay xeerkaasna waa 82 bal waxaynu eegaynaa 82 kaas break down u samayno 4 degmo waxay isku ahaayeen 20 waa berbera boorama ceerigaabo laascaanood 6 burco ah iyo 7 hargeisa ah 2.5 marka intaa lagu dhufto waa sida maanta ay yihiin waxaa soo baxaya calaa **2;29** waxay isku noqonayaan laba kursi hargeisa marka xeerkaa la dabaqo waa inay ku gashaa 17 xildhibaan waayo 7 ay lahayd haku dhufsato 2.5 mar haduu xeerku kii yahay 12 ayay boorama ku gali lahayd 12na laascaanood 12na waxaa ku gali lahaa berbera laakiin hada kuraastan ay hargeisa haysataa halkay ka maqan tahay haafafkii marka la isku geeyo 2 kursi bay noqdeen 2 kursina berberay ka maqan tahay oo laga soo qaaday kursi booramuu yaal hargeisana 3 baa ku dheeraada, markaa hargeisa tirokoobka markay gaadho ee ay badato kuraasta ha qaadato maanta markaa waxaan anigu leeyahay berbera culaysba saari maayee meeshay tabashadu ka jirto hala geeyo oo saddexdan hargeisa dul saran meel hala saaro ileyn orbitkii 82 ka kamaynu bixine hadii kale gobolkii lahaa halagu celiyo oo saaxil xaq bay u leedahay 2.5 kaa markay ku dhufsato inay hesho.

Xaalada maanta taagan ciday ku xidhan tahayba waan saarayaa, caynkaa marka tahayna arin kaloo la warwareejiyaana meesha ma taalo, hadii cid wax loo qoondaynayo burcana kuma maqna ceerigaabana kuma maqnee hargeisa saaidka haysee wax halaga qabto. Maxkamada sare arinkay soo saartay waxaa ku jirta iyaduna oo khalada qoondaynta

kuraastu waa sidii ay u dhacday 2005 tii waana khalad oo xeerkii 60 kii baa lagu dhaqmayaabaa la yyidhi. Marka ay maxkamadii marjaca ahayd arinka noocaasa soo saarayso inay go’aankeeda ka fiirsato ileyn waa halkii lafo guri lahayde waa arin khaldan baan qabaa anuu. Ayaantan dhawayto waxaan maqlaayay qaynuunka xaqdhowrkiisii meesha inoogu qaalisan waa garsoorka ayaata dhawayto goaanka kasoo yeedhay gudoomiyaha maxkamada sare waa meeshii laysula noqon lahaa arin naxdin leh buu ahaa inuu idhaahdo xeerkii garsoorka guud waan laalay sidii dacwad laga racfaan qaatay xeerkii ka horeeyayna kaasaa lagu dhaqmayaa waa awoodii sharci dajinta oo u wareegtay garsoorkii arinkaasi guux yar oo labada gole uu ka dhaliyay mooyee cid la qabsadaba garan maayo meel madaxii bukooday sidee la odhan doonaa xaalada ka weyna sidee loogu garsoori doonaa markay timaadtaa waxaan uga jeedaa xaqsoorka qaynuunku haduu dhici waayo ama uu adkaan waayo murankan kale wuu badayaa. Wasiir kaloo waa lay sheegayoo xeerkay wasaaradaydu ku dhisnayd wasaarad ahaan baan wax uga badalayaa waa arin AF ka weyn.

Golaha laftiisuna mudo badan ayaynu soo wada joognay markaan eego dastuurka qaranku wuu kala awood weyn yahay qaybta mabaadiida guud ee xuquuqaha gaarka ahi waa sida diinteena oo kaloo tafsiir uma baahna laakiin waa arin in sidiisa loo xaq dhowra ah, sideedaba golaha wakiiladuna xildhibaano badan baa shalay ka hadlay oo kootada u doodayay sideedabana doorashada golaha wakiiladu waa doorasho toosa ayaa inoogu taala dastuurka ee maaha mid dadban. Waxaa kaloo jira qodobka 8aad oo mabaadiida guud ka mida oo shalayto xildhibaanadu kaga dhawaajinayeen wuxuu si cad oo aan maxkamad tafsiirkeeda u baahnayn u sheegayaa in doorashada ay muwaadiniinta Somaliland xuquuq siman u leeyihiin dastuurka hortiisa oon loo eegayn lab isir iyo arimo kale, habluhu waa muwaadiniin way tartamayaan laakiin hal qof iyo hal cod bay kusoo baxayaan.

Ayaan daro labaad waxaa ah iyadoo xeerkiiba ay gacanta ku hayaan golihii sharci dajinta koowaad ayaa jimcihii waxaa soo baxay dhawaaq cirka soo dhaca saddex dii xisbi waxay goaan ku gaadheen in 18 hablood lagu daro oo ma awalbaa laga mamnuucay qodobkan 36 ee lagu cararayaana caadooyin xun xun iyo waxaa uu ka hadlayo iyo horumarinta nolosha dumarkuu ka hadlayaaye laguma dabiqi karo xuquuqda dooroshooyinka sheegaya.

Xeerkan xildhibaanadu aad bay uga doodeen horta legal draft baa ugu adag marka xeer la dajinayo xeerkan waxaad moodaysay in lagu soo daray hadii doorashada qabsoomi waydo ta golaha wakiilada ta deegaanku ta madaxtooyadu saddexda xisbi qaran ayuu komishanku la tashayanaa mudo aan ka badnayn lix bilood madaxweynuhuna wuu saxeexayaa aduunyada ilaahay intii aynu golahaa joognay maalin u ka dayacan yahay qaynuunku ma jirto dalkana hadii qaynuunka loo ilaalin waayo iskuma keen hayo qabiil isir iskuma keen hayo labada ilmaadeerka ah qaynuunkaa Somaliland isku haya oo

saldhig u ah hadii kaas lays kala baxana meel qudha oo aynu fadhiisan doono anigu garan maayo. Arinka kale ee isna cayda ku ah muwaadiniinta Somaliland ee la leeyahay dadka laga tirada badan yahay reerkayagaan tusaale usoo qaadanayaayoo beel yar iyo beel badanba wuu leeyahay bal meel hala dhigo reerka yar iyo ka badan markaa halaga daayo cayda iyo aflagaadada muwaadiniinta Somaliland.

**Waxaan halkan ka soo jeedinayaa** xukuumadu tabasho kasta oo la qabo inay qanciso anuu odhan maayo Awdal baa waxay doonaysaa waa khalad anuu ma lihi meel kasta oo cadho ka dhacdo inay iyadu ka daba tagto weeye, sidana in looga fadhiyo maahee meel kasta oo u baahan in la bisleeyo. Xeerkan ina horyaale faygarka badani ka muuqdana wuxuu u baahan yahay la taliyayaasha sharciga iyo dooda golaha marka la ururiyo in si hufan loo galo oo qaynuunka inaga baxaya waa kaynu wada leenahee oo aan caadifad iyo degdeg midna aan lagu dhicin

**Md. Ibraahim Caraale Cabdi** **(31min, 51sec):-** Bismilaahi, Shir-gudoonka, Mudanayaasha Golaha, Saxaafada iyo Marti-sharafta ASC, anigu waxba ku dheeraan maayo, labada nuqul kan gudiddaan dambeysiinayaa waxaan ku horeysiinayaa Xeerka waynaha.

**Qodobka 4aad iyo Qodobka 32aad farqadiisa 4aad** oo da'adda ka hadlaya waxa ku kala taal 15 sano iyo 16 sano, marka waxaaan soo jeedinaya sida shareecada Islaamka waafaqsan oo ah 15 jir in laga dhigo oo hadii uu 15 sano jir gaadho la diiwaangalin karo muwaadinka Somalilanderka ah codayna karo

**Qodobka 5aad** oo ka hadlaya Xaqa codbixiyaha, **Farqadiisa 1aad** oo ah *"Inuu codkiisa ka dhiibto goobta uu cod-bixiye ahaan uga diiwaangashan yahay"* Farqadaas anigu waxaan soo jeedin lahaa qofka muwaadinka ah xaq buu leeyahay maaha magaalooyinka iyo beeralayda kaliya Xeerka loo sameeyo, dadka reer Somaliland waxay u badan yihiin dad reer guuraa ah, goobtii uu iska diiwaangaliyayna ma degana oo waxa macquula inuu gobolka ku wareego ama gobolkaba baxo marka waxaynu u baahanahay si qofka muwaadinka ahi xaqiisa u helo maaha in goob lagu xidho, waxaan soo jeedin lahaa in laga dhigo "inuu codkiisa ka dhiibto goob ka mid ah goobaha uu ka diiwaangashan yahay" oo bal degmo laga dhigo iska daa gobole, wax diidayaana ma jiraan, marka qodobkaas aad ha loogu fiirsado, mana aha in sabab la'aan loo dabro iyadoo aanay jirin wax diidaya.***(5mudane ayaa taageeray)***

**Qodobka 20aad farqadiisa 3aad** marka hore waxa farqadaha hore ku qoran komishanka magacaabaya Gudoomiye, ku-xigeenka, Xoghayaha iyo hubiyaha, marka goobtii la tago awoodii oo dhan Gudoomiyaha la siiyay sida farqadani tilmaamayso xubnihii kale dibadu dhigaya oo waxba kala tashan maayo, marka anigu waxaan soo jeedinayaa in Farqadaas lagu daro oo laga dhigo **"marka Gudoomiye ku-xigeenku ku waafaqo**

**arrintaas"** oo mar hadii dhibaato timi in Gudoomiyihii iyo Gudoomiye ku-xigeenkii isku waafaqaan oo aan gudoomiyaha kaliya aanu dadkii dareerin kaligii.

Qodobka 73aad Farqada 2aad waxay tilmaamaysa *"Liiska Murashixiinta ee ku xusan qodobkan faqradiisa 1aad wuxuu noqonayaa liiska Furan waxaana ahmiyad loo kala siinayaa siday u kala horeeyaan"* liiskaas komishanku ha soo qoro ama Xisbigu ha soo qore liiska murashixiin tartamaya in lagu xidho oo mudnaanta lagu kala siiyo kala horeyn waa sharci daro waana cadaalad daro, qodobkaas waxa kale oo uu xyidhiidh la leeyaay **Qodobka 88aad farqadiisa 3aad** oo iyana odhanaysa *"Hadii laba murashax helaan codad isku mid ah, waxay u kala horaynayaan siday ugu kala horeeyan liiska murashixiinta xisbiga/ururka soo gudbiyey"* halka labadii murashax oo doorashada wada galay ayaa waxa xaq lagu kala siiyay siday liiska ugu kala horeeyaan, marka anigu waxaan soo jeedinayaa halkaas in **Qodobka 73aad farqadiisa 2aad** laga dhigo **"siday u kala cod bataan"** laakiin ma kala yeelanayaan mudnaan kale, **Qodobka 88aad farqadiisa 3aad** hadii ay cod isku mid ah yeeshaan dee **ha loo qori tuuro** maaha in la yidhaahdo hebel baa liiska kaa horeeyay taasi cadaalad daray noqonaysaaye.

**Qodobka 77aad Farqada 2aad** oo sheegaysa in komishanku abuurayo goobo doorasho ka hor maalinta doorashada, qodobka 30aad sidaas dhigayaa, marka anigu waxaan qabaa waxa jira goobo doorasho, goobona waxay isu jiraan 5km ama 2km, goobana waxay u isu jiraan 60km iyo wax kabadan oo qofka codbixiyaha ahi xataa hadii uu bartankooda joogo aanu midna gaadhayn, marka anigu farqadaas waxaan u badalayaa **"Komishanka doorashooyinku wuxuu assaasayaa goobo doorasho oo fogaanta ay isu jiraan aanay ka badnayn 20km"** oo la xadiddo komishanku si aanay meeshay doonaana isu dulsaarin meelana kala fogayn, marka waa in lagu soo xadido oo la yidhaahdo qofkaasi 20km buu ka tagi karaa. ***. (3mudane ayaa taageeray).***

**Qodobka 86aad farqada 5aad** sixitaan bay u baahan tahay oo halka *Gobolka* ku qoran tahay waa **Degmo** waayo waa degmo doorasho Golayaasha deegaankuna gobol kuma xidhne waa degmo doorashadoodu, marka halka gobolka degmo ha laga dhigo.

**Qodobka 106aad farqadaha 1aad iyo 2aad** waxay ka hadlaysaa qaybinta qalabka doorashada, had iyo jeer degmooyinku way kala balaadhan yihiin oo kala waaweyn yihiin, waxa jira degmooyin sanaduuqdooda maalinta doorashada ka horeysa hadii aan la rarin aanay habeenka iyo subaxaba gaadheyn, **farqada 1aad** ee Qodobkanina wuxuu qorayaa in laga gaadhsiiyo qalabka codbixinta ugu danbayn markay saacadu tahay 5:00 saac ee subaxnimo maalinta cod- bixinta, waana khalad, waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo **"waa in la gaadhsiiyaa 12 saacadood ka hor maalinta codbixinta"** ama waa in la raaco **farqada 2aad** oo iyadu ka saxsan ***(3mudane ayaa taageeray).***

Intaas waxaan ku soo koobayaa Xeerka Guud, waxaan u galayaa Soo jeedinta Gudidda Arrimaha oo aan run ahaantii u mahadnaqayo si aad iyo aad u qurux badan uga soo shaqeeyay Xeerkan, Qodobo yar oo kooban ayaan rabaa inaan mulaaxadeeyo, wixii aan qodobadaas ahayna, waxaan ku raacsanahay Gudidda inta kale.

**Qodobka 9aad** oo Gudiddu ku soo kordhisay **Farqadaha 2aad iyo 3aad** waxana laga hadlayaa shaqaalaha dawlada iyo ciidamada sida farqada 1aad ka hadlayso, marka **farqadahan cusub ee 2aad iyo 3aad** waxay ku sii dareen oo ay taabteen oo ay shaqaale ugu yeedheen iyaguna hay'adaha madaxa banaan, agaasimayaasha guud iyo komishanada madaxa banaan, sidaynu ognahay kuwaasi maaha shaqaale dawladeed oo joogto ah, imisaynu garanayna agaasime guud oo la magacaabay oo markuu shaqada ka tagay aan payroll-ka ku jirin ee suuqooda galay, nimankaasi waa niman siyaasiyiin ah oo madaxweynuhu magacaabo oo aan shaqaalaha dawlada ee joogta ka mid ahayn, marka **waxaan soo jeedinayaa madaama aanay shaqaale joogta ah ahayn in labadaas farqadood laga saaro xeerka loona daayo shaqaalaha joogtada ee payroll-ka dawlada ku jira.**

**Qodobka 78aad** qodobkaas gudiddu way ku yar galgalatay oo waxay soo jeediyeen in goluhu ka go'aan qaato saami-qaybsiga oo cabashadu ka taagan tahay, waxaynu ognahay arrintani inay tahay issue qaran oo inaga kaliya aynaan go'aan ka gaadhi karin, horena uga go'aan qaadan kariwaynay oo goleheena qaybi ka baxday aana ka xumahay, waxaan ka xumahay intaana qodobka taaban oo ay sax ku ahayd in loo joojiyo geediga iyo awrka rara loo joojiyo, Golihii Wakiilada oo gobolo iyo reero dhan ka baxeen oo aan loo joojin, waxay ahayd in loo joojiyo oo si uun arrinkaa loo maareeyo, inagana laba nasiib daraa ina haysata, waa mide qodobkan ay ka baxeen inaga gacanta inooguma jiro oo inooma yaalo, hadii aynu u joojinona waxa la odhanayaa nimankii 15 sano fadhiyay xeerkii bay maantana carqaladeynayaan, iyana waxaynu gacanta ku hayno maahee waa taas maxkamadaha loo gudbiyo.

Horta qodobka, inagoo ka xun oo dareenkeena muujiinaya dalkan yar ee gogosha kuwada fadhiya ee talawadaaga iyo isu soo dhowaanshaha ku salaysan horta in la isu joojiyo weeye qofkuna gar iyo gar daroba wax wuu taban karaa, in la qanciyo oo loo joojiyo oo gogosha loo fidiyo ayay u baahan tahay, laakiin qodobkan inagu gacanba kuma hayno oo inama khuseeyo, gudidda keentay ee tyidhi goluhu go'aan ha ka qaato kuma waafaqsani macquulna maaha, Waxaan anigu soo jeedin lahaa qodobkaas isaga ah inaynu aqbalno madaamada inagu aynaan go'aan ka gaadhi karin oo hadana Madxweynihii qaranka gacan tugaaleeyay oo maxkamada u gudbiyay inagu inaynu qaraarkaas ka soo baxa taageerno in doorashada lagu galo sidii 2005kii oo inagu hadeer qodobkaas doodiisa aynaan golaha ku soo celin.

Cidda cabanaysa sida labada darafna in la qanciyo hadii wax loo kordhinayo iyo hadii kaleba iyada waan soo dhoweynayaa waxna kama qabo, laakiin waxaan ka soo horjeedaa oo aan daadafeynayaaa in Gobol ka mid ah gobolada uu is dhaco oo isagu isu huumbaaleeyo sidii doodii saaxiibaday shalay ee Md. Maxamed Jaamac jeediyay, gobolka sool oo ka soo jeedo wuxu ka mid yahay gobolada halkan wax loogu qaybiyay, lixdankiina dad baa degi jiray hadana dadkii baa wada dega, degmooyin buuna ka kooban yahay oo doorashada Golaha Wakiiladu waa gobol doorasho ee maaha degmo doorasho.

Kan wax lagu qaybinayaana qabiil maahee waa gobol umad baa wada degan, markan si qaawan u sheegana Dhulbahante, Habar-jeclo iyo Habar-yoonisba way ka soo baxaan oo hada golahan ku fadhiyaan, midna codkiisa lama deedafayn karo, walaalahayo haday wax tabayaan anigoona daadafeynayn, mida kale doorashooyinku dabeecaday leeyihiin oo gobol baa nin ku badani maanta qadi karaa oo intuu 10 iska dhinac sharaxo wada degi karaan sida dhacdan tan aynu kuwada fadhino iyo tii lixdanki, iyadoo lixdankii aanu dadku bahaloobin oo caynabo nin dhulbahante ahaa baa laga dooranayay, qoryaale nin cabdirixiim ah baa ka soo baxay maanta waa mustaxiil inuu ka soo baxo iyadoo habarjeclo degto waa mustaxiil in cabdiruxmiin ka soo baxo, marka Cabdirixmiin baa ka soo baxay cabdirixmiin baa ka soo baxay macquul noqon mayso, waxa weeye cidii cod leh ee taala baa leh.

Taasi waxa weeye saaxiibkay Maxamed Jaamac dee Dhulbahante saddex gobol buu degaa Sool, Togdheer iyo Sanaag saddexdaba kuraas buu ka heli karaa saddexda cod badan buu ku leeyahay hadii is diiwaangaliyo oo codeeyo, marka waxay u baahan tahay dee wixii lama odhan karo reero oo degmo doorasho, Degmada Gabiley Cali-Gabilay baa ka soo baxay isagoo samaroon ah yaa u diiday, cidii cod leh ba waa laga dooran karaa, maaha inaga lafteenu inaynu shaadhka ka bixino, cidii tabasho leh hadii qaranku tabasho tirayo waa u sax, laakiin cid gaar ah cuskadaa waa khalad, cidii ku raacdaana waa khalad, hadii sidii 60kii ha lagu galo la yidhaahdo in wax kale qarsoon lagu daro maaha.

Waxa kale oo aan qodobkaas 78aad ku darayaa in diiwangalin dhamaystiran la sameeyo mudo aan ka badnayn sanad oo dawlada lagu waajibiyo in la qabto diiwaanaglin dalkoo dhan mudadaas aan sanad ka badnayn si Nin waliba xaqiisa u qaato oo tira koob dhamaystiran la sameeyo. ***(3mudane ayaa taageeray).***

**Qodobka kootada,** Qodobkaas oo aad loogu raftay, Gudidduna siday soo jeedisay waan ku raacsanahay, waxbana ku dheeraan maayo oo waxaana ugu dheeraanaynin nin hablaha wax tar islahaa iyo nin kootada ka soo horjeeday oo sharciga u hiilinayba hal qodob bay wada akhrinayeen qodobkaasi afsomali buu ku qoran yahay waana qodob

dastuuri ah oo sheegaya *"in muwaadiniinta Somaliland iyadoo lagu kala sooceyn qabiil, midab, dhalashada, luuqada, lab iyo dhadig, hantida mudnaanta afkaarta iyo wixii la mid ah waxay sharciga hortiisa ku leeyihiin xuquuq iyo waajibaad siman"* labadii qof ee lab iyo dhadig ahaa ee sharciga hortiisa xuquuq iyo waajibaad siman ku lahaa bal ka waran hadaynu nidhaahno war rag ha la siiyo saami gaar ah, waa saami khalad ah oo aanay sharciga hortiisa ku lahayn, hadii aynu nidhaahno dumarka ha la siiyana oo kooto ha loo xidho taasi la mid tahay, waa in sharciga la ilaaliyo oo umadu sharcigeed ilaasahtaa, hadii sharcigii la ilaalin waayo oo ninba si u sheego wixii afsomali ku qoran horta waa gardaro iyo khalad.

Anigu waxaan leeyahay, Qodobkaasi wuxu khilaafsan yahay oo in qof gaar ah, koox gaar ah, qabiil gaar ah, deegaan gaar ah in kooto loogu xidho kuraasi loo sinaa oo in lagu tartamo ay ahayd, Qodobkaas waxaynaan ugu murmayn oo loogu wada hadlayn qofkii wax islahayaa ee joogi waaya doorashadaasuu galayaa ha soo baxo ama ha hadhee rag iyo dumarba, xuquuq gaar ahna dadka kama laha, dumarku iyagoo u badan haday is dooranayaan iyo haday guryohooda fadhiisanayaan sidii Ilaahay SWT Quraanka ku yyidhi "dumaraw guryihiina" waa aayad quraan ah ragii lahaa wadada xag jirka ah ilaahay baa quraanka ku yyidhi dumaraw guryihiina jooga, ilaahay baana ugu jecel dumarka oo sida u fiican garanaya, taasi waxay tahay oo aan qodobkaas u bayaaminayaa dimuqraadiyada horta waxaynu qadanay tii kitaabkaas waafaqsan, tii aan waafaqsanayn dastuurkay ku qoran tahoo qaadan mayno, dee inantu haday joogi waydo intay isa soo qorto rageedaa dhinaca ha ka raacdo, laakiin wax kooto la yidhaahdo oo Baarlamaanku ogol yahay ma jirto.

***Gabo-gabadii,*** waxaan ku gabo-gabaynayaa in Xeerkan la ansixiyo iyadoo lagu darayo lifaaqa Gudidda oo laga saaray 78aad farqadaha aan soo sheegay iyo Qodobka 9aad farqadaha gudiddu ku soo dartay ee shaqaalaha ka hadlaya iyo soo jeedimaha Mudanayaasha ee la isla qaatay lagu in loo codeeyo Xeerka oo la Ansixiyo. WSC.

**Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf** **(8min, 59sec):-** Gudoomiye iyo Mudanayaalba waad salaaman tihiin, bacda salaam, waxaan aad ugu faraxsanahay wixii aan odhan lahaa oo dhan la yyidhi, waxaan aad u taageersanahay oo aan hadalkaygii oo dhan ku soo koobayaa intii Xildhibaan Xuseen Axmed Caydiid sheegay oo aan midh laga tagin iyo raga qodobo wanaagsan soo jeediyay, kuna noqon maayo, Xeerkan waa xeerkii doorashada Golaha Wakiilada, Madaxweynaha Golayaasha Deegaanka iyo komishankii oo si wanaagsan u soo tahay siduu u maalayo, hadii aynu ku darno inta xildhibaanadu soo jeediyeen wuxuu noqonayaa Xeer wanaagsan oo fiican.

Gudidda Arrimaha Guduhu saddex qodob bay badaleen waana ku raacsanahay marka laga reebo meel kaliya oo ah **Qodobka 18aad** oo miisaaniyada Komishanka ka hadlaya,

waxaana Qodobkaas u daynayaa sidii Xukuumada kaga yimi Xeerku, waxa kale waan ku raacsanahay Gudidda inta kale oo yaan laga tagin.

Halka iminka uu Xildhibaan Ibraahim Caraale ka hadlay ee Kootada aad baan ugu taageersanahay oo dumar wax loo kooteeyaa kuma taalo diinta, waana hooyada, inantaada iyo walaasha oo meel bay u dhalataa meel kalena way u dhaxdaa, marka yaa dooranaya ma kuway u dhalatay mise kuway u dhaxday, dumarka sida uu abuuray Ilaahay SWT waa sida aayaadaas uu akhrinayay shiikhu (Ibraahim Caaraale), yaynaan wax quraanka ilaahay banyan sharciyaynin, iminka dawlada way u shaqeeyaan oo laga mamnuuci waayo, laakiin hadii la yidhaahdo ha tartanto oo Gobol dhan habeenba meel ha u hoyato waa waxaan haboonayn.

Hadii kooto cid loo xidhayo, mid baan kaga duwanahay Xildhibaan Ibraahim Caraale in dadka laga tiro badan yahay oo uu sheegay inay doorasho galaan, maanta meelay doorasho ku gali karaan ee dhaqaale, tacliin iyo is abaabul ma jiraan, iyaga 3 kursi ha loo kordhiyo oo kooto ha loogu xidho intay ka soo kabanayaan oo dhaqaale iyo tacliin iyo axsaab sameysanayaan ee la soo qaadayo, anigu waxaan soo jeedin lahaa kooto ha loo daayo iyaga, waayo iskama xejin karaan in la soo qaado tacliin iyo dhaqaaleba waan jeclahay.

Arrinta Deebaajiga ee la sheegay ee la yyidhi waa qaali, waxaan soo jeedinayaa inaan la dhimin, Nin is huba oo dhaqaale leh, oo hanti leh meesha ha yimaado oo golaha ha yimaado, Nin soo qayilayay oo intuu soo cararay golaha yimaada waxba tarimaayo, waxaan leeyahay yaan waxba laga dhimin.

Maayarkan la leeyahay ha laga doorto dadka dhexdiisa anigu waxaan qabaa inay wax wanaagsan tahay, Eng. Maxamed Xaashi mar buu Maayarka Hargeysa ahaa, sidii uu yyidhi barigaa wax dhaca mooye wax u kordhay ma jiraan ilaa maanta, waxaan taageersanahay in si gaar ah loo doorto Maayarada.

**Qodobka 78aad farqadihiisu 8aad iyo 9aad** waa waxaan meesha qaban ha laga saaro ayaan soo jeedinayaa. Xeerkan waa Xeerkii Guud ee Doorashooyinka, maxaa loogu soo dari waayay doorashadii Guurtida oo u diiday Xeerka in lagu soo daro, waa doorashada Golaha Guurtida lagu soo daraa, kana ha laga dhigo buug wayn oo qiime leh oo la akhrisan karo doorashooyinkuna ku dhan yihiin, WSC.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal** **(13min 49sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiye, Mudnayaasha, Kaaliyayaasha, Saxaafada iyo Marti sharafta Asalaamu Calaykum Warax matulahi Wa barakaatu.

Intaan dooda galin Guddoomiye xildhibaano horena way tilmaameen soo jeedin ayaan codsanayaa. Soo jeedintu waxa weeye doodan xildhibaanada Golaha in yar ayaa ka dooday, waa maalintii afaraad ayaan u malaynayaa, markaa Golahana xildhibaanada

intii badnayd way maqan yihiin. Shalay waxa la tilmaamay inay xildhibaanadu soo noqon doonaa. Waxaan soo jeedinayaa in dooda la sii kordhiyo si xildhibaanadu u soo noqdaan oo dooda uga qayb galaan.

Markaan ku soo noqdo dooda xeerkan waxaan ugu horaysiinayaa ciwaanka. Ciwaanka xeerka ayaa wax ka maqan yihiin, ciwaanku waxa uu sheegayaa xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo diwaan-gelinta Cod-bixiyaasha.

**Waxaan soo jeedinayaa in ciwaanka xeerka lagu soo darro "Komiishan" waayo wuu ka maqan yahay.** Waxaan Guddida Arrimaha Gudaha iyo Difaac sheegayaa Qodobada aan ku raacsanahay soo jeedintooda.

Waxaan ku raacsanahay Guddida Qodobada 17aad, 18aad, 27aad, 41aad, 52aad, 62aad, 69aad, 82aad, 84aad iyo 112aad waan ku raacsanahay.

**Qodobka 6aad farqadiisa 2aad** waxaan soo jeedinayaa oo ka hadlaya **Cayimaada Wakhtiga ay doorashadu dhacayso.**

Waxaan soo jeedinayaa in doorashada wakhtiga ay dhacayso si ay koomiishan ugu hawl yaraato wakhtiga ay qabanayaan ay ka mid tahay diwaangelinta iyo hubinta qalabka doorashada lagu gelayo, si ay ugu fududaato oo aanay hawshu ugu badan la xadido maalinta ay doorashadu dhacayso, sida ta Maraykanka oo kale ee 8 November dhacda sanad kasta.

Inagu waxaynu ogsoonahay Guurtidu inay kordhisay muddadii Goluhu fadhiyey, oo ilaa novermber 2021. Waxaan soo jeedinayaa teenu inay dhacdo December oo kale, sababta oo ah waynu ogsoonahay. Waxay koomiishanku sheegeen inay toban bilood Gudahood u qaban karaan, haddii wax waliba soo dhammaadaan.

Waxay ku beegan tahay kulayl, xagaa ayay ku beegan tahay. Wakhtigaa xagaaga ah dadkii hawdka joogay may soo ceel fadhiisan xagii ayey ku maqan yihiin. Kuwii halkan joogayna way ka yar baxeen oo oogo ayey u yar bexeen. Waxay kuwaangsanayd dooarshada qabashadeedu wakhti qaboobe ah. (2 seconded).

Markaa in la cayimo maalinta ay dhacayso, si aynu uga fursano waxbaa dhacay, ma suurto galayso dabeetana ay kordhini u timaado. Waxaan leeyahay wakhti xadidan ha laga dhigo, teenana sidaa Guurtidu sheegtay 2021 in December oo kale laga dhigo, si aanu qofku codkiisa u waayin.

**Qodobka 7aad** ee Guddidu soo jeedisay oo ah Xuquuqda Muasharaxiinta. **Qodobkaas 7aad** farqadiisa 1aad iyo 2aad oo sheegaysa cayimaadii koomiishanka wakhtigay qabanayso, waan ka saaray waayo waaniga horaysiiyey. Taasi waxay ku tusaysaa in la helo muasharaxiin madax-bannaan xeerkii hore ee aynu ansixinay soo jeedintaas ayaa ku jirtay.

Imika tan maanta socota dhawr xildhibaan ayaa soo jeediyey sida Cabdiqadir Jirde iyo Saleebaan Diiriye Barre.

**Waxaan soo jeedinayaa** Musharaxiin Madaxweynaha kaga bilaw, Madaxweyne ku xigeenka, Golahan aynu joogno iyo Golaha deegaanka in musharaxiin Madax-bannaan la helo, waxay fudaydinaysaa arrintii lahaa dad ha yimaadaan karti leh oo cilmi leh, oo wax qaban kara si ay u fududaato oo u soo galaan oo dalka wax u taraan, si inooga baxo hadalka soo noqnoqda ee ah anagu jaanis ma lihin.

Haddii aad tahay musharax madax-bannaan oo dadku ku rabaan oo la timaado qorshe fiican oo dadku qaataan, waad noqon kartaa. Waxaan soo jeedinayaa oo seconment ment ku rabaa in sameeyo sidaas. (3 seconded).

Waxa kale oo laga raysanayaa Asxaabta iyo lacagta dhigaalka ah ee la isku xidhayo ee aan soo noqonayn. Nin doonaya inuu musharax noqdo oo aan si kale ku helayn si uu Golaha caqligiisa iyo xirfadiisa wax ugu taro, waxay keenaysaa inuu kaasi oo kale soo baxo.

Waxaan mar labaad soo jeedinayaa waa in la helaa Musharaxiin madax-bannan Madaxweynaha kaga bilaw, Madaxweyne ku xigeenka, and Golahan aynu joogno iyo Golaha deegaanka. Waxa kale oo aan ayid sanahay in maayirka isna la doorto.

**Saami-qaybsiga**; Saami qaybisa laba wax ayaa aad iyo aad u mihiim ah, shalay waan ka xumahay Xildhibaan Maxamed jaamac waxaan ka xumahay in la yyidhi. Awooda dhaqaale ee dalkeenu halka ay ka soo baxdo waynu ogsoonahay. Waa dekeda Berbera inta kalena waa Galbeedka. Anaga sidii uu tilmaamay Qabile laba kursi ayaa naga maqan, hada ma qaylino waxbaa naga maqan ma nidhaahno. Golaha Guurtida laba xubnood ayaa naga maqan oo aanu hadyad u bixinay kuma hadalno. Waxaan leeyahay labadayadii kursi ha soo noqdaan.

Waxa kale oo aan raacinayaa oo xildhibaankii iga horeeyey sheegay in marka doorashadu dhacdo la qabto tiro koob, waxaan leeyahay ha ka soo horayso oo sanad iyo bilaa inoo hadhsane imika ayaa la qaban karaa. Haddii daacad laga yahay hadda ayaan la qaban karaa waa in la qabtaa.

**Kootada; Qodobka 78aad ee kootada.** Qodobkaas waa laga hadlay oo aniga qudhayda diinta ayaa la igu tirinayaa oo waxa leeyahay malaha isna xaga hore ayuu ka raaci doonaa. Shalayto hablo ayaan kulanay oo yyidhi waan ku ognoo kulay waad naga horimanaysaa. Waxaan u sheegayaa hablaha. Habloow anigu waan idin ixtiraamaa waxaad tihiin marwooyinka (Sayadatii) oo waxa dambeysiiyaa Mudanayaal (Saadaati), laakiin arrintaa kootada waxaan u arkaa xukumada iyo asxaabtu midna in aanu daacad ka ahayn waa waraabe u tag.

Xukumadu waxay doonaysaa inay ku hesho arrin aad u riqiisa oo siyaasadeed (Very cheap political point). Wixii madaxweynayaasha hore qaban waayeen ayaanu qabanay, wax fiican maaha asxaabtana ka daacad maaha. Haddii daacad laga yahay dumarka waxaan leenahay xuquuqdiina waan idinku taageeraynaa. 22% la yyidhi ha loogu darro saddex kursi ayaad isku qab-qabsan doontaan oo timaha isku jiidi doontaan.

Waxaan soo jeedinayaa 33 wasiir ayeynu leenahay 22% ha laga siiyo saddex ayey imika leeyihiin 7 iyo badh ayey noqonaysaa, markaa afar iyo badh ayaa ka maqan ha laga siiyo wasiirada. (1 seconded).

Waxaan raacinayaa wasaarada kasta oo dawlada ka mid ah in lag siiyo 22%.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa Agaasimayaasha iyo Maareeyayaasha in 22% laga siiyo. Taas ayaa wax idiin taraysa habloow yaan waraabe u taag la idin siin. Taas ayaan idinku taageeraynaa Goluhuna taas ha taageero. (1 seconded).

**Md. Yusuf Liibaan Cumar** **(22min 32sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Mudnayaasha, xog-hayaasha, Saxaafada iyo Marti sharafta Asalaamu Calaykum Warax matulahi Wa barakaatu.

Waxaan raacsanayaa marka u horaysa waxaan u Mahadnaqayaa Guddidi inoo soo ururisay ee Guddid aArrimaha Gudaha iyo difaaca. Aad iyo aad ayey ugu mahadsan yihiin, aniga oo u arka si dedaal iyo daacadnimo ku jirto inay inoogu soo ururiyeen. Iyada oo aan arko in Sharciga dooarshooyinka la soo diyaarinaayey qaatayna muddo seddex sano ah oo la soo ururinayey oo ahayd 2018, 2019 iyo 2020.

Waa marka horee adduun weynaha waxa ka shaqayn jiray saddex sharci. Sharci waxa uu ahaa shruucday isticmaali jireen reer barrigu oo waxa uu odhan jiray siyaasada ayaa ka saraysa qaanuunka (Asiyaasatul fawqul qaanuun). Reer galbeeeduna waxa uu ahaa qaanuunka ayaa ka sareeya siyaasada (Al-qaanuun fawqul siyaasa). Qaanuunku ama sharcigu sigaa ka sareeya siyaasada.

Waxa soo raacay dawaladaha islaamka oo ku dhaqmayey diinta islaamka, Iyana waa sharci oo waa manhajkii ilaahay inoo soo dejiyey iyo sunihii nebiga (SCW). Intaa markaan hoose uga daadego.

Xeerka doorashadu waxa uu qeexayaa oo aan muran ku jirin hal qof iyo hal doorasho (One man one vote). Waxa looga gudbayo ee kale anigu garan maayo. Dastuurkeenu si toos ah ayuu u sheegay, shareecaduna si toos ayey u sheegtay. Maadaama oo ay labaduna isku raacsan yihiin, wixii badnaayee xildhibaanadu aad iyo aad wakhtiga u siiyeen ee dooda intooda saxda ahi ay ku doodeen wax dhaafsiisan iigama muuqato.

Sharciga kan waxa ku yar badnaa dhalinyarada oo ka hadlaayey xuquuqan iinsaan iyo cheneva convention. Waxyaabahaas oo dhan waxaan u arkaa kuwa khal-khal galinaaya

jiritaanka Qaranimadeena oo ka horimaanaya. Waxyaabihii ay ku hadlayeen waa kuwa khal-khal gelin karaa jiritaankeen, jiritaanka qarankeen, jiritaanka carruurteen iyo carruurtooda.

Jiniifa convention waa kuwa xalaalaynayaa in ninku ninka guursan karo, in gabadhu gabadha guursan karto iyo gabadhu ilmaha iska soo ridi karto. Waxaas waa waxa ay tixraacayeen ee dastuurkeena Qodobka 8aad, 20aad, 38aad ilaa 108aad. Waxyaabahaas oo dhammi aanay marnaba wax muran ah gelin xuquuqaha la kala leeyahay iyo kuwa la wada leedahay.

Waxaan ka hadli lahaa rag iga khabiirsan oo iga cod karsan ayaa ka hadlay, laakiin wuxuun baan taabanayaa **Qodobka 20aad farqadiisa 2aad** waxaan u arkaa ma soo jeedinayaa in Guddoomiyaha Guddida doorasho ee heer degmo uu awood u leeyahay wax ka bedel shaqalaaha goobta doorasho, gaar ahaan hubiyayaasha iyo xoghayayaasha. Wixii intaas ka hoose looma dhaafi karo. Waa in Guddoomiyuhu kala bedeli karaa xubnihiisa la shaqaynaya, waayo waa lagu soo dhex dhuuman karaa.

Qodobka 19aad farqadiisa 1aad xarafka (B) Komishanka miisaaniyadiisa sharcigu meel ayuu ku tiiriyey oo wax xukumadu bixiso iyo wax adduun weynuhu bixiyo, labaad ayaa miisaaniyada uga dhigayaa.

Waxaad moodaa waxyaabihii shuruuc maaliyadu (Financail regulations) inuu Qodobkaasi ka horimanayo oo madaxyadii budget miisaaniyada ka soo gali jiray oo ku salaysan ururada, xisbiyada iyo mushsarxiinta. Waa dakhligii gali lahaa miisaaniyadda ayaa waxa loogu daray koomiishanka. Arrintaasi waa mid ka horimanaysa shuruucda maaliyadda.

Xadhig iibsiga, ganaaxyada waxay hoos imanayaa madaxyada cashuuraha barriga. Waxaan odhan lahaa qodobkan ha loo guuriyo dhanka lacagaha deebaajiga ah. Saddexaasi waa inay galaa miisaaniyadda dawladda oo ay qabtaan xafiiska cashuuraha barriga. Sababta oo ah Covid 19 marka loo eego, wasiirka maaliyadu waxa uu sheegayey dhaqaale xumo ay jirto oo Covid 19 sababay. Waxyaabihii soo baxaayey haddii la yidhaa ha loogu darro koomiishanka waa qasaare qasaarihii oo inagu sii dhacaaya.

**Waxaan soo jeedinayaa Qodobka 19aad farqadiisa 1aa Xarafka (B) ha laga saaro meesha oo ha la laalo. Qodobka 27aad farqadiisa 2aad** waxaan soo jeedinayaa in lagu kordhiyo waayo markii hore waxay ahayd **"Ciqaab faraha kula jira"** ha laga dhigo **"dambi ciqaabeed" Farqadiisa 1aad Xarafka (B)** waxa ku yaala ciqaab ah 3 sanno ama 5 sanno. Waxaan soo jeedinayaa ha lagu darro "**Dambi ciqaabtiisu yahay 2 sanno ilaa 5 sanno".**

Diiwaangelinta waan raacsanahay, waanan aaminsanahay. Waxaanan ogahay in rag badani ka hadleen oo halkeeda dhigeen. Waxaan ahayn sida uu sheegay xildhibaan Rush

Gobolada waa ka wada degan yahay. Soomaalidu waxay tidhaa xagalo Geel wax guntiga la galiyo way ka weyn tahay.

Gobolka sool ee shalay in badan laga hadlaayey. Maxamed wuu maqlay inuu dhulbahante degi jiray Gobolkaas, laakiinse maanta lama socdo xaqiiqda dhabta ah waa ka maqan tahay. Marka la joogo adhi cadaysa faqashini ayaa degan, qolada kale ee hadda ay is dilayaan ayaa ku wehelisa.

Xaga dhaqaalaha Gobolada ama degmooyinku ma sina. Tusaale ahaan Gobolada Sool, Sanaag iyo Badhan waxa ka dhacay abaaro. Degmooyinkaas ka tirsan ee ceel-afweyn ka mid tahay, dararweyne ka mid tahay, ee xudun ka mid tahay oo yagoori ka mid tahay Shan boqol ma heli karaan qofka isa sharaxayaa. Waana dadkii loo tuhmayey inay dalka iyo dadka wax u qaban karaan.

Waxaan soo jeedinayaa deebaajigaa farabadan ee degmooyinka dalku u sinayn in laga dhigo B iyo C Shan boqol oo dollar ($500).

**Saami-qaybsiga** Maxkamada dastuuriya ayaa qaraar ka soo saartay. Wixii kale ee siyaasiyan daba socda ee daba socday ama ilaa hadda daba socda arrintaa Maxkamada dastuuriga ahi meel bay dhigtay waxay u taalaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland Muuse Biixi Cabdi. Luuqadii uu kula Hadlay Madaxweyne Riyaale reer Boorama ee uu saddexda kursi kaga qaaday raalina ku noqdeen, mushkiladiisii ayaa maanta taagan, waana taa maanta gashay maxkamada dastuuriga ah.

Waxaan leeyahay muuse Biixi ayey u taalaa haddii uu luuqad siyaasdeed kula hadlaayo reer Boorame iyo haddii luuqad dhan kula hadlaayo reer Boorame oo ku qancinaayo waxay u taalaa Madaxweynaha Jamuuriyadda Somaliland Muuse Biixi Cabdi. Wax halkan yaala oo ka baadh-baadhnaa aniga iima muuqato.

**Kootada dumarka;** Shareecada Islaamku waxay ka qabto ayaa inooga yaala. Xildhibaanaduna inay u tudhaan kana ilaaliyaan dibin-daabyada ubadkooda iyo ubadka soo socda ee ay dhali doonaan ayaa la inooga baahan yahay, Golaheenu aanu taariikh madaw samayn oo aanu dhex gelin kooto iyo wax noocaas ah. Wax diinta Islaamka iyo kitaabka ka horimanayaa inooma taalo, waxay u baahan tahay taariikhda ha inoo dhigina barrigaa Golaha yaa joogi jiray. Taariikhdaa waa in aynu iska ilaalinaa inay noqoto bar madaw oo ina raacda.

***Waxaan soo jeedinayaa*** in maalin qudha wax laga yidhaa maahee in maalmo badan wax la iska waydiiyo, ubadkeena mustaqbalkiina aan lagu lumen. Dumarku waxay xaq u leeyihiin wixii dastuurkeenu siiyey oo ah doorashada inay ka qayb galaa sharciguna wuu u ogol yahay. Waa lagu tuhunsan yahay dhaqaale dibada ka soo gala iyo mid ay leeyihiin labadaba. Iyada oo aan la eegayn kanay u dhacday iyo kanay u dhaxday. Hay'ado badan ayaa caawiya oo dhaqaale ku shuba ama diyaarba u ah inay ku shubaan si ay u soo

baxaan. Sharceecada iyo dastuurkeeni ma odhan kanaa laga tiro badan yahay, kanaa nugul iyo wax la mid ah ma odhan.

Haddii la eego sharciga Islaamu muxuu ka qabaa doorasho xitaa teenan ayaan xalaal noqonayn, markaa qofku waa inuu la soo baxaa qofka uu doonayo ee maaha qofku inuu yidhaa aniga ha la I doorto.

Waxaan leeyahay dumarka waxba uma yaalaan meeshan, inay isa sharaxaan ayaa u taalaa oo doorashada soo socota isa sharaxaan waanan ku taageeraynaa, laakiin in sakhaalado la isa saarsaaray ay ku imaadaan Golayaasha xeer dajineed iyo mid siyaasadeed oo aanay sharci ku soo bixin waan ka soo horjeedaa.

Iyada loo danaynayo umadda reer Somaliland gaar ahaan iyo guud ahaanba arrintaa hore ayaa looga hadlay oo xildhibaano badani aad iyo aad ayey uga hadleen. Sidii sharcigu siinayey ayey ku hadleen.

**Waxaan soo jeedinayaa** oo ku raacsanahay xildhibaanadii ka hadlay arrinka ah in doorashada laga horaysiiyo diiwaan-gelin waan ku ayid sanahay. Diiwaan-gelin haddii aanay jirin sidee wax loo dooran karayaa. Waa in la ogaadaa dadka doorashada galaya. Waan ku raacsanahay xildhibaanadii soo jeediyey.

Waxa kale oo aan ku raacsanahay musharaxiinta heer Gole wakiilo, heer Gole deegaan ama heer Madaxweyne maxaa u dabar ah, xeerka ma ku jiraa oo wixii xyidhi lahaa oo dabri noqon lahaa isna waa inuu jiraa.

**Md. Maxamed Cumar Aadan (Jiir)** **(17min 37sec):-** Bismilahi Raxmaani Raxiim. Kolay in badan ayaad dhagaysanayseen hadalka, maanta waxaan ka hadlayaa saddex Qodob. Saddex qodob waxna ku dari maayo wax ka dhimi maayo. Waxaan doonayaa in culimadu marjac ii noqoto, waxaan uga dhiganayaa marjaca inay diinta iga yaqaanaan. Anigu in yar ayaan ka yaqaanaa diinta, laakiin waxa jira dad iga badiya.

**Qodobka 1aad** waxaad moodaa waxa aynu ka hadlaynaa inuu nidaamka (procedure) aynu leenahay dhinac marsan yahay. Waxay intaan marka hore Guddi wax soo qorin Gole weynaha la ogaysiiyo loo keeno, laga hor akhriyo oo laga yar doodo. Si Guddida wax qoraysaa ay fikir uga qaadato oo eegto rayiga mudanayaasha qabaan, markaa iyaga waxay ahayd inay isku soo habeeyaan oo qorshe la yimaadaan.

Waxa jira wax ay dadka oo dhammi u qushuuceen, laakiin aniga aan ila qumanayn taas oo aan u baahan nahay inay ka hadalno oo aan isla eegno. Umad waliba waxay jeceshay in ay ku xisaabtanto xaaladaha (Conditions), dadkeenu ku jiro, nolosheedu iyo bii'adeenu ku jirto. Waxaan maqlaynaa in wadamada qaarkood lacago badan loo isticmaalo, xagay ka timaadaa oo doorashada marka la galaayo xagay ka timaadaa, dadkaasi maxay ka shaqeeyaan? Waxaan u malaynayaa in aynu wax yar oo noocaas is waydiino, ayna ku haboon tahay aynu is waydiino, Inay ku haboon tahay in aynaan

go’aan ka gaadhin lacag ha la bixiyo iyo yaan la bixin imisaa la bixiyaa iyo yaan intaa la bixin.

Asxaab siyaasiga aynu leenahay marka ugu horaysa waa saddex. Ma talan markay Madaxweynayaasha noqoto saddex qof ayaa la soo qadimayaa, haday Baarlamaan noqotana asxaabta ayaa keenaysa.

Waxaan anigu soo jeedinayaa in lacagta la bixinayo ee la leeyahay qofkaa laga qadimayaa in la baabiiyo oo meesha laga saaro ayaan jeclahay. Ma lihi raga lacagta haysta uun ha loo daayo, laakiin qofkii lacag ayaa la siinayaa oo cid kale ayaa siinaysa oo Nin deyn ku jira ayuu ku noqonayaa, kolay reero ayeynu samaysanoo doodii aan halkaa ka maqlaayey gidi waxbaynu daafacaynay oo gobolo iyo degmooyin ayeynu ka hadlay.

Dawlada iyo Barlamaan laba qodob ayey leeyihiin sidaynu meesha ku aragnay. Waxa weeye constituency inuu ka war hayo oo wixii mashaariic ee dawladdu qabanayso uga war hayo. Labaadna waa inuu national u fikiro oo haddii aad u fikir weydo tan constituency waxba noqon mayso.

Markaa had iyo jeer waxaynu arkaynaa in la leeyahay naga kuraasi ayaa naga maqan, anaga ha naloo kordhiyo. Wax kursi la kordhiyaa taraysaa ma jirto, waxa weeye intan joogtaa wax ma qabataa oo wax ma qabtaan weeye. Markaa xagii lacagtaan u jeedaaye si aan qofkaasi u noqon qof deyn qaba reerkiina aanu ugu xidhmin haddii lacagtaa laga daayo dhawr waxbaan is leeyahay waxbay ka taraysaa. Kolka hore qofku reernimadii wuu ka yar nafisayaa, reerkaas wax siinayaa deyn buu ku yahay, deynkaas waa inuu hadhaw iyaga gaar ahaan ugu shaqeeyaa.

Hadda magaalooyinka waa la wada degan yahay oo halkii aad halka aad degan tahay ugu doodi lahayd ayeynu ku doodaynaa kuraas reer hebel ha la siiyo. Waxa wanaagsan inii qof madax-bannaanaado in badan (more independent). Waxaan leeyahay kolkaa lacag wuu u baahan yahay ama ha ka hadlo T.V-yada sida dunida ilbaxa sheegata ama dad ha isugu yeedho oo geedihii ha u qaado dabeedna wax ha u tuuro, si kastaba ha noqotee waa in dawladu xilkaa qaadaa oo duruufta aynu ku jirno aawadeed tidhaahdaa qofkii madaxweyne loo sharaxayo xadi lacageed oo intaas ah ayaa la siinayaa. Markaa dawladdu ha ku darsato miisaaniyada, si aanu ninkaasi deyn u galin.

***Waxaan soo jeedinayaa*** in qofka musharaxa ah ay dawladu lacagta ka bixiso oo qof dawlada u deynsanaado, halkii qabiil u daynsanaan lahaa. Waxaan leeyahay ayeynaan ku dayn dawladahan iyagu shirkada lacagta ka deynsanaya ee u dabranaanaya.

**Kootada dumarka;** Kootadan la leeyahay ha la bixiso anigu horta ma lihi dumarka ha la eryo. Waynu dhalnay, wayna dhaleen, waa carruurteenii, waa walaalaheen, waa xaasaskeenii waa dad talada iyo noloshu inaga dhaxaysaa. Tacliin ayey yeesheen waxaanan aad u fahmin dimuraadiyada ma xaga ayaa laga eegayaa oo waxa la leeyahay

yaa damaanad qaadaya in aan wax la samaynayo haddii dumuquraadiyadi aanay jirin. Dimuquraadiyada diinta islaamka ayaa bilawday oo haddii aan qaldanahay culimadu ha I qabato. Nebigu markuu dhimanayey muu odhan hebel ha loo dhiibo, laakiin in dadku iyagu figradooda qaataan oo doortaa cid. Waxa uu sameeyey tilmaamayaal, laakiin cadaan uu yyidhi ababakar ha la doorto.

Dimuquraadiyada macnaheedu waxa weeye in dadku xor noqdaan, taasna ilaahay ayaa inna siiyey, qur'aanka iyo diinta ilaahay haddii uu doonayo amar ayuu kaga dhigi lahaa cid kasta.

Markaa bahasha ayeynaan siin dad aynu qoonsanayno ama gaalaa inooga horaysay odhanin. Magaca waa laga yaabaa in aynu isku diidanahay, laakiin waxyaabo kale oo badan ayaa jira. Inagu intaynu ka rabnaa waxa weeye magaca in doorasho dhacdo oo dadku xaq u leeyahay oo qofka ay doonayaan soo saaraan, qofka aanay doonaynina la yidhaa bannaanka mar. Anigu waxaan u malaynayaa ta aynu doonaynaa waa taas oo umad waliba inta ay doonayso way qaadataa, inta ay diidaysana way dhigtaa.

Waxaan odhan lahaa diimuquraadiyada aynu tuurno, laakiin waa in doorasho dhacdaa meel wanaag ka jiro way dhacdaa meel xumaani jirtana way dhacdaa. Markaa arrintu kootada ee shalay laga hadlay, aniguna waxaan leeyahay dastuurka waxa inoogu yaala in dadku siman yahay, haddii dad wax loo xidho anigu sidaan u arko xaqiraad ayaa ku jirta oo qofkii marka la leeyahay dadka la hayb-sooco, taasi waxay tilmaamaysaa dad la xaqirayo. Waa dad la leeyahay aynu wax u tuurno. Waa in dadkaasi kula tartamaan oo xisbiyada galaan oo amarada bixiyaan.

Waxaan leeyahay dawladu waa in ay sare u soo qaado oo Waxbarshadooda iyo dhaqaalahoodu kor loo qaadaa. Laakiin sidan aynu wadnaa waa xaqiraad in wax la siiyaa. Waana in la badiyaa si ay kuula tartamaan. Anigu ma arkayo inay sinaasho tahay in la yidhaa dadka la hayb-sooco. Waxaan odhan lahaa gabdhahu meel fiican ayey marayaan xaga tacliinta iyo dhaqaalaha, laakiin waa muhiim in ay meesha yimaadaan. Waxa adag in mansabka sare oo hogaamineed loo dhiibo oo waakii Nebigu yyidhi qoomka taladood dumar u dhiibaa way halaagmeen, laakiin aynu hubsano arrintaa diin ahaan ayaa odhan lahaa.

**Md. Cabdicasiis Ismaaciil Ducaale** (07min 09sec):- Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shirgudoonka iyo mudanayasha sharafta badan waxaan idinku hambalyaynaa keenista aad keenteen xeerkan oo mudo badan la sugayay isaga oo xeerka intiisa badani ay samaysnayd kaliya ay ka maqnayd markii hore arimaha saami qaybsigu in aad is baraxdaan oo aad xeerkan Golaha keentaana waa mid loo baahnaa.

Hadii aan gudaha u galo xeerkan aniga oo soo koobaya, ugu horayn arinta saami qaybsiga waynu ku ceebaysanahay waayo mudada intaa leeg ee wax laga qaban waayay, ceebtaas oo ay leeyihiin dawladihii xukunka u kala danbeeyay, waxan waa in aynu meel

iskaga tiirinaa maadaa oo ay Maxkamadu tyidhi waxan marqudha ayaa lagu galayaa, hadana waxaan qabaa in cidii wax tirsanaysa in xal la doono.

Sida hada ay xisbiyadu xalka u sameeyeen ee ay arinkii haweenka xalka uga gaadheen oo arimhii dastuurka ayaabay xalka gaadheen, dhanka kale waxaa iyaduna ceeb inagu ah in Maxkamada sare iyada oo dooda xeerkani socoto ay wax soo saarto waa mid aan wanaagsanayn oo qaranimadeena wax u dhimaysa waxayna ahayd in wax lagu muransanyahay laga garnaqo.

Qodobada uu soo jeediyay Xildhibaan Cabdiqaadir jirde ee ah in meelaha Gubanka ah loo kordhiyo maalmaha doorashada, sidoo kale qodobada uu Xildhibaan Ruush soo jeediyay oo ahaa in meelaha 5ta km isku jira yaan la badin waa in la isku soo dhaweeyaa oo u yaraan goobuhu ay isku jiraan 20km, dhanka kale hay'adaha uu magacaabo Madaxweynu waa political post ee yaynaan odhan yay doorasho ka qayb galin.

Waxaanad moodaa in dawladii timaadaba ay badalayso Agaasimayaasha iyo shaqaalaha oo waxaad moodaa in ay Civil servant iyo Institution kii inay kobcaan loo baahnaa in aanay kobcin.

Tiro-koobkan marwalba la soo hadal qaadayo miyaynaa odhan karin sanadkaa in aynu xeerba ka soo saarno in la qabto, waxaa kale oo aan leeyahay yaynaan inagu maanta balaayo sahadin, waxaa leeyahay meel aanay doorasho ka dhacayni ma jirto maanta, waa hadii la isla qaato.

Markaa hadii aynu nidhaa waxan ayaa dusha laga qaadanayaa, waxaan u arkaa in muwaadiniinta xaqooda lagu gafayo, sidoo kale waxaan leeyahay wixii farsamo ah waa in aynu hagaajisanaa, waxaa kale oo aan qabaa in shantii sanaba mar ay dhacdo doorashadu waana in ay xalinaa waxyaaban is dulsaaran.

Sidoo kale waxaa jirta in Golaha guurtidu ay soo saareen mudo ay doorashadu dhacayso ama ay yidhaahdeen wakhtigaa ayaa la qabanayaa doorashada waana xeer ilaa hadana Xal lagama gaadhin, iyada oo wali laga hadlayo doorashaa la qabanayaa. ***Sidaa awgeed waxaan Gudoomiye kaga Baxayaa in Maayirka la doortaana waa wax fiican, sidoo kale tirokoobkaana wax aynu ka soo saarno, arinka kootada waxaan leeyahay wixii siyaasad u baahan waa in aynu ku riixnaa xisbiyada wixii sharciyan loo baahanyahayna aynu baarlamaanka u dayno, wsc.***

**Md. Maxamuud Ismaaciil Xassan** **(18min 08sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shirgudoonka, Mudanayasha, Saxaafada iyo Marti sharafta kalaba waan salaamayaa, Gudidda Arimaha Gudaha Difaaca iyo Nabadgalyadu wax fiican ayay soo qabteen aad iyo aadna waan ugu mahadcelinayaa.

**Qodobka 5aad oo ka hadlaya xuquuqda cod-bixiyaha;** qodobkaasi waa qodob muhiin ah waayo deegaanadu isku mid maaha isku dabeecad maaha, oo meelaha qaar waa degaan rasmi ah meelaha qaarna waa dad reer guuraa ah oo reserve area ilaa xeeb taxan sidaa awgeed qodobkani waxa uu xadidayaa in qof uu ka codeeyo meeshii uu iska diwaan galiyay oo kaliya taasi oo keentay in dadka la daad gureeyo ama la raro oo dadkii %50 ama %30 uu dadkaa codkoodii uu lumo. Sidaa Awgeed ***"waxaan soo jeedinayaa in muwaadinku uu ka codeeyo marka ay doorashu dhacayso meesha ugu dhaw ee gobolkaa uu ka diwaab gashanyahay uu ka codeeyo taas waan adkaynayaa ragii horana waan ku raacsanaha".*** ***(3mudane ayaa taageeray).***

***Waxaa kale oo aan ku raacsanahay in sidii laga hadlay da'da qaan gaadhka oo uu ilaahay inoo jideeyay waa in laga dhigaa 15sano oo uu codkana sidaa ku bixiyo waan soo jeedinayaa.***

**Qodobka 78aad;** umad ayaynu nahay umadina waxay ku dhaqantaa ama ay ixtiraamtaa wixii ay dhigatay kuna dhaqantaa, sharciguna maaha shaadh free Zise ah oo qofba siduu doono isku leekaysiiyo waxbuu diidayaa waxbuu sheegayaa, waxna wuu ka aamusayaa, waxyaabaha aan la yaabanahay ee qodobkan ku jira waxaa ka mid ah Dastuurku meel allaale meel uu ku sheegayaa ma jirto, hadii se la yidhaa waxaa muu sheegin, waxay noqonaysaa in maalinta lug la fidiyo dastuurkana la fidiyo oo qof waliba meesha uu danaynayo uu soo gashado.

Wuu cadaynayaa habka wax loo dooranayo oo qodobka 18aad ayaa ka hadlaya in qofku wax dooran karo lana dooran karo isaga oo aan isir ku tiirsanayn, midan ku tiirsanayn sidaa ageed ***"waxaan qabaa in aanu ahayn qodobkaasi wax meesha soo gala waxaanan soo jeedinayaa in meesha laga saaro haween baanu soo gali karin, minority ayaanu soo gali karin ee waa in qodobkaa sidiisa lagu laalo ayaan soo jeedinayaa".***

Waxaa kale oo shaki saaran yahay qodobkaa farqadihiisa 8aad, 9aad, 10aad iyo 11aad oo la leeyahay hadi meel doorasho ka dhici weydo ama Degmo ka dhici weydo ama gobol ka dhici weydo qaabkaas ayaa wax loo qaybsanayaa waxaad moodaa in la sahlayo in doorashaduba ku soo ururto dhawr Gobol, sababahana lama cayimin oo waa mudlaq.

Taasi micneheedu saw maaha hada Boorame Buuq ayaa ka jira, ee ha laqaybsado. Laas-caanood ha la qaybsado"***anigu waxaan leeyahay waxaasi wax macquul ah maaha ee waa in meesha laga saaraa ayaan qabaa anigu"*** ama waa in lix-bilood ka hor la keenaa sababa macquul ah oo la qiimeeyay iyo waxa lagu saleeyay

***Golaha Deegaanka Waxaan Gudidda Ku raacsanahay da'da in lagu daayo 30jir sida ay gudidu soo jeedisay,*** dhanka deebaajiga halkan waxaa ku qoran lacago fara badan oo dadkii soo galay way garanayaane duruufo badan ayay leedahay, kharash badan ayay leedahay oo ilaa maalinta uu doorashada u isku taago ilaa maalinta uu kufsiga ku fadhiisto waxaa ku socda kharash ee ma waxaad doonaysaa in uu dadka calashado, *sidaa* ***awgeed waxaan soo jeedinayaa in deebaajiga halkaa ku jira la dhimo oo halkaa ay 20milyan ku qoran tahay waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo 15milyan*** *inta kale sideeda ayaan ku daynayaa"* lacagta dadka laga ururiyay xagee la gaynayaa lama cadayn *waxaan soo jeedinayaa in miisaaniyada qaranka oo ay ka muuqato ayaan soo jeedinayaa".*

**Qodobka 98aad;** bilaw ilaa dhamaad ololaha doorashooyinka waxaa ku soo koobi lahaa laba weeg (2weeks) waayo bahashu waa dhib badatay markaa ***waxaan soo jeedinayaa in labadaa weeg lagu soo koobo.***

**Qodobka 78aad;** waxaan ***soo jeedinayaa in lagu daro Farqad 12aad*** taas oo cadaynaysa in tiro-kood la sameeyo oo hal sano lagu dhameeyo, Goobaha doorashada Goobana way is dul saaranyihiin Goobana Galin ayaa loo soconayaa ee ***waxaan soo jeedinayaa in goobta ugu fog laga dhigo 20km. qofka u ordaya Golaha Wakiilada waa in isna deebaajigiisa la dhimaa ayaan odhan lahaa hana laga dhigo 40milyan.***

***Ugu danbayntii waxaan codsanayaa in soojeedimihii halkan ka dhacay in dhamaan tood xeerka lagu soo daro ayna ka muuqdaan.*** Aad iyo aad ayaan u mahadsantihiin wsc.

**Md. Maxamed Cali Xirsi (Obama)** **(11min 31sec):-** Gudoomiye aad ayaad u mahadsantahay anigu waxbadan odhan maayo wakhtigoo kooban dartii:-

Waxaan anigu aad iyo aad u Taageerayaa Qodabadii ay dhamaan ka wada hadleen xildhibaanadii iga horeeyay oo aan jeclaanlahaa in lagu daro soo jeedintaydaas oo ka mid ahaayeen Xildhibaan Xaamud, Xildhibaan Caraale iyo Xildhibaan Saleebaan qodobadii aan ka hadli lahaa ayay kawada hadleen markaa waxaan jeclaanlahaa in sidaa duub duub in aan uwada taageero Qodobadaa ay soo jeediyeen.

**Qodobka 78aad** runtii waxaan jecelahay oo mudan in aan halkan ka iftiimiyo in Golaha ay xildhibaano badani ka maqan yihiin, waxaan kaloo ku raacsanahay xildhibaankii iga horeeyay ee ka hadlaayay xildhibaanadaa maqan, manay ahayn in xildhibaanadii darafyada oo inta is urursadeen kana maqan Golaha, in uu Goluhu sidan sii socdo anigu waxaan qabaa ceeb wayn iyo fadeexad inay Golaha ku tahay in xildhibaanada laga daba tagi waayo, in xildhibaanada tabashadooda gooni loo eegi waayo, in xildhibaanada la qanciyo bay ahayd, in hadii ay iyagu khaldan yihiin la ansxa mariyo ayay ahayd.

Waxaa kale oo jirta in Golahan oo 30sanno soo jiray ahana Golihii ugu Sareeyay maaha in aynu sharaftiisa dhulka la dhacno isaga oo ah Golihii xeerka u dajinayay xukuumada, awdina lahaa qod-daloolooyinka qarankani uu leeyahay sidoo kalena xukuumada la xisaabtamo.

Mana aha in aynu qabyaaladi ina kala saarto oo xisbiyo is urursadaan, oo kooxo ay is urursadaan waxaan anigu u arkaa inay aad iyo aad u khaldan yihiin Golahana uu sharci ka yeesho shirgudoonkana waxaan odhan lahaa in aad nagu hogaamiyaaan Sharciga, in aydaan daawan oo aan aydaan nagu sawirin, waayo ceeb wayn ayay inagu tahay, waxanan qabaa in lawada hadlo. *(2mudane ayaa taageeray)*

Waxa kale oo soo ifbaxaysa oo aynaan isku wada diidsanayn oo dadkoo dhami wada doonayaan oo Gobolada, Dadka oo dhami doonayaan la iskagana midyahay in la sameeyo tirokoob oo la' istiriyo waxaan qabaa in sannadkan Golaha u hadhay in Tirokoobkaa lagu qaban karo, aadna waa u muhiim waayo waa waxa ay doorashu ay ku dhacayso,

Xildhibaanada Qaar ayaa waxay leeyihiin dhaqaala ku baxaya Tirakoobkaa anigu taa ma aamin sani ciidamadeena ardaydeena iskuulada, iyo Dadka jaamacadaha ka baxay ee boqolaalka kun gaadhayaa saddex ilaa afar bilood ay ku dhamayn karaan guri kasta cidii ku jirta ay soo tirakoobi karaan, sidii dowladahii horena kali Taliska ahaa ay samayn jireen iyo ardaydaa ayaa la diri jiray, markaa waxaan qabaa in aanay nagu adkayne in la samayn karo Tirakoobkaa, waana in aynu dawladana aan ku amarno *(2mudane ayaa taageeray)*

**Qodobka 6aad** waxaan qabaa in ayna xildhibaanadu ayna nuxurka qodobkani uu ku salaysan yahay aanay fahmin ama aanay aad ugu fiirsan wuxuuna odhanayo waa korodhka, mudada aynu fadhinay waa **15 sanno** waxayna doonayaan in lasoo af-xidho qodobadan baana soo af-xidhaya waxaanaan qabaa in qodobadan ay qaranka guusha ugu wayn ee uu qarankani gaadhay ee uu xeerkani sheegayo mudadii korodhka ahayd oo lasoo af-xidhayo waxaanan filayaa in aynaan taa qiimayn laakiin qiimaynta saxda ahi ee ugu mihiimsani inuu qodobkan yahay waana qodobkii ay guurtidu ku kordhin jirtay.

Manuu ahayn Dastuuri ah waxayna ahaayeen qodobka **83aad iyo qodobka 42aad** ee ay Golaha guurtidu ay awooda u lahaayeen qodobkaasina waa sidiisii waxaan jecelahay in qodobkaa guurtida loo daayo. Maadaamo oo uu yahay qodob dastuuriya.

hase ahaate qodobkaa wax lagu kordhinayay hadii Golaha deegaanka loogu kordhinayay, Hadii Madaxweynayaal lagu kordhiyo iyo hadii Golaha Wakiilada lagu kordhin jirayba wuxuu ahaa Qodob khaldan sidii dastuurku qoraayo, may iman Aafooyin qaran, may jirin dhul gariir, mayna iman wax koroona dadka oo dhan saameeya hase ahaatee dhacdo dhacday darted caado la caadaystay darteed ayaa had iyo goor korodh ku iman jiray.

Waxan xeerkan ka shaqayntiisa ku hambalyaynayaa Gudidda Arimaha Gudaha, ta kale hadii doorasaho farsamo ugu dhicii waydo waa in si dhakhso ah xal loogu helo, sadexda Farqadood ee ka horeeya siday guddidu usoo dhigeen ayaan taageersanahay, taana waa inaynu xoojinaa oo adkaynaa oo u fiirsanaa fiirsanaa.

Suurto galna ma tahay is waydiino, **Qodobka 4aad** sidiisa ayaynu ku daynaynaa, ta kale hadii doorashooyinku wakhtigii loogu tallo galay ku qabsoomi waayaan waxaa go'aan ka gaadhaya mudo xileedka komishanka doorashooyinka oo la tashanaya xisbiyada qaranka ama ururada siyaasada muddo aan ka badnayn lix bilood waxaana sidaa wareegto ku soo saaraya madaxweynaha mudo aan ka badnayn **15**cisho gudohood, waxa la wareegay shaqadii Golaga Guurtida komishankii,komishankuna waa **11** qof waana shakhsiyaad shakhsiyaar aynu gacanta u galinay in ay soo qimeeyaan soona mudeeyaan Mudadii bay keeneen mudada oo keenaan waxay la tashanayaan xisbiyada qaranka, dabar ayaynu u yeelnay halkaa mana diidayni, lakiin lix billood gudahood kama badin karaan, waayo way xidhan yihiin, waana aaminaad anynu hayno waana waxyaabaha keenaya in komshanka lagu kalsoonaado.

Qodobka labaad ee Iyana aan ku xidhay waxa weeyaan daneeyayaashiina, sida sadexdii xisbi way ag-fadhiyaan komishankii oo xiliga la qabanaya ayna ka ag-maqnayn xisbiyada mucaaradku taasina waa aaminaad labada oo aan siinayo, waxaana qabaa in ay xisbiyada mucaaradka ahi ay ilaashadaan doorashada in aayan lixdaa bilod dhaafin, laakiin hadiise ay lixdaa bilood dhaafto farsamo Darteed maxaa dhacaya? Ta aynu rabno in aynu ka jawaabnaa waa taa oo maxaa talo ah la yidhaahdo haday dhaafto ama doorashada dib loo dhigo, ma Guurtida ayay ku soo noqonaysaa ma komishankaa mid kale samaynaya xaalku sidee ayuu noqonayaa,

**Qodobka 6aad** hadii aad eegto ee tii Madaxweynaha oo iyaduna muhiim ah, hadii ay doorashooyinka madaxtooyadu qabsoomi kari waydo sidoo kale in ay qabsoomi kari weydo waxay la tashanayaan xisbiyadii go'aan ayna gaadhayaaan lix bilood gudoohoodna ayaanay ku qabanayaan, waxaana taa wareegto ku soo saaraya madaxweynuhu ku soo saari maayee, Golaha Guurtida, markaa ma Golahaa la dhexdhigayaa oo ka doodayaan, ma gudoomiyaha ayaa u saxeexaya ilayn waa wax lagu soo heshiiyee maxaa iyagana xyidhig ah ee u yaala? waxaan qabaa in ay u codeeyaan waxay labada xisbi iyo komishanku ku soo heshiiyeen, oo ah lix bilood gudahood ta ugu muhiimsan ee aan ku Daraya waxa weeye lixdii bilood bay dhici wayday oo ay dhaaftay ma qodobkii hore ee Dastuuriga ee hore baa la raacaya anigu halkaa ***waxaan kasoo jeedin lahaa laba qodob in aan qodobkaa lagu celin ee la sameeyo Coalition Government oo ah madaxweynaha xiligaa jooga iyo saddexda xisbi qaran, oo ay xukuumada ka wareegto ayna u wareegto*** *Coalition waxaanan qabaa in ay taa ku saxmayso.*

*Qodobka labaad ee aan soo jeedinayaa waxa weeyi hadii ay doorashadu farsamo ku dhici weydo waa in Golaha Guurtida Awood loo siiyaa in ay waxay doonaan gadhka u galiyaan oo 2 ama 3sano ah ayaan soo jeedinayaa, lakiin waxaan anigu qabaa in meesha ay timaada coalition Government oo madaxweynaha xiligaa joogaa aanu cidna awooda siin ee sidaa ay inaga so oaf-xidhanto wsc. (3mudane ayaa taageeray).*

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada**
_______________________________________

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSL**
_______________________________________